**#ASHAACIRO JIILKOODA CUSUB**
**MA RUMEESNA CADAABUL-QABRIGI.**

**-----------------------------------------**

# JIILKA CUSUB, ASHAACIRO, MA RUMEEYSNA CADAABUL-QABRI.

**2025**

**-------------------------------------------------------------------**

>>*Qalinka: ZEEYLAC-BAALLI/waana Qalinkii ASHAACIRADA*<<

**------------------------------------------------------------------**

## CADAA-BUL QABRIGA, QURAANKA MA SHEEGIN WAA QURAAFAAD CAQIIDO NALOOGA DHIGAY.

## MAQAALKAAN & MIDKA XIGIDOONA WAXA LAGU LAFA GURAAYO WAA MOOWDUUCAAS.

**------------------------------------------------------------------**

# QISO:

**Xalay baan cirka uduuloo CARSHIGAAN** ka saramaray

JANAATU CADNIN baan hoos usoo'eegay

Maqaamkaas sare sababta aan ugu socdaalay baa ah MOOWLIIDKA dhigidiisa.

Carshiga meel ka sareeyso hadeey jirto MOOWLIIDKAAN ku dhigi lahaay.

-Jiritaanka CARSHIGANA, JIINBAARTOOW

Lameel yahay.

CILMI-Boodhari ayaa baabkaas iiga horeeyay

Bilcaan caashaqeeda waa ceeb ayeey dheheen markaasuu beeydkaan gabayga ah tiriyay"

{*Caashaqa haween waa horaa Caadil soo rogaye*

*Sayidkii carshiga fuuliyo Caliba soo gaadhye*}

Cilmi Boodhari.1900-1940.

-Sida Gabaygiisa ka muuqato Sayidka ayoow Carshiga

dulsaaray sayidkaas oow sheegaayana waa Nabigeenna.

Isagana waxaa ugasii horeeyay

Weligii SUUFIGA ahaay  Sheeq C/qaadir Jiilaani /kiilaani/jiili.

Sheeq C/qaadir waa cadeeyay Carshiga cida fuuli doonto

Inoow yahay Nabigii CADNAAN ahaay

ASHAACIRO hadaa nahay kuma qilaafin arinkaas ,balse

inta kale ee lagu kordhiyay sheekada ayaan ka diiday sheeqaas.

-Nabiyada dhamaantood Carshiga ayeey hoos harsan doonaan ayeey dheheen Muslimiinta.

-Sariir hadii aad Qorax ka hergashid dusha sare in aad fuushidna xaaraan kama ahan.

Moowliidka marka aan ka hadlaayo ayaad arki doontaa qoraalkaas oo faahfaahsan.

=========================================

**Aqristoow Culimada agtooda ma ku caajistay**

Cilmiga eey hayeen intaad wada dhageeysatay makula noqotay cajalad Aad ku soo celceshatay dhoowr mar dhageeysi ahaan.

**Cilmi cusub** kuna saabsan Diinta.

qof doonaayo matahay?.

AHLAL QURAAN ayaa nahay

xogo cusub ayaan Bulshada kula wadaagnaa Agteena.

qeeybaha danbe ee isla qormadaan

Waxaan kugula wadaagi doonaa cilmibaaris cusub taasoo aadan weligaa ka maqlin Culimada Soomaaliyeed &kuwa Carabta ah ama kuwa cusub ee Af Ingiriiska kusoo gudbiyo

Diinteena suuban.

Waa xog cusub oo kasoo korortay

Qofka markoow dhinto Qabriga miyoow ku dhex noolyahay mise .

-Nabi Muxamad hadeer xagee ayoow ku nool yahay?.

-Nabi Ciise xaguu joogaa isaga?.
-Soomaalida ayaa ku maah-maahday "waa la hadlaa ee iska hadal looma hadlo"
balse maxaa haray oo hadalka ka dhiman aan ka hadlee ayaa loo hadlaa.
Buug ama Maqaal marka aad qoreeysana
maxaa cusub oo aan soo kordhin karaa ayaa loo qoraa ama TV-GA lagasiidaayaa .
wax cusub hadii aanan Seeylada la keenin , Suuqa ayaa zaxmada lagu kordhiyay.

-----------------------

## >Qaababka wax looqoro bal aan qeexo<

qof walba oo Qalinka qaato wax qorisna ku foogan.

7 jid mid kood ayoow marayaa

1- wax cusub qoraalkiisa.

2-wax kala dhinaay dhameestirkiisa.

3-wax shiilnaay sharixidiisa. kala furfurka maadooyin la adkeeyay.

4-Buug aad u dheer soo gaabintiisa.

5-maadooyin isku dhex yaacsan habeeyn tooda.

6- walax mufakirka oow qalday ,gefkaas toosintiisa.ama cadeeyntiisa.

7-wax kala tagsan isku keenistooda.

--

hadalkaas waxaa yiri SHAMSA DIIN AL BAABILI.

qoraal ahaana halka aan ka soo aqriyay bal aan sheego.

BUUGA,"DASTUUR, AL AKHLAAQ FIL QURAAN"

Qore: Sheekh Maxamad Cabdulaahi Daraaz.

1900-1960.

-sheekhaas dadka oow wax soobaray waxaa kamid ah SHeekheena Yuusuf Alqaradaawi
dhanka AKHLAAQDA QURAANKA ayoow ku taqasusay Sheeqaas, Buugaagtiisa Dadka weey amaaneen anigana waa la ii aqriyay dhamaantood Quraanka sida oow uga hadlay qof uga hadlay waa yaryahay. qoraalo kale ayaan si gooni ah uga warami doonaa sheeqaas. hana la aqristo Buugaagtiisa siiba AHLAL QURAANKA yeysan moogaanin.
- inkastoo xiliga oow soobarbaaray GUMEESTE oow ku hoos noolaay, hadana xiligaas Masaarida Qalinkooda xor boow ahaay.
-Nabi CIISE xukuumadii Roomaanka ayoow ku hoos nooyaal.
Nabi Muxamad sidoo kale Carab jaahil ah ayaa hadba dhan u ceeyr saneeysay .xageey ku nooshahay?

xiligee ayaad noo shahay?
wax muhiim ah ma ahan balse waxaa muhiim ah maxaa Xabadkaaga ka dhex guuxaayo.
=================================================================================

**#Qoraalka AFSOOMAALIGA.**

= Xarfaha qaar, qoraalkooda waan bedelay.

[Th| ayaan adeegsanayaa sida Cathay|ithil|Itho. iwm.

- Caday/Ido./idilkood.sidaas uma qorayo qoraalkeeyga.

==================================

# SUUFIYO Hadaa tihiin waxbaan soosidaaye

ha sugi waayin

Maqaalka ,qeeybtaan soke ee aan soo hormariyay sokeeye wax ku saabsan kuma qorin

waa qoraal aan ugu talagalay guud ahaan

MUSLIMIINTA Dudniga SUNNI&SHIICO.

**Qolo walba qodobo ayaa meel ugu qoran**

waxeeyna rabtaa in laga qaato waxaas eey iyada ku qanacday.

**-Maxaa laga rabaa SUUFIGA?**

-Qofka Qabriga ku jiro ama Xabaasha, haloo duceeyo balse

yaanan loo aadin in oow isaga noo duceeyo.

**Reer Aala Sacuud** kama diidin arinkaas.

daliil kooda waxa waaye Aayad Quraan ah .

(yoowma yajmacu laahu rusul fayaquulu maadaa ujibtum qaaluu laa cilma lanaa )

-Nabi Ciise markii la dheelmiyay kadib waxa dhulka kadhacaayo war kama haayo , Nabi Muxamaddna waa lamid waxa aad ku sugan tahay war kama haayo.

فَلَمَّا تَوَفَّيْتَنِى كُنتَ أَنتَ الرَّقِيبَ عَلَيْهِمْ وَأَنتَ عَلَىٰ كُلِّ شَيْءٍ شَهِيدٌ

[Maa`ido.118]

**-Qoomkalana waxoow yiri**

Heesaha kama maarano ee waxa ka qaldan halaga saxo heesaha balse yaan lawada tuurin. haye baan iri aniga

Ibnu Xazmi baa igu raacay.

Sheeq C/KISHKI isna waxoow yiri waan idinla qabaa arinkaas.

-Suufinimo waa Qalbigoo xumaan laga dahiro Xuska Eebbe oo aad loo badiyaa. ka horna qofka waa in oow bartaa Salaada & Soonka & Xajka & Tafsiirkiisa Quraanka. habeenkii cibaado ku daalaa maalintiina xamaali noqdaa.

**Imaamkeena SUUFINIMADA**

waxaa ah Gazaali.

hadii lawaayana Qusheeyri.

hadii aan wax ka sheegno Suufiyada iyagaas ayaa Imaam noogu ah wax kasheega SUUFIYADA.

**XULUUL** waa Illaah oo lala midoobo waana wax xaaraan ah. ninkii Xalaaj ahaay cilmi kama qaadano.

-Qasiidada ibnu binta Muleeyqa Masaajidka kuma dhex aqrino balse Kitaabka "Ixyaa Culuumudiin " ayaan aqrisanaa.

-Diinta Xigmad ayaa lagu fasiraa xigmadana lama helo hadii aanan Rabi kugu ilhaaminin. Albaabka Ilhaamka lama furo haduusan Qalbiga saafi eheeyn. qalbi saafi ahna lama helo haduusan qofka werdiga badinin ama daaqada kasoo gelin markoow in badan ku dadaalay barashada cilmiga AAKHIRO.

**-Reer Aala Sacuud** Salaada waan la dukanaa waxa eey qalaan waa noo xalaal waana loo guuriyaa gabdhaha waana ka guursanaa waana Muslimiin , dhiigooda xaqdaro in aan ku daadino nooma banaana waa walaaladeen balse naga aragti duwan waxeey nagu qilaafeen waan ugu cudurdaareeynaa Dalkaa naga wada dhexeeyo.

**-Shiico waa Muslimiin**, Suniga ka moowqif duwan qiblada ayeeyna udukadaan Salaada Soonka Xajka.shanta tiir Islaamka ayaan walaalo ku nahay Waxeey nagu qilaafeen waan u

cudurdaareeynaa waana weheshaneeynaa inta eey na walaasha-naayaan.

**-AKHWAAN MUSLIMIIN** waaba ehelkeena. Umadaan guud ahaan iyagaa aad noogu dhaw. Imaam keena  weeynaa Sheekh Yuusuf  Al-Qaradaawi  ayaaba iyaga ka tirsanaay sidookale Sheqeena Maxamad Al gazaali.

**-Ashaaciro ayaa nahay** weliba Dhiiga cusub.

qaar la jaanqaadi karo Jiilka cusub ayaa nahay.

4 Mad-hab waan ku dhaqanaa siiba Maalig Xanafi & Shaafici.

maandhaqi meeyno qofna  Mad-hab eey ku qanacday darteedna ula dagaalami meeyno .

Mad-hab walba asal ahaan  AHABTA  ama Milladda ayaa laga soo minguuriyay.

==============================================

Maqaal ku saabsan  Anshaxa ayaa qabyo noo ahaay.

**>>DAD LADHAQANKA WANAAGSAN>>**

**[BARASHADA, AKHLAAQDA SUUBAN}**

**#cilmiga Bulsho ladhaqanka suuban<**

1-AAD

2-AAD

3-AAD

4-AAD.

afartaas qeeybood ayaan qoraalkooda idinla wadaagay

Qeeybta (5-AAD)

hakad ayaan  geliyay.

marka aan kasoo faraxasho qorida

**3- MAQAAL**

ayaan dib ugu laaban doonaa wax ka qorida AKHLAAQDA SUUBAN .

**maxeey kala yihiin MAQAALADA 3 ah?**

**- mid ku saabsan** Moowliidka Nabiga 2025.

Nabiga ayaan amaani doonaa. xuska Nabiga xalaal ahaan shiyahiisa ayaan Aayado Quraan ah u keeni doonaa Axaadiitana weey ku lamaanyihiin.

Mobilka & Nedka &TV-ga & Tusbaxa sida aan u xalaashanay Aayad& Xadiisba ugu keenay xalaal ahaantooda XUSKA NABIGA ayaa igala fiican

in Aayadaha loo soo daliishado.

Rabi waxoo yiri

وَٱذْكُرْ فِى ٱلْكِتَابِ مَرْيَمَ

Quraanka ku dhex xus Maryama.

Nabi Muxamad ayaan maqaal ku dhex xuseeynaa weliba isagoo JANADA dhex joogo.

**-mid ku saabsan**

CADAABUL QABRI. QURAANKA MASHEEGIN WAA QURAAFAAD CAQIIDO NALOOGA DHIGAY.

**-Maqaal ku saabsan** Sheeq Cusmaan Xidig.JANNADA maxoow ku soo dhex arkay!?.

**DHANBAALKII  DENBI DHAAFKA**

ama

**MAQAALKIISA DENBI DHAAFKA**

waxaan qoray 2024.

qaabka aan midkaas u qoray ayaan isagana inoogu qoray

hagaajin baa u hartay balse waa mid waa hore Qalinkii lagu qoraayay qadiisa  dhamaatay

**----------------------------------------------------------------------**

**-sanadka waa 2025**

Nabiga xagee ayoow ku dhex noolyahay

**Xabaasha mise JANADA?**

**---------**

**CADAABUL QABRI  QURAANKA MASHEEGIN WAA QURAAFAAD  CAQIIDO NALOOGA DHIGAY.**

==================================

# #Jiilka cusub, ASHAACIRO

JANO & NAAR

wax u dhexeeyo majiro beey dheheen

CADAAB AL QABRI MA JIRO AYAA NIRI.

hadalkaasna quraafaad qof iska yiri maahane waa QURAAN Eebbe keenay.

-Digsiga debka saaran inta aanan daboolka ka qaadin

waxa ku dhex karsamaayo ayaan kuu sii sheegay.

**MOOWDUUCA aan ka hadli doono**

qof 40 jir kor udhaafay ama ku hoowlan cilmi baaris dhanka Cadiiqada ah ayaa jecel aqrinta moowduucaan balse qof dhalinyaro ah CADAAB AL QABRI wax oow xiiseeyo ma ahan. qof waayeel ah oo keeyd cilmiyeed oow wax ku kala miizaamo leh ayaan u qorayaa qoraalkaan.

balse qof caami ah moowduuca mid quseeyo maaha.

===========================

# #BARASHADA CILMIGA

#2025-Cilmiga

hadba waxa aad ubaahan tahay ayaa kuu muhiimsan.

tusaale:

waxaad ubaahan tahay dawo calool xanuunka kaa daweeyso, marka aad ka qaadatid Farmashiga, dhaqtarkaas

waad ka maarantay oo uma baahnid agjoogiisa.

cilmiga ayaa la mid ah hadba midka kaa maqan waa inaad raadsataa

qof cadaw kuu ah ayaa heenkaro cilmiga aad markaas u baahan tahay ee kaa maqan, ama waxaa heenkaro qof saaxiibkaa ah.

==================================

**#CADAABTA QABRIGA.MAXAA KA RUN AH?**

-Albaabada Janada, hadeer waa kuwo,qofolan,Handaraab Qataar ayaa saaran sideey,aaminsan yihiin Dadkeena.

Awoowa-yaasheena ayaan ka dhaxalnay sidaas balse DIINTA MASHEEGIN.Quraankana kuma dhigna.

-Ilmaha Ubadka/dhasha/Kurayada/Caruurta/ ka farcamay Nabi Aadan midka ugu danbeeyo markoow dhasho

oowna dhinto,Aduunkana larogo oona Dadkoo ithil laxisaabiyo kadib ayaa dhamaanteen halmar wadageli doonaa JANNADA

Sidaas beey nagu soo barbaariyeen Culimadeena AHLASUNA siiba ASHAACIRO.

safka kale ee SHIICADA iyagana waaa nala mid intaas beey rumeeysan yihiin.

---------

**#MAQAALKA NUXURKIISA HADII AAN KU SIIYO WAXOOW KU SAABSAN YAHAY QOFKA MAANTA DHINTO JANO AYOOW U HOYDAY BALSE QABRIGA KUMA DHEX NOOLA.**

**INTA DHINAC LAGA DOOXO XABAALAHA MIRAHA JANNADA HALKAAS KUMA DHEX CUNAYO QOFKA DHINTAY.**

**-----------------------------------------------------------------**

# ▪HORDHACA.

(Rabanaa laatajcal fii quluubinaa gilan liladiina aamanuu)
Imaam yadeena xadiiska Muslim & Bukhaari & ZEEYLICI, dhamaantood ,madaxa ayeey noosaaran yihiin.
Moowduucaana kuma saabsana Axaadiista in ladiido.Duruufta eey Axaadiista kudiiwaan geliyeen ruux soodaalacdaan ahay,diiwaan gelinta Xadiiska duruufo badan ayaa laga soo maray
Culimada weey ka cararijireen ardayda,sida Culimada maanta joogto ma ahaan jirin.

■**Masaajidka** xerbadan markeeysan joogin  caajis Baan

dareemayaa. hadii eey xalaqadeeyda dad badan,sooba xaadirin.Tv ama Idaacada,ama,baraha,bulshada taageera-yaasheeyda mabadna ,midaasna iimaqalanto aniga, beryahaan sidaas baa la gusheekeestaa.ragaas Axadiista  lagaqoraayay qaar culimadaas ka mid ah ,

ardayda  hadii eey ka bataan 10 ardayd weey,kacarari,jireen.

■Akhlaaq ahaana dhaqankoodaas ayaa ah midka suuban waayo

20 arday kabadan  wax lama bari karo.

[Dhaqtarka 20 bukaan ah ka badan ma daaweeyn karo.hal shirkad Dalka badeecada in eey usoo saarto looma baahna.hal masaajid kuma wada dukan karo.hal gobal Umada in laga wadaxakumo ayaa qalad u arkaa.hal jaamac in Dalka Ardayda joogto dhamaantood lagu xareeyo ma fiicna.hal qof inoow shirkada Sonkorta mida Saliida mida Dawada isaga wada maamulo Dadkoo dhan ku dawa feeylaan ma fiicna .nuxurka sheekada ayaa ah hoowsha halqof  mawada qaban karo hala wada qeeybsado. Sheeqa ku faanaayo 1000 Arday ayaan wax baraa maalin walba =wax nuxur leh ma baro Caruurtaas. ]

Culimada qaarkood waxeey  diidanaayeen  in Xadiiska nabiga,laqoro lana diiwaangeliyo Cumar bin khadhaab ayaa kamid ahaay kuwaas waxoow yiri
Reer Ciraaq,Quraanka hala baro  kanadaaya Xadiiska nabiga barashadiisa.

■Cumar waa isaga ninka diiday in Dadka loosheego qofkii

Toowxiidka qiro in Jano loogu bishaareeyo

■Waxaan dhihi rabay in eey naga maqan yihiin Xadiisyo badan

oo taageero u ahaan lahaay MOOWDUUCAAN aan ka hadli doono.
imisaa badan xadiiska oo isqilaafsan.
Aayado Quraan ah hadii aan miiska soosaaro halkaas waxaa kuqarsoon xadiiska Aayadahaas faahfaahinta u noqon lahaay in aanan la diiwaangelinin.
waa suuragal arinkaase yaanan ladiidin sida aan aayadaha usoodaliishado.

■**Qofka** waxoow aaminsan yahay ayoow Diinta daliil

uga,deydeyaa
,Imaam Al-Bukhaari inta oowsan qorin,Xadiiska Nabiga waxoow Ku cibaadeeysan jiray Qabriga Nabiga agtiisa
Halkaas waxaa kaaga cad inoow aaminsanaay in oow Nabiga,Ku dhexnoolyahay Qabriga dhexdiisa .

-moowduucaan in laga ilduufay waa macquul.

in ulakac loo qariyayne waa suuragal.

Qofka Xadiiska Nabiga isagoo garanaayo Ardayga ka qariyo AHLLAL XADIISKA waxeey u yaqaanaan

(mudalis=hoos geliye/ ku been abuurte)

hadii aanan qaldaneeyn

Waaleeyga fiicanyahay cilmiga Xadiiska.

qofkii rabo barashada Xadiiska weliba isagoo dunida meel fog kaga sugan cirifka shishe, halka cirka iyo Dhulka iskaga tolan yihiin isagoo ku sugan

ww.sheekhmaalin.com

ama

ww.NUURALIIMAAN.Com

ha ka dhageeysto Casharada Xadiiska Nabiga.

Muqdisho hadii aad ku nooshahay Moowlaca Sheeq Maalin wax ku baro Ardayda waad sooxaadiri kartaa.

-xusuuso xiliga oow Cumar maqlay Nabiga oo dhahaayo qofkii qiro Toowxiidka ugu bishaareeya Jano ayoow gelayaa.

Cumar waatuu yiri yaanan layeelin sidaas dadka weey isdhiganayaan ka caajisaayaan cibaadada .

Waatii MAD-HABTA QADARIGA Dadka qaarkiis aad u qaateen qarniyaal kadib markoow Nabiga dhintay.

wax walba oo xumaan ah inta lagu dhaqaaqo Ilaah ayaa GAFUURU RAXIIM ah loodaliishaday .

Imaam Al-Bukhaari qof mad-habtiisa QADARI tahay waxba kama qoraayi ayoow dhahay . hadii arinkaas run tahay Culimo badan ayaa cilmigooda nalaga qariyay

Mad-habtooda oo QADARI ah dartood.

Khawaarij haduu Cilmi ka qaatay, Bukhaari waa ku qaldanaay inoow xaqiro Culimadaas.

--------------

(1)ZEEYLICI=Kitaabka Axaadiis al hidaaya ninka sharaxay waaye.800 sano kahor boow noolaay waana wadaad Soomaali ah ama OROMO ama Canfar, aqoonta Xadiiska Albaani waa ka maqaam sareeyaa , balse Albaani Imaaraadka ayaa maalgeliyay ujeedo ayaana loo maal geliyay oo ah in lagula dagaalamo Ururka IKHWAANKA.

inbadan isaga oo ka hadlaayo kuna dhegan Ururkaas ayaan aragnaa.10 sano kahor

Kutubada aan qoray ayaan ku cadeeyay arinkaas.

-Akhwaanka waxaa murshid looga dhigay Maxamad Al-Gazaali & Yuusuf Al qaradaawi.

Qarnigaanna waa QARNIGII QARADAAWI.qofka aan hadalkaas igu waa faqinoow

Qalinkaaga qadiisa Qaaradaha aduunka halaga wada jeclaado , cidna iyadoonan qarash ku maalgelinin .

-Diin oow Imaaraadka maalgeliyay ama Sacuudiga ama Masar ama Doowlad uun wax u meerisay barakada ayoow Eebbe ka qaadaa.

-Zeeylici cid maalgeliso ayoowsan helin .hadana Kutubadiisa Rabi ayaa barakeeyay Qalinkiisa ayaa barakoobay, Ibnu xajar Al casqalaani markoow sharaxaayo Fatxal-baari Buugaagta miiska usaaran oowna soo xiganaayo ayeey ka mid yihiin Buuga sheeqaas qoray.

{ cirka & Dhulka halka eey iskaga tolan yihiin .Soomaalidii hore ayaa sidaas dhihi jirtay sida aan ka maqlay Abawaan QIIQ}
========================================

■**maxaa** hada kusoo begay in aan kahadlo Aayadahaan &

Axaadiistaan 50 kor u dhaafsan dhamaantoodna dafirsan.

**>CADAABTA QABRIGA<**

**2024 maqaal** ayaan qoray aan kaga hadlaayay qaabka loogu dhex noolyahay JANADA.

Xiligaas ayaan soohadal qaaday moowduucaan balse xiligaas daliilka aan helaayay ma xoogbadneeyn

Marwalba aan aqrinaayo Quraanka waa mid iga soo horbaxaayay moowduucaan.

hadeer Waan usoo daliil badsaday doc walbaana ka istaagay ,hada ayeey haboontahay inaan soo dareeriyo.

=========================================

**#yaan ugu talagalay Qoraalkaan?**

hadii aadan aheeyn Qof muslim ah

Maqaalkaan ha aqrinin

Hadii aad aqrisidna maanka ku haay

Waad ku soo muslimi doontaa mardhow ama mardheer

Waa haduu moowle kula jeclaado hanuunka

-Maqaalkaan uma aanan qorin qof aanan Muslim eheeyn .
=====================================================

# HORDHACA

## Cadaab alqabriga.

HIBAAQDA ama REEXAANTA uduga leh **Qabrigaaga** ALLAHA kadhigo. mid Ileeys nuurka leh Kaaha loo iftiinsho Allaha ka dhigo QABRIGAAGA.
Sabuulka Janadana ka dhex baxay kii ku dhex cuno Eebbe ha kaa dhigo. Sabuul Galeey ama ARABAKHIDA

hadba sidaad u taqaanid adiga•

----------------

■**waxaa jiray Dad** diidanaay in axaadiista la faafiyo

Abuu hureeyra waatuu yiri laba  Jawaan ayaan haayay oo Xadiisyo ah, hal jawaan ayaan idinla wadaagay =jawaan maqan ayaa jiray.

MUDALISIIN ayeey ahaayeen kuwaas Xadiiska Nabiga naga qarsaday balse **Quraanka ayaan waxba ku dhex qarsoomin** waana ka dhex heleeynaa moowduucaan aan u hamuunta qabnay.

**Cadaabal qabri** in eey wax ka qaldan yihiin waxaa kuu daliil ah

NACIIMAL QABRI lagama faaloonin .

Qofkii  dhintay xiligii Nabi Aadan  noolaay   ilaa hadeer, GODKA/ QABRIGA / XABAASHA ayoow dhex hurdaa JANO ayaa halkaas looga dhigay.

nuxurka sheekada Culimada waa intaas.

hadii hadalkooda la tixraaco natiijada ka soo baxday waa sidaas.

**Quraankana waxaa ku qoran** Muuminiinta markeey dhintaan Xaasaskooda & Ubadkooda ayaan ugeeynaa Janada dhexdeeda. bal qiyaas ninkii Aadan dhalay ee dhintay ilaa hadeerna ku dhex xaniban Qabriga dhexdiisa Aqli maahan Diintana sidaas ma dhihin .

**-Nabiga ayaa furi doono Janada.**

taas waa run waana marka labaad ee loo dareeraayo Janada weliba Umadiisa ayaa ugu horgeleeyso Umadaha kale iyagaa kaga horeeyn doono Insha allaah.

----------------

# .TALO AAN SIIYO QOFKA QALINKA KU QARAABTO.

Cilmi baaris cusub hadii aad ku hoowlan tahay .

Hadii eey jiraan wax  Dadka Islaamka ah uwada dan ah balse cilmi ahaan qarsoon.

Eebbana kugu ilhaamiyay adiga.fadlan  Umadaada lawadaag ,moowduucana docwalba ka istaag

Lasheekeeyso qofka qalinka kugu naqdin doono 1000 sano kadib. ama ku arki doono suuqa Qoraalkaaga.
la sheekeeyso qofka ugu garaadka sareeyo uguna xogogaalsan moowduuca aad ka hadleeysid.
dheg ha udhigin Dadka muqalidiinta ah hadalkooda
hadii aadba ku qanacday xogta aad sida wanaagsan u soobaartay.

## -cudurkii KAROONAHA.

waatii TALAAL loo helay Aduunkana laga dabar jaray
inta iska talaashay baan ku jiraa oo Rabi talada saaratay
culimada caafimaadka taqasuskooda ayaan qadariyay.
waloow eey jiraan cuduro badan oo aanan weli Dadka laga talaalin sida Gaaska, Sonkorta ama macaanka,
Kansarka, HIV.EEYDHIS Kaneecada, Duumada,IWM.
**KAROONAHA Dawadiisa** duul cadawgeena ah ayaa ku nacfinaayo ee yaanan lasoo saarin hadii la dhihi lahaay qalad beey ahaan laheeyd.

**ARINKAAN AAN KA HADLI DOONO**

kooxdaas duurka gashay  ayaa SHIDAAL ka dhigan doonto.
iyagaas dartood in aan uga hadli waayo waa axmaqnimo DIINEED.

Muslimiinta Muqdisho & Boosaaso&
Hargeeysa & Harar.

dhiigooda in la daadiyo qofka rabo inoow Rabi ugu dhawaado  = Imaam Cuthmaan & Cali & Caruurtiisa in la dilo kuwii Rabi ugu dhawaaday  ayeey la meel joogaan.

**Buur Dahab** ah ayaa lagu siinayaa balse Oromada ama Soomaalida Dhiigooda xalaal kadhig hadii lagu dhaho sida Cumar bin khadhaab ku jawaabay ayaa wanaagsan in loogu jawaabo qofkaas.

Cumar baa yiri hal qof oo Muslim ah in dhiigiisa  badbaado ayaa iiga qeer badan hantida laga helaayo marka magaalooyin kooda aan ku duulo oon qabsado.

=========================================

**-Xogtaan aan kugula**  wathaagaayo [wadaagaayo] halkaan Quraanka ayaan ka lasoodhex-baxay.

xogta FIQHI ahaan mrka Quraanka looga soo dhiraandhiriyo Carabta waxeey,utaqaanaa (<u>istinbaadh</u>)

**---------------------------------------------------------------**

**#2025.Cadaab al-qabriga**

asalka waxaa ah in aad ka shakisid
xogtaan saxmiyaa mise waxbaa qaldan.
Imaam Al- GAZAALI shakiga oow ka hadlaayo sidaas ayaan u fahmay.aqligaaga waa inoow kala sooci karaa
CAQIIDADA bugta ah & mida runta ah .
Diinta ASAL&FARAC ayaa loo qeeybin jiray
aniga ASAL waxaan u aqaanaa AAYADAHA Quraanka
FARACNA Axaadiista inta saxiixa ah.

▪Cilmi-baaristaan waa mid ku kooban CADAAB QABRI

majiraa mise ma jiro?.
Gaalka hada dhintay halkoow dhex joogo waa Naarta.
Muslimka suubann isna Jano ayoow dhex jiifaa.
balse kuma saabsana JANO & NAAR ma jiraan mise.
jiritaanka labadaas inta qirsan ayaan isla lafa gureeynaa.
Janada ayoow dhex joogaa qofka maanta dhintay ee ahaay muslimka suuban ,gaalkana Naarta.
daliilka ugu badan ee aan keenaayo waa AAYADO QURAAN ah & Axaadiista Nabiga siiba inta ku qoran
Muslim iyo Bukhaari.

qeeybta hore AXAADIISTA ayaan xooga saarayaa
qeeybta danbe wax XADIIS ah uma soo daliishan doono
Aayado Quraan ah ayaan soo daliishanayaa
aqristaha waxoow  is dhihi doonaa qofka qoraalka kuu qoray
Axaadiista  xog kama haayo miyaa.
ABUU XANIIFA maxeey isku yihiin ?.
qoraal kaas danbe  **AHLAL QURAANKA**  ayaan ugu talagalay.
Soomaalida waa dad **AHLAL QURAAN** ah
Aayadaha uunbeey wax ku gartaan.
----------------------------------------

**#Mufakirka**.

**Fuundiga guryaha dhiso** ayoow lameel joogaa , fikrado badan ayoow dhisaa, mida ugu xigmada badan, qalbigana ku xasilaayo ayoow guri kadhigtaa .
Fuundiga isagana guryo badan ayoow soo dhisay kuwaas oow soo dhisay midkaan ayoow ka degay
Guri oow ku hoydo ka dhigtay.ku hoytho
-fikirkaan ku dhisan QOFKA MAANTA  DHINTAY

JANO ayoow jiraa ama NAAR.
fikir DIINEED waaye igu cusub. fikir  ka siifiican hadii aan helo kuna qanco waan u guuri doonaa.
hala yaabin hadalkaas, Shaafici laba mad-hab ayoow la haay mid hore & mid dabne.
======================================

**-Qofka  AAYADAHA Quraanka** ah  FASIRAAYO in laga shakiyo maxaa keenaayo?.
Imaam Cali isaga oo nool ayoow ka hadlay. Quraanka waa ujeedo badan yahay ayoow yiri.
isaga & inta la joogtay weeyba niyad samaayeen.
laga soobilaabo sanadka 300 Hijriga
koox la dhaho BAADHINI ayaa soo baxday
waana kuwa oow  ka hadlaayay,Imaam Al-GAZAALI Aayadaha ujeedooyin eeysan kaba hadlin ayeey u adeegsadeen.
-Kooxahaas Fasirka Aayadaha FIQHI haan ulama jeedin  balse waa isku deyid in Quraanka la taxriifiyo
maadaama Aayada aanan wax laga bedeli karin in ayeey sidaas u tarjumeen ayeey isku deyeen.
-kooxda koowaad waa Khawaarij.

-kooxda labaad waa QADARI.[1]

**AHLLASUNNA**

hadaa nahay aan iska baarno AFKAARAHA  ayoow yahay ujeedkeeyga .

-Nin tafsiir qoray oo BAADHINI  eeysan saameeynin ayaaba iska yar.

CIZAT ibnu cabdi salaam

oo qaabka BAADHINIGA wax ufasiraayo ,ayaan arkaayay qoraalkiisa

"wal tafati saaqu bisaaqi"

markoow fasiraayo Aayadaas bal u fiirso halka oow nala aaday.

Afkaartii GIRIIGA ayeey ku dhex qaseen Tafsiirka Quraanka.sida maantaba ladoonaayo in Quraanka laga dhigo Buug Seeyniska ka hadlo.

**-------------------------**

ISKUULKA UGU WEEYN EE BAADHINIGA [2]  MASAR ayoow ku ooli jiray,AZHAR ayaa xaruntooda eheeyd, sanadka 300/400/500 Hijriga

xiliyadaas Doowladii Shiicada ee Falsafada Diintooda eheeyd ayaa aad u faafin jirtay waxyaabahaas

IKHWAANU -SAFAA qaabka eey wax ufasiraayayaan ayaa kuu cadeeynaayo hadlkeeygaas.
-Umadaan heer waxeeyba gaareen AAKHIRO jir ahaan maleesku ciqaabaayo balse waa sida RIYADA/calwasaadka/qarawga
ayeey dheheen
Giriig ayaana fikirkaas iskaleh
waana DIINTII, FEEYLASUUFYADA.
-qofka haduu Jir ahaan xanuunsan yahay oowna jiifsado waa qasab inoow qarwo ileen jirkiisa ayaa xanuunsan ama haduu cabo cunto caafimaadkiisa udaran
waxoow ku riyoodaa riyo xun maxaayeelay  waa ku dhex xanuunsadaa hudada taasna kama dhigna inoow ciqaab galay.
Gaalka sida oow u xanuunsado ayoow Muslimka u xanuunsadaa
-Gaalka haduu hurdada ku dhex qarwo kuna xanuunsado hurdada dhexdeeda inta la joogo Aduunka
Muslimkana waa lamid soojeedka & hurdada waa ku xanuunsan karaa , Nabi Muxamad ayaa Farta ka dhaawacmay aad boow u xanuunsaday kolkaasuu yiri Faryahay xanuunsan ,xanuunkeeda laxawga igu beeray.

hadal sidaas u dhigmo aanan hadeer wada/watha xusuusan ayoow yiri.
-Culimo ku sheeg-yadaan TV-yada dhex degay waa dhaqaale doon ha ku kadsoomin hadalkooda.

Wadaadka isaga cudur ha iska difaaco , waxba yoowsan ku dhihin riyada ayaan kaa difaacayaa inaad wax xun ku aragtid DIINTII GIRIIGA oo ladoonaayo in Umada lagu dhex faafiyo ayaan u arkaa aniga.
iyada ayaa ku dhisneeyd RIYADA.
--------------------------------------------------------

(1)Nabiga oo lagu been abuurto waxaa ah , Qadari ayoow Nabiga ka hadlay in Xadiis nabi nalooga dhigay, qalbigeeyga ayaa diiday xadiiskaas.Nabi Muxamad kama hadlin Ahlla-suna mana sheegin Shiico Qadarina warkiisa daay.

kooxdaas Imaam Abuu xaniifa ayaa ka tirsanaay.

sida Doowlad u dunto uguna biirto Doowlad kale ayeey noqdeen Afkaartooda waxeey ku dhex baahsan tahay AHLLASUNA& SHIICADA.

kooxda qolofkeeda ayaa maqan balse Afkaarteeda ma dhimanin.hada kahor Muctazilo ayaan si wanaagsan uga faalooday , kooxdaan iyagana marbaan soo fagi doonaa Afkaartooda , koox isku dhex huursan ayeey ahaayeen sida hadeerba Suufiyada u yihiin

Mujasimo, mushabiho,mucadhilo,Ashaaciro & qaar Caqiidada Giriiga aaminsan oo ah XULUUL.

-------

Buug ka hadlaayo

QADDARTA ALLE

GARSOORKA & GO'AAMINTA ALLE

Qore:

Sheikh Shacraawi

Tarjume

Suleymaan iidow Maxamed

-------------------------------------------

(2) Baadhini= afkaarta eey faafin jireen nuxur keeda hadii aan kuu sookoobo.

Quraanka Salaada hala dukado ayaa noogu qoran , iyaga waxeey dhahayaan salaada

3ama 4 ama 2 rakaco duko maahan balse waa qalbiga ka duko.

soonka cunto ka soon maahan adigoo maalin soonqaad cunto cunaayo ayaad soomi kartaa .wax

sidaas u dhigmo ayeey Quraanka u rogeen .Imaam Al-gazaali aqriso Buugiisa oow kaga hadlaayo

kooxda Baadhiniga.

-------------------------------------------------------------------------

# # SHEEQAAGA MAGACIISA ha qarinin

Imaam Cali markii la dilay ka dib

kooxo-kooxo ayaa loo qeeybsamay

waxaana ladoonay in Xadiiska la diiwaan geliyo .

koox walba waxaa lagu qasbay in eey cadeeyso

xogta xadiiska qofka usoo tebiyay . haloo abtiriyo Xadiiska ayaa la yiri  qolo walba culimadooda si loo ogaado ayaana loo yeelay sidaas.

-hadeer Soomaalida sinjiga sare ayeey Soomaali ka yihiin balse siyaasadda weey ku kala fogaadeen .

qof walba Qabiilka oow Soomaali ka yahay si loo aqoonsado Calan ugaar ah ayaa xabaddka ugugu dhegan.

-Muslim baan ahay kuguma filna balse mad-habtaada ku abtirso ayeey ahaan jirtay ilaa deerna laguba dhaqmaa.

-ASHCARI baan ahay SHAAFI mad-habtiisa tahay anigoo la xiiqsan hadii aad qoraalkeeyga ku aragtid ha iga xanaaqin walaalle  waa  Qabiil ku abtirsi wax aanan waxba dhaamin, duruuftaa nagu qasabtay.

-----

**#Culimadeena dhanka TAFSIIRKA**

aan kuu cadeeyo.

AHLAL QURAAN hadii aanahay

waxaa culimo noo ah dhinaca TAFRIISKA.

-TAFSIIRKA , Muqaatil bin suleymaan.150 Hijriga.

-TAFSIIRKA , DHABARI.310 Hijriga.

-TAFSIIRKA , Abaa mansuur al maaturiidi.330Hijriga

-TAFSIIRKA , Zamakhshari.450-550Hijriga

-TAFSIIRKA , BAGGAWI.500 Hijriga

-TAFSIIRKA , Imaa Alraasi.600 Hijriga.(2)

-TAFSIIRKA , Cizat ibnu cabdi salaam.650 Hijriga.

-TAFSIIRKA , BEEYDAAWI.700 Hijriga

-TAFSIIRKA , QURDHUBI.700 Hijriga.

-TAFSIIRKA , IBNU KASIIR.750 Hijriga

-TAFSIIRKA , JALAALEEYN.850 Hijriga.

---

Culimada danbe waxaa culimo noo ah

TAFSIIRKA, ALMANAAR.1300 Hijriga.[1]

Culimadaas aan soo texay wax soosaarkooda waan ka qaataa waana ku kalsoonahay.

------------------------------------------------------------------

.(1)waxaa qoray Sheekh Rashiid Rida , waana wadaad SALAFI ah balse waa kuwa ugu furfuran uguna ilbaxsan. xiligii oow GUMEESTAHA na dhex joogay ayoow noolaay.

-Qalinka AMIIR SHAKIIB ayaa loogu jeclaay sanadadii 19020-1940kii sida maantaba loogu jecelyahay daawashada AL-JAZIIRA,ama C/abdi Baari Cadwaan ama Almayaadiin, looguna necebyahay warbaahinta eey maalgeliso Sacuudiga ama Imaaraadka.

-ALMANAAR wargeeys caan ah ayoow ahaay.

Tafsiirka-Almanaar. wargeeyskaas ayaana loogu magacdaray. waayo wargeeyskaas ayaa daabici jiray nuqulada tafsiirka.

Soomaali dii Gumeestaha ku hoos nooleeyd halka eey xogta ka helaan ayoow ahaay wargeeyskaas.maqaalo aad u qiimi badan ayeeyna ku qori jireen halkaas .

Amiir-shakiib & Sheekh Rashiid RIDDA mudo 40 sano ah ayeey saaxiibo ahaayeen qoraalo wada *watha* qori jireen himada umadaana u adeegi jireen.

Ragaas Buugaagtooda hala aqristo waa xidigo iftiin badan. Umaddana in badan Qalin ugu soo qidmeeyay .

Bulshadeena cadaan & madoowba. Qalinkooda ayeey aqrisan jireen .

--------------------

.(2) Imaam Fakhradiin Alraazi hadii aad heeysatid Tafsiirkiisa G00-gle in aad Aayad ka baartid uma baahnid. hana u tegin Wadaad wax kuu sheego.

waa nin aanan xaqireeynin Afkaarta suuqa taalo Feeylasuuf haduu wax fasiro waa halka aad ka heleeysid.

sheeqaas maskaxdiisa waa mid cajiib ah waxyaabo badan ayoow soo kordhiyay . dad kii hore hadalkooda in oow soo raro kuma ekaanin , Albaabkii IJTIHAADKA ayoowba furay ayaan dhihi lahaay .aniga ku dhihi maayo wax walba oow fasiray ayaan wada aqriyay balse suuq aan kasoo adeegto dhana Tafsiirka ayoow ii noqday. afkaaro badan ayaan ka faa`iiday.

Kitaabkiisa waxoow muhiim noogu yahay xiliga la qoray waa xiligii TATAARKA ka horeeysay.xiligaas hore Maktabada Baqdaad Buug walba ayaa laga dhex heli jiray mid Giriiga qoray ama qaar eey qoreen Muslimiinta.

kadibna HAMAJKII ayaa qabsaday dhulka kana taliyay waana kii TATAARKA ahaay. wax aqoon ahna aduunka kuma soo kordhinin aanan ka eheeyn dhiig daadin.

========================================

**#MAXAAN SOO KORDHIYAY?.**

-In qofka hadeer dhinto u hoyanaayo Jano.

dadkii hore waxeey dhihi jireen maya Jano ma gelaayo qofka dhintay balse Qabriga ayaa daaqad ahaan looga tusayaa Janada.

-Nolol lagu magacaabay AL-BARZAKH

ayoow ku nool yahay qofka dhintay.

sidaas beey dheheen iyaga.

Kutubo ayeeyna ka qoreen

wax badan ayeey usoo daliiliyeen una badan Xadiisyo.

Aayadaha Quraanka wax daliil ah ugama keenin nolosha Barzkha , marka laga reebo 1 aayad.

(<u>wa min waraa ihim barzakhun...)</u>

Aayadaasna cida eey ka hadleeyso waa Qoom gaalo ah balse qolo Muslimiin ah oo Barzakh ku nool ma tilmaamin Aayada.

-Rabi markoow ka hadlaayo qof dhintay oo Muslim ah waxoow yiri "

(<u>qiiladkhulil janata qaala yaa leeyti qoowmii yaclamuun</u>)

markoow dhintay Janada gal ayaa la yiri balse lama dhihin sug inta oow Nabi Muxamad Furaha ka keenaayo.

lagumana  xujeeynin Umadda Nabi Muxamad ,inta eey ka galaan adiga geli meeysid lama oran sidaas.

balse waxaa la yiri"

(<u>yaa ayatuhaa nafsul mudh ma inatu ir jicii ilaa rabiki raadiyatan mar diyatan fad khulii fii cibaadii wad khulii janatii</u>)

Qofka Muslimka ah. Nabi Ciise Umadiisa, Nabi Muuse Umadiisa , Nabi Muxamad Umadiisa dhamaantood

sidaas boow Eebbe dhahayaa marka eey dhintaan dadka wanwanaagsan .Gaalkana Barzakh ayaa hursan haduu yahay

mid loo naxariistay balse haduu yahay midka Dadka masaakiinta ah halaagay wiil-hooga waxaa hooy looga dhigayaa Naarta.isaga  lala sugi maayo Barzakha.

(qiilad khuli naar maca daakhiliin)

-MAQAALKA arimahaas  ayaan ku qaadaa dhigayaa. kuna lafa gurayaa

Aayadaha  Miiska noosaaran ee umuuraheena taageersan tirabeel waaye walaal .  yuusan  taraarin hadalka ku tumanin Xadiisleeyda.

قَدْ جَآءَكُم مِّنَ ٱللَّهِ نُورٌ وَكِتَابٌ مُّبِينٌ

يَهْدِى بِهِ ٱللَّهُ مَنِ ٱتَّبَعَ رِضْوَانَهُ سُبُلَ ٱلسَّلَامِ وَيُخْرِجُهُم مِّنَ ٱلظُّلُمَاتِ إِلَى ٱلنُّورِ بِإِذْنِهِ وَيَهْدِيهِمْ إِلَىٰ صِرَاطٍ مُّسْتَقِيمٍ

[Al maa`ida 15-16]

**--------------**

======================================

**QOF JANO loo balan qaaday miyaan ahay?**

Eebbe agtiisana  kheeyr badan geestay?.

kaasoo  haduu Ifka ka tago Jannada  Albaab keeda gargaacidoono lagana furaayo miyaan ahay? .

-Quraanka waxaa ku qoran

(man yacmal mithqaala tharatin sharan yarahu)

Quraanshada mida ugu yar Dhuuricas baa ladhahaa

wax intaas u dhigmo oo denbi ah qofka suubiyo

Rabi waa xisaabinayaa ayeey dhahday Aayadaas.

Fadliga Eebbe in Jano lagu helo mooyee qof walba xisaabta halgu adkeeyo hadii la dhaho xaalka ma fiicna maalintaas.

■ **moowduucaan cilmi-baaristiisa** wax shaqsi ku saabsan

maba ahan
-wax aduunka wax ka gooyo oo Suuqa inta la geeyo qarash

looga soo helaayo maba ahan.

-waa wax naga maqan kuna saabsan Aakhiro.

-wax qisaasta ku saabsan ama hanti leesku heesto kala

xugminteeda ma ahan .

-waa timaado dhiman oo aanan weli lagaarin kuna saabsan

aakhiro.

waana masalo KHILAAFI AH oo

Buugaagta lagu dhex xusay 1300 sano kahor.

ABUU XASAN AL-ASHCARI Imaamkii AHLA SUNA WAL

ISTIQAAMA, ASHAACIRADA Aabahood

ayaa Buugiisa kaga waramay.

"MAQAALAAT AL -ISLAAMIYIIN"

waa moowduuc hore usii jiray balse aanan si wanaagsan loo bisleeynin

dhinacyo badan laga eegin , waxaan isku deyayaa in aan dhan walba kasoo dhameeystiro

wax qurux badan laguna qanci karo aan ka dhigo.

Aayado Quraan ah anigoo ku iftiiminaayo

Quraanka waa Ileeys sida Eebbe sheegay.

قَدْ جَآءَكُمْ مِّنَ ٱللَّهِ نُورٌ

Quraanka ayaa Nuur ah , Nabi Muxamad isagana waaba Nuurkale.

---------------------------------------------------------------------

---------------------------------------------------------------------.

**#Karaamo Oowliyo**.

Suufiyada waxeey sheegtaan waxyaabo cajiib ah.

Diimaha ayaaba ku dhisan waxyaabaha aanan maangalka eheeyn in la rumeeyo,

Suurada AL ISRAA waa Suurada lagu magacaabay suuradii DHEELMINTA .

dadka qaarna ISRAA-IIL ayeey dhahaan Suuradaas.

qisadaas marka laga sheekeeynaayo waxeey dhahaan culimada

Nabiyada dhamaantood waxeey yimaadeen Masjidka Al aqsaa

halkaas beeyna ku wada dukadeen Nabigeena & dhamaan Nabiyada.

FILIMKA ladaawado ATOORAHA waxoow jilayaa

qiso qofkale ku dhacday qofkii ayoowna iska dhigayaa.

Nabiyada meesha lasafay oowna Nabigeena la hadlay waa jilitaan la

jilaayay ,

xaqiiqo waaye hadii eey dhahaan Culimadeena , Doonteeyda ayeeyba soo

raaceen oo ah JANADA ayeey ku dhex nool yihiin Nabiyada ee kuma

noola Qubuurta dhexdooda. Nolosha BARZAKH Nabiyada kamid

maahan inta halkaas ku nool

markaasna aniga ayeeyba hiil isiiyeen .

## -Oowliyada.

qofka Weliga ah markoow Aduunka ku nool yahay haduu karaamo sheegtay.

qofkii Jano muteestay kuna guuleestay imtixaanka, karaamo lasiiyay darteed in loo dhex geeyay JANADA maxaa loodiidayaa oo loogu dhegan yahay.?

sheekada ah Dadka waxeey ku nool yihiin BARZAKHA oo ah meel u dhexeeyso AAKHIRO & ADUUNKA.
Quraanka Suurada Yaasiin weeyba ku cadahay in abaal gud ahaan loo dhex geeyay Janada ninkii eey Gaalada dileen .
Saxaabada qaar kamid ahna dhanbaal ayeeyba ka soo dhexdireen JANADDA sida Suurada Ala cimraan ku dhigan . barzakh lagama soo dirin fariintaas balse qof jano dhex joogo ayaa soo diray Quraanka ayeeyna sidaas ku qorantahay .
-Doodeeyda waxeey tahay Oowliyada hadii karaamo loo ogol yahay qofkii AHLU JANNAHA AHAAY kaas ayaa kamudan in loo ogolaado in oow jannada dhex joogo.
-ma dhihi karnaa marka Nabi muxamad janada ayoow dhex joogaa waana jilitaan jirkale ayaa loo sameeyay oowna kusii nool yahay halkaas ,marka qiyaamaha lagaarana jilitaanka waa ka baxayaa , sida Nabiyada u jileen markeey Salaada ladukadeen Nabigeena hebeenkii la dheelmiyay?.
Nabiyada kale waa isaga oo kale Janada ayeey ku nool yihiin waana jilitaan .
-hadalkaas hala yaabin tusaale ayaan ku siinayaa oo ah
Jibriil markoow Nabiga waxyiga u keeni jiray Dadka ayoow isku ekeeysiin jiray waatuu Jilbaha jilbaha usaaray

xadiiskii ku qornaay "Arbaciinka"

ee aan ilmanimada kusoo aqrisanay.

Quraankana tilmaamay suurada "wanajmi"

(fakaana qaaba qoowseeyni oow adnaa)

halkaas waxaa kaaga muuqato in Jibriil qolofkiisa asalka ah oow kasoo tegay oowna soo dhexgalay qolofkale.

waana suuragal sida Jirjiroolaha in lasiiyay awood oow jirkiisa ku bedeli karo isaga oo aanan kaba tegeeynin asalkiisa hore.

============================

----------------------------------------

**#FIDOOWGA SUUFIYADA.**

Soomaalida koonfureed siiba Suufiyada waxaa u dhaqan ah Quraan aqris marka la`aaso qofka dhintay.(1)

Dhaqan walba oo Suufiyada la timaado dhanboow Diinta kaga dhegan yahay balse meel daran lagama keenin.

-asal ahaan arinkaas waxeey kasoo dheegteen

Xadiis Nabiga ka sugnaaday kuna saabsan qof dhintay oo deeyn lagu lahaay.

-nabiga ayaa yiri hebel Janada looma ogola inoow galo waayo deeyn baa lagu lahaay.

Ninkaas ehelkiisa aaway ?.

ka bixiya deeynka lagu lahaay ninkaas.

Sheekh CUMAR ASHQAR ayaa sheegay xadiiska

QISADA NINKAAS waa mid taageero noo ah

Qofkaas dhintay  waxaa loo diiday gelida JANADA

deeyn lagu lahaay darteed

halkaas waxaa kaaga muuqdo in oow Jano geli rabay balse loogu diiday deeynka lagu lahaay darteed.

-Ninkaas Janada loo diiday gelideeda

Jano maahan ku dhextaalo QABRIGA

balse waa Janno Cirka ka sareeyo.

Irdaha Cerka marka laguu furo

kadib ayaa Albaabka Janada HOODI-HOODI

dhihi kartaa  , kadibna Malaa`igta kugu dhahdo soo gal ama deeynbaa laguugu leeyahay halkaaga iska sii joog inta laga bixinaayo deeynka laguugu lahaay.

-Soonka ayaad sagsaagtay, salaada geleb-geleb ah ayaa dukan jirtay

Mobilka mar aad eegtid & maskaxdaba eey Suuqa jirto.

xajkana  weligaa mategin xoolana kuuguma yareeyn

Xabaalaha markaad u hoyatid  Xoolo ayaan qalayaa masaakiinta ayaan u qeeybinayaa ,deeynka waxaan u qeeybiyaa aniga >2<

1-Deeyn Rabi kuugu leeyahay .

2-Deeyn oow dadka kuugu leeyahay.

Nabiga waxoow ka hadlaayay waa deeynka oow Dadka kuugu lahaay.

aqristoow Quraanka kala fur suurada
"Qadsamicalle" ama Almujaadala
qisada ku saabsan Nin&Naagtiisa
oo qilaaf soo kala dhex galay kadibna xaaska ayoow furay furiinka ugu adag kaasoo ah "Hooyadeey sida eey xaaraan iiga tahay ayaa adiguna xaaraan iiga tahay"
ereyada nuucaas ah Ninka markoow naagtiisa ku furo
quraanka waxoow ku waajibiyay laba bilood in oow soomo ama 60 miskiin in oow quudiyo .
halkaas waxaa kaaga muuqato DEEYNKA oow Rabi kuugu leeyahay qaabka loo gudi karo in eey tahay MASAAAKIINTA in aad quudisid.
FIDOOWGA aan sare kuugu qoray hadeer qalbigaaga maka daadegay Quraanka hadii aan kuu daliiliyay Xadiiskana Nabiga kuu bayaaniyay.
-qof Muslim ah adigoo dhiigiisa soo qubay sida ZOOBE-14
SUUFIYADA haku dhega hadlin dhaqankooda wax haka sheegin adigoonan dhab u soo baarin daliilkooda halkoow kaga arooray Diinta.
-Janno  ku dhextaalo Qabriga  ayaa Ninkaas loo diiday lama dhihin balse jano run ah ayaa loo diiday in oow soo dhex galo.
 Cirka ayeeyna ka sareeysaa Jannadaas.

**GABAY oow ka geeriyooday Abwaan  Yam-yam.**

kuna saabsan GODKa  AAKHIRO.

*Albaabada Janada guud* .

*Ninba diin u gooniya*,

*hala gola yimaadee,*

*Muslim baanu nahaye garo.*

*-Yaasiinkaan qofkii go,a*

*Ku gunaanadnaayoo, Ikhlaas lagu guneeyaa*

*Godka lagula hooyaa.*

>JANADAAS oow kahadlay Abwaanka  ciqaab la aan allaha dhex geeyo <

==================================================

.(1)Oromada waa nala mid anigaan ayaaba ka qeeyb galay Wiil Soomaali ah

xaaskiisana Oromo tahay markoow dhintay Quraan aqriska loo dhigay. qaaraan ayaa leesku qoray

Oromada iyo Soomaalida laga soo uruuriyay

-SUUDAANTA TACSIDOODA waa shaah.

maqaaxida Shaaha ayeey iskugu tagaan halkaas ayeey shaah ku cabaan kadibna qof walba 20$

ama 10$

ama 100$ ayeey isku qoraan sidaas ayeey u gargaaraan ehelka qofkii dhintay.

Soomaalida iyo Oromada ayaa ka dhaqan qurxoon Suudaanta. aqristoow ogsoonoow FIQIIH ma jirin ka dhashay AFRIKA haduu jiro waa OROMO ama Waa Soomaali .ZEEYLICI baa nagadhashay.iyo Sheeq Cusmaankii Diinta sharaxay.800 sano kahor beey noolaayeen.

-Culimada Xabashida halkaan kuma soo hadalqaadin hadii aan Qalinka u qaato Buuga ayaa baalashiida 500 kor udhaafayo.

**--------------------------------------------------**

# #JANO&NAAR MAJIRAAN HADEER?.

AHLASUNA WAL JAMAACA

waxeey isku raaceen dhamaantood in Jano & Naar diyaarsan yihiin.

**-MUCTAZILO** weey isku qilaafeen dhexdooda. qaarbadan oo iyaga kamid ah

waxeey dheheen Jano diyaarsan ma jirto Naartana waa lamid.(1)

halkaas waxaa kaaga muuqdo hadalka aan soo wado in oow yahay mid ka madax banaan

MUCTAZILO waayo nin dhahaayo Jano maba diyaarsana Naartana sidookale. aniga & isaga laba jid ayaan kala marnay sidaas ogsoonoow .

AHLASUNA iyagana waa moowduuca aan ku qilaafay waxa aan ka hadlaayo ee ah JANO ayoow gelayaa qofka markoow dhinto.

iyagana waxeey dheheen maya ee dadka waa leesla sugayaa halmar ayaa Jano lagu abaal marinayaa

halmar ayaana Naarta loo dareerayaa inta mudan Naarta.

===================================

.(1)Janada in eey diyaarsan tahay Quraanka ayaaba qoray wax cusubna maahan

Nabi Aadan ayaaba dhex deganaay kahor inta oowsan iman dhulkaan ,

waxa muranka ku jiro ayaa ah NAARTA wax hada diyaarsan miyaa mise?

Quraanka waxaa ku dhigan in Naarta la ololin doono

(wa ithal jaxiimu sucirat)

halkaas waxaa ka muuqato in wax markaas uun la shidaayo tahay Naarta .

-Nabi Aadan xiliga oow ku dhex noolaay Janada. marka oow ka hadlaayo Quraanka kama oowsan hadlin wax Naar la dhaho oo halkaas ku diyaarsaneeyd xiligaas ,Muctazilo marka eey mugdi gelinayaan diyaar ahaanshaha naarta waxa u muuqday ayaa arinkaas ah.

-Muctazilo Buugooda weeynaay beryahaan ma aanan aqrinin "usuusha shanta ah "

buuga weeyn ee looga hadlaayay ayaad ugu laaban kartaa kooxdaas caqiiqadooda.

===========================================

**#Quraan Xadiis NASAKHAY.**

aragti baa jirto dheheeyso Quraanka waxoow nasakhayaa Sunaha

inaga hada sidaas baan ku dhaqmeeynaa

Quraanka ayaan ku nasakhayaa Axaadiista.

dooda Aayadaha aan usoo dalishaday

waxeey nasakhayaan Axaadiista ka hadashay CADAAB AL QABRIGA.

Bukhaari & Muslim Axaadiista eey qoreen waan arkay balse Aaayadaha ayaan ku nasakhayaa.

-Aragti kale ayaa jirto dheheeyso Xadiiska waxoow nasakhayaa Aayada Quraanka ah .

tusaale: Quraanka waxaa ku dhigan in laweeysaqaato

hadii biyo la helaayo hadii lawaayana ciid leeysmariyo.

MASXAL KHUFEEYNI

Quraanka masheegin balse Xadiiska Nabiga ayaa laga keenay sheekadaas. Aayadii sheegtay in la weeysaqaato ayaana lagu nashakhay.

hadeer dooda weeyba sii kululaatay oo waxeey dheheen SIGISAANTA hala masaxo sidaasna halagu dukado , waxaas hada nama quseeyaan balse dooda sida eey isku dul fuusho ayaan daaqada kaa tusayaa in Xadiiska lagu nasakhay Aaayada Quraanka ah cida ku dhaqanto arinkaasna waa AHLASUNA balse SHIICO weey diideen sida igu maqaala ah.

-Wadaad CAQIIDO kadhigay in la masaxo KHUFEEYN  waan arkaayay Buug ayoowna ku qoray .

**-Aayad Quraan** ah oo Xadiiska tuurtay aan ku tuso iyaduna.

-Nabiga ayaa Toobin lasaaray Dhiig ayaana laga miiray , Ninkii toobinka saaray

ma oowsan daadinin Dhiigaas balse waa cabay , kadibna Nabiga ayoow u sheegay.

kadibna maxaa dhacay?.

Quraan ayaa soo degay lagu xarimaayo dhiiga in la cabo.

(xurimat caleeykum al meeytatu wa damu..)

-Wadaadka marka oow sharaxaayo Xadiiska kuma baraarugo halkaas

Dhiiga Nabiga ayaa la cabay lana barakeestay ayoow ku dhex bururaa.

maba oga in Eebbe xarimay.

---------------------------------------

**AAKHIRO**

ayaan ka hadleeynaa

Eebbe waxoow yiri 50,000 oo sano hal maalin ayeey agteeyda ka tahay.

Janada aan ka hadleeyno balac ahaan waa mid aad u weeyn arinkaasna qeeybaha danbe ayaan kaga hadli doonaa marka aan ka hadlaayo MOOWLIIDKA.

Abwaan Cali Mooge Geedi ayaa Janadda nooga soo warami doono sida loogu nool yahay halkaas.

**Dadka dhintay** Janada ayeey ku dhex jiraan hadii aan dhay

waxaa suuragal ah in eey Jannada  ku sii dhex lugeeynayaan , geeddina ku siiyihiin oo eeysan weli gaarin guryahooda Jannada. hadba maalin in eey Hoobaanta sii guranayaan waa suuragal .
ha diidin arinkaas.
Hooyooyinka Muslimiinta in eey naga xanaaqaan ma dooneeyno. Odaygii dhintay iyada  horteed Janadda ayoow dhex joogaa waana ku guursaday halkaas hadii  loo sheego sidaas, in eey hinaasto ayaa laga dhoowrayaa niyadeeda Hoobaanta ayeey sii guranayaan haloo sheego Dumarka.
**-Nabi Muxamad** waxoow xijaabtay
1400 oo sano kahor.
 Janada  ku sii dhex safar Miraheeda sii  guro. halkaad doontid ku dhex hoyo hana kula socdaano Muslimiinta
mudada aad sii socon doontidna waa 50,000 oo sano
halkaas waxaa ka muuqdo qof walba oo dhintay in oow haleeli doono / ka dabategi doono/ gaari doono Nabiga oo dhex sii lugeeynaayo.
qofkii dhintaba Nabiga & Muuminiinta in oow haleeli doono iyagoo Janada sii dhex lugeeynayo ayeey noqotay natiijada .
daliil waan  uhaayaa arinkaas.
-Nin saxaabi ah ayaa yiri markoow dhimanaayay agteeda

waxaan haleeli doonaa Nabi Muxamad & saaxiibadeey.
-Sayid Cusmaan bin Cafaan maalin ka hor inta oowsan dhimanin waxoow riyo ku arkay Nabiga waxaana loogu bishaareeyay agteena ayaad ku afuri doontaa.
halka oow ku afuraayo Xabaasha ma ahan balse waa Jannada , xisaabaadka aan isku geestay natiijadooda sidaas beey noqotay.
يَوْمَ لاَ يُخْزِى ٱللَّهُ ٱلنَّبِىَّ وَٱلَّذِينَ آمَنُواْ مَعَهُ نُورُهُمْ يَسْعَىٰ بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَبِأَيْمَانِهِمْ يَقُولُونَ رَبَّنَآ أَتْمِمْ لَنَا نُورَنَا وَٱغْفِرْ لَنَآ

**Rabi Quraanka** waxyaabaha qaar duuduub ayoow usheegay mana sii faahfaahinin.
tusaale :
Carshiga waxoow dul ooli jiray Biyo .
halkaas Eebbe masii faahfaahinin Biyahaas xagee la geeyay hadeer. Baddahaan miyoow ka uumay lama sii faahfaahinin Culimada ayaa loodaayay in eey ka doodaan.
Culimada iyaga ayoow Rabi ku tilmaamay kuwa Dadka ugu Alle kacabsiga badan.
(<u>inamaa yakhsha laaha min cibaadihi al culamaa</u>)

xitaa Culimadii YAHUUDDA ayoow Rabi cilmi ku sifeeyay. waana cilmi aakhiro. Janno & Naar & sooyaalka Umadaha siiba Muslimiinta taariikhdooda.

(awa lam yakun lahum aayatun an yaclamahul culamaa banii israa`iila)

Quraanka waxa oow ka hadlo ayaaba ah Taariikhda Umadihii hore siiba Yahuuda.

========================================

**#TOWREET & INJIIL.**

CADAAB AL QABRI loogama hadlin.

AHLUL KITAABKA kama hadlaan

wax la dhahaayo Cadaab al qabri.

balse waxaa ku qoran JANO&NAAR.

-Buugaagta eey heestaan Masiixiyada & kuwa Maktabada usaaran YAHUUDA waa isla Buugaagta oow soogaaray Nabi Muxamad Quraankana ka waramay  kuna amray in eey iyagaas ku dhaqmaan waxa ku qoran Kutubadooda .

(wal yaxkum ahlal injiili bimaa anzalalaah)

-Suurada Nabi Yuusuf sida eey ugu qoran tahay Kutubadii hore & sida Quraanka loogu dhex qoray waa isku mid waxba kuma kala duwana.

doodeeyda waxa waaye .

Quraanka kama hadlin Cadaab al qabri.

Umadihii naga horeeyay iyagana Kutubadooda

kuma dhex qorna.

**INJIILKA Cusub EE SAXDA AH ee la helay**

**Sanadka 1700**

waxaa la helay INJIIL Cusub

waana midka ugu saxsan. weey qarin jireen Masiixiyada

balse qof ayaa kasoo xaday Maktabada Boobka

kadiban isaga ayaa faafiyay Injiilkaas waxaa lagu magacaabaa

"INJIIL BARNAABA"

Nabi Ciise in oow Nabi yahay ayaa ku qoran

oowsan eheeyn Illaah ama wiilka Illaah.

Nabi Muxamad in oow iman doono ayaa ku qoran

waana Injiilka oow quraanka ka waramay oowna yiri

maxaad u qariseen xog aad ogtihiin in eey tahay mid xaqiiq ah ,

xogtaas Quraanka ka waramaayo waa Kutubada saxda ah eeyna

qariyaan Ahlukitaabka.

waxa ku qoran

Buugaas waa xaqiiqo 80% .

Culimadii nooleeyd xiligaas weey ka hadleen sida Sheekh Rashiid Rida waana ninkii qoray Tafsiirka Quraanka.
SHeekh Rashiid isaga ayaaba qoray hordhaca INJIILKA cusub ee la helay
si eey Muslimiinta ugu qancaan waxa ku dhex qoran Kitaabkaas ayoowna sidaas u yeelay.
-Culimada Azhar iyagana weey ka hadleen.
Sheekh Maxamad CABDU ayaa ka mid ah inta wax ka riti Kitaabkaas waxa ku dhex qoran .
-dhanka kale Baadari walba oo MASIIXI ah waxoow yiri Beeybalkaas waa mid la been abuuray.
Nedka waad ka heli kartaa hadii aad ku qortid magaciisa.
dhageeysi isagoo ah ama PDF.
**-Injiilkaas "BARNAABA"**
Cadaabta qabriga miyoow ka hadlay?
aniga ma wada aqrinin mana ogi in oow ka hadlay balse JANO&NAAR waa ka hadalyay.
-Kitaabkaas waxaa ku qoran Nabi Ciise in oow ifka ku soo laaban doono waxaana la socdo xiligaas laba Nin.
labadaas nin. mid waa ILYAAS, kan kale waxeey ku magacaabeen AKHNUUKH.

Janada ayaa laga soo saari doonaa dhulka ayeeyna ku soo laaban doonaan.
Nabi Ciise markii kor looqaaday ayoow FIRDOOWSA
dhex degay labada kale iyagana waahore ayaaba halkaas la dhex geeyay waxeeyna soo laaban doonaan
Buunka qiyaame  inta aanan la yeerinin wax yar ka hor.
 sheeko nuxurkeeda sidaas tahay ayaa halkaas ku dhigan Buuga-boga 239.

-waxaa iyadana xiiso leh oo halkaas ku qoran  "
Jirka iyo Ruuxda ayaa hada kahor dood dhex martay.
Ruuxda ayaa tiri Janada ayaan aadayaa ,Jirkana waxuu yiri xagee igaga tegeeysaa soow iguma adeeganin saaxiibo soow ma eheeyn .garta nuucaas ah ayaa lagu lafagurayaa .
**INJIILKAAS&QURAANKA** ma isku waafaqeen dib usoo laabashada NABIYADAAS?
Quraanka waxaa ku dhigan
<u>(warafacnaahu makaanan caliyan)</u>
Nabigaas la kor yeelay midkoow ahaadaba waxaa meesha ka muuqato in oow JANADA dhex degay.
<u>(kula nafsin thaa iqatul moowt)</u>

Qof walba in oow dhinto ayoow Rabi go aamiyay

waa qasab in eey dhintaan Nabiyadaas laga qaaday Aduunka.

وَٱلسَّلاَمُ عَلَـىَّ يَوْمَ وُلِدْتُّ وَيَوْمَ أَمُوتُ وَيَوْمَ أُبْعَثُ حَيّاً

(maryama 33)

**Nabi Ciise ma dhimanin iyo waa dhintay**

2000 oo sano ayaa labada diinba ku muran sanaayeen

Aayadaas sare ku dhigan waxaa ku cad in oow geerida

dhedhemin doono sida Nabi Ibraahim +Muuse+Nuux

IWM.

**-INJIILKAAS wax taageero ah maka helnay** kuna saabsan

CADAABTA QABRIGA?.

dabcan haa Nabi Ciise jir iyo ruux ayoow janada u dhex joogaa.

Nabi Ilyaas isagana waa lamid

jir ahaan qofna Jano uma dhex joogto kahor Buunka qiyaame

yeeridiisa halkaas beey ku beenoowday.

Quraanka Fasir ahaan waa ujeedooyin badan yahay

si cad uma sheegin in JANADA AL-FIRDOOWS

loo qaaday Nabi Ciise , sidoo kale Raga ku dhex xusan suurada

Yaasiin shuhadada halkaas ku qoran

iyagana waa lamid

isku soo duuduub sheekada halkaas ku dhigan sida Dhallo cadeey biyo lagu shubay ayeey wax walba uga dhex muuqdaan JANO ayeey dhex joogaan Jir ahaan iyo Ruux ahaanba Dadkeena inta dhimatay ee ahlu kheeyrka ah .

**Injiilka in aan qiil** ka keeno ma qurux badna balse dadka dooda weey deeyn waayeen si hubka noogu bato ayaan usoo hooriyay Aayadaha INJIILKA ku dhigan.

======================

**#Nabi muxamad**

Yahuuda &Masiixiyada weey garanaayaan

Waxeey u yaqaaniin sida Ubadkooda eey u gartaan .

Dabcan Dadkaas oow ka hadlaayo Eebbe waa Culimada Yahuuda&Culimada Masiixiga balse dadka caamada ah aanan wax taqasus ah u leheeyn diinta waxa saxda ah iyo waxa aanan saxda eheeyn kalama aqoonsan karaan.

-MOOWDUUCA CADAABTA QABRIGA

waxaa wax ka dhihi karo uun qofkii cilmiga diinta wax badan kasoo aqriyay. xaqdoona ah balse qof diinta Abkasoogaar ahaan iskaga heesto aanan aqoon ahaan waxba uga biloowneeyn

midkaas waxa aan ka hadlaayo dusha sare waa kadiidi karaa
ama duuduub ahaan waa iskaga rumeeyn karaa .
=========================================

**#INJIIL BARNAABA.**

Nabi ciise markoow uga sheekeeyay

Labadaas Nabi ee Janada loo qaaday iyagoo nool dadkii meesha joogay waxeey ka dalbadeen in Janada cunto looga keeno

Qisada Quraanka ku qoran ee ka warantay Xeerada raashiinka ka buuxo ee Janada laga keenay sidaas beey ku timid.

INJIILKAAS kama hadlin Xeerada loo keeni jiray Xerta Nabi Ciise xogaha kamaqan Buugaagtooda ayeeyna ka mid tahay Sida aan ka maqlay dadka ku xeel dheer dhinacaas. Diinta Ciisaawiga.

Kuma qorna beey dheheen cunto loo keenay Nabi Ciise xertiisa.

-Nin Suufi ah ayaa maalin Soonqaad ah raashiin cunay sheekhiisa ayoow la cunay cuntadaas markii la weeydiiyay arinkaas waxeeey dheheen Cuntada Janada ayaa laga keenay waa tii Nabi Ciise loo keeni jiray mid la mid ah midaasna Soonka kuma jabo cunisteeda.

TACLIIQ.

Aan ka bixiyo arinkaas

Suufiyada warkooda waa war afka leeskaga sheegay balse ma ahan wax meel ku qoran kaas oo dhoor maktabada loo qeeybiyay.

qof haduu wax ka bedelo midka kale laga soo ag helaayo warka la been abuuray.

- Buug kama aqrinin warkaas balse SUUFI jidbeeysan lana jibeeysan KARAAMO oowliyo kuna siman Aduunka

Ayaan ka maqlay isagoo

Ka hadlaayo arimahaas.

Shaki malahan in soonka ku buraayo cunto la cuno JANADA halaga keeno ama meel kale.

Maryama karaamo darteed waatii cunto la siin jiray Quraanka beeyna ku dhigan tahay.

=====================================

**#RUUXDA.**

Qiyaamaha Fardaha iyo Geela marka ciida lagu daro ruuxdooda xagee loo qaaday ?.

Jirka ciida ayaaba dib loogu celiyay naftoodii xagee la geeyay markaas ?.

Halkaas waxaa ka muuqato nafta in eey tahay wax aanan la garan karin. sirta Eebbe ee naga qarsan in eey tahay baa iska cad.
Dadka qaar ee ku dooday Nafta jirka ayeey ka mid tahay halkaas mad-habtoda wax taagersan ayaa iiga muuqato.
Geela iyo ruuxdiisa lama kala saarin balse isku si baa looga hadlay ciida ayeeyna ku darsameen natiijo ahaan. Naftiyeey xagee laguuqaaday hadii aadan eheeynba wax jirka uun ku lamaanan.
-Xoolaha in eey ciida ku darmayaan Injiilka waa sheegay Quraankana ka eeg Suurada Cama.

(injiil Barnaaba.Mp3.casharka 10-Aad)

-Injiilkaas cusub  waxoow sheegay Dalka GIRIIGA in oow asal ahaan kasoo jeedo Nabigii Nibiriga laqay.
Inaga Muslimiinta ah asal ahaan halkoow ka soo jeedo lama faafinin. qiso ahaan ayaa looga hadlaa Nabigaas.
-Nabigaas magaciisa THENUUN baa la dhahaa
Giriiga waxeey u yaqaanaan THENUUN balse Nabi agtooda kama ahan waa XAKIIM
sida SOQRAADH , AFLAADHOON ayeey u qadariyaan.
--

**#THANUUN&Quraanka.**

<u>(walaa takun kasaaxibil xuuti)</u>

magaciisa waa la qariyay waayo

Wax leesla wada ogyahay magaciisa banaanka in la keeno waa uun hadal tiro batay.

- haka quusanin Umadaada mar uun hanuunka Eebbe weey qaadan doonaan

hana ka cararin baa ku qarsoon halkaas.

**#THANUUN&Buugaagta Feeylasuufyada** qoreen 2500 sano kahor.

**THANUUN** Magaciisa waxaan ku arkay Buug oow qoray Nin u dhashay ROOMA, Feeylasuufna ahaay .

AKHLAAQDA ayoow Buugaag ka qoray .

Ninkaas Kooxda oow ka tirsanaay "RUWAAQIYIIN"baa looyaqiinay

Magaciisa waxaa la dhihi jiray Ibkitiitoos .

SOQRAADH&DANUUN.

Ayoow ka hadlaayay. waa Dad xigmad looga danbeeyo ayoow dhahay.

Ninkaas ROOMAANIGA ah Nabi Ciise ka hor ayoow qoray Buugaas.

**THANUUN SUUDAANI** ah MASAARINA ah

Waxaa jiro nin Suufi ahaay aadna u xigmad badnaay Muslim waaye ninkaas SUUDAAN ayoow u dhashay.

magaciisa THANUUN baa la dhahaa Bulshada Nuuba ayoow isir ahaan ka dhashay.Nuuba qofka aanan aqoonin .(Fanaanka maxamad wardi ayaa ka dhashay)

Masar & Suudaan dhulka u dhexeeyo ayeey degaan.

**#DANUUN magac** sir ah miyoow yaqiinay oowna Rabi ku baryay?.

Magac qarsoon miyaa jiro aanan Quraanka sheegin kaasoo hadii Allaah lagu baryo durba ducadeena ajiibaayo?.

SUUFIYADA qaarkood weliba inbadan oo iyaga kamid ah waxaas ayeey aaminsan yihiin.

Rabi in la baryo marka la dhiban yahay waa dhaqanka Anbiyada .Nabi baa jiray Ilmo la`aan ka cawday. Eebbe ayoow baryay waana loo aqbalay ducadaas.

Waxeey dhahaan magac qarsoon ayoow Rabi ku tuugay DANUUN. midaas baan dabagalay misane waxaa iisoo baxday in eeysan waxba ka jirin warkaas.

Ereyada oow adeegsaday waa intaas Quraanka ku dhigan wax dhaafsiisan oow ku dhawaaqay ma jirin Nabigaas.

======================

**SUUFIYADA&RUUXDA.**

وَٱلأَنْعَامَ خَلَقَهَا لَكُمْ فِيهَا دِفْءٌ وَمَنَافِعُ وَمِنْهَا تَأْكُلُونَ

(أَتَىٰ أَمْرُ ٱللَّهِ5)

Suufiyada waxeey dhahaan Nabi Muxamad dartiis ayaaba ADUUNKA loo uumay.

hadalkooda qeeyb ahaan waa ka run

وَٱلأَنْعَامَ خَلَقَهَا لَكُمْ

ADUUNKAAN WEEYNINKA BADAN. Ilmaha Nabi aadan dhalay ayaa loo abuuray in eey Rabi ku dhex caabudaan. Xoolaha aan dhaqano sida Geela&Gamaanka waxaa loo abuuray in aan u kaashano sida aan ugu dul noolaan laheeyn Aduunka.

-Xoolaha marka aakhiro loo dareero iyaga ciida ayeey ku darmayaan weeyna cibaadeeysan jireen marka aduunka la joogay.

cibaadadooda Jano kuma mudan Naarna looma kaxeeynin sababta sidaas loo yeelay ayaa ah iyaga AMAANO DUSHA uma ridanin.Nabi Aadan ayaa soo xanbaaray AMAANADA waana CADAALADA.

Geel meel ku shirsan oo laba murantay u kala gar naqaayo ma arkeeysid weligaa hadaa joogtid aduunka, waayo amaano dusha uma ridanin .

إِنَّا عَرَضْنَا ٱلأَمَانَةَ عَلَى ٱلسَّمَاوَاتِ وَٱلأَرْضِ وَٱلْجِبَالِ فَأبَيْنَ أَن يَحْمِلْنَهَا وَأَشْفَقْنَ مِنْهَا وَحَمَلَهَا ٱلإِنْسَانُ إِنَّهُ كَانَ ظَلُوماً جَهُولاً

[الأحزاب 72 )

-Nabi Daa-uud dumar oow u kala garnaqaayay ayoow gartooda gefay. tii afmiinshaarka eheeyd ayoow ilmihii leesku heestay siiyay , kadibna Nabi Suleeymaan ayaa ka soo dhiciyay. isaga ayaa gartii u naqay sidii saxda eheeyd. waatuu Nabi Daa-uud sujuud u hoobtay

dhanka Rabi ayaa lagala soo hadlay darajo ayaana la dalacsiiyay. "KHALIIFKII ARLADA"

naaneestaas ayaa lasiiyay . Nabi Muuse isagana "Kaliimu laahi " ayaa lagu naaneesaa. Nabi Ciise isana "RUUXU-LLAAHI"
Nabi Ibraahim "Khaliilu-llaahi"
1400 sano kahor sidaas aan Aayadahaas u fasiray looma fasiri jirin. ha ogaado aqristaheena.
Ilhaam Eebbe weeyaane awoodeeyda kuma helin.

----------------

========================================

**#AAKHIRO DADKA 3 koox ayaa loo qeeybsamayaa**

.

سورة الواقعة

وَكُنتُمْ أَزْوَاجاً ثَلاَثَةً
3 koox ayaa loo qeeybsamayaa
1)...koox midigta la marin doono waana        Ahlu janaha.
2)....koox bidix la marin doono waana ahlunaar kuwaas.
**3)kooxda**
sedaxaad
waa kooxdii horeeysay waana kooxda aan  dartood u qornay Buugaan
waa Dadka hadeer ku dhex nool JANADA

waxaana loo yaqaanaa
وَٱلسَّابِقُونَ ٱلسَّابِقُونَ

أُوْلَـٰٓئِكَ ٱلْمُقَرَّبُونَ
فِى جَنَّاتِ ٱلنَّعِيمِ
kooxdaan *SAABIQIINTA, AH*
iyaga maba la xisaabindoono. waa hore ayeey ku dhex noolaayeen Jannada.
Tafsiirkaasna waa mid cusub aan hada soo kordhinay Kutubada kama dhex heleeysid
xogta nuucaan ah Afkeey doonto haku qornaatee Carabi ama Ingiriisi.
**Af-soomaali** in eey ku soo baxdo ayaa amaan noogu filan lagana sii tarjumo. halka waayadii hore xogta tafsiirka ku saabsan Afcarbeedka laga soo tarjumi jiray.
Aayado badan ayaa jiray kuwaasoo aan tafsiir cusub dulsaaray .qisada Nabi Daa-uud lagu canaantay qisadaas ayaa kamid ah.
waxa aan tafsiir cusub dulsaaray.
-Lugaha la feeydi doono ayaa kamid ah. in eey yihiin Gaalada lugahooda.
-Barzakha labada Badood la kala dhex dhigay ayaa kamid ah.
-Suurada Axzaab aayada 72

amaanada eey ka hadashay waa Cadaalada. ayaan ku fasiray balse cibaado loolama jeedo . shinbiraha weey cibaadeestaan Buurahana waa lamid.

halkaasna Fasir cusub ayaan dulsaaray, intaas & inkabadan weey jiraan qoraaladeeyda hore ayaadna ka dhex aqrisan kartaa kuna saxiixan.

ZEEYLAC-BAALI.

--------------------------

**#DADKA dhamaantood** Qabriga ayaa laga soo saari doonaa Qiyaamaha ayaa loo dareeri doonaa.

waxaa suuragal ah Nabi Nuux qoomkiisa waa hore in la xisaabiyay

Jano & Naarna eeyba u kala hoydeen .

-xigmada ku jirto waa maxay in adiga & Nabi Nuux qoomkiisa hal meel leeskugu keeno , wax idinka dhexeeyo ayaanan jirin hal qof oo qoomkaas kamid ah oo aad muranteen ayaanan jirin. qof iyaga ka tirsan ma dilin adiga.

ma ii sheegi kartaa waxa kaaga xiran in leesla sugo qoomkaas qarniyada badan kahor dhinteen.

-laga yaabee in aad ku fekertid Ciida ayaaba laqday Jirkooda wax kanool Lafahooda ayaanan jirin .

arimahaas waaa hore ayaa laga dooday , qof dhintay ayaa jiro Qabrigiisana yahay

Caloosha Libaaxa ama Caloosha Nibiriga

oo waxaa cunay Libaax ama JEBISO ayaa duuduub u leqday

-Qofka waa lasoo nooleeynayaa Jir cusub ayaana loo sameeynayaa

la mid ah jirka oow lahaan jiray markoow joogay Aduunka.

وَمَا يَشْعُرُونَ أَيَّانَ يُبْعَثُونَ

النمل-65

المؤمنون

35/82

أَيَعِدُكُمْ أَنَّكُمْ إِذَا مِتُّمْ وَكُنتُمْ تُرَاباً وَعِظاماً أَنَّكُمْ مُّخْرَجُونَ

Qoraalkaan sare ku dhigan qoraalada kale ayaa ka awood badan daliil ahaan.

**Qoraalka. 3 koox** ayaa loo qeeybsamayaa

Qiyaamaha.

midaas ayaa ugu wanaagsan .

========================================

**#Noocyada Jannada:**

وَلِمَنْ خَافَ مَقَامَ رَب هِ جَنَّتَانِ ( ٤٦ )

Qofka  ka cabsada  rabbi hor istaagiisa waxa u sugan laba janno

.

Labadaas JANNO bal aan macneeyo Culimadii hore

weey hareer mareen reed mareen  ujeedka Rabi ka lahaay labadaas JANNO.ujeedo aanan eheeyn ayeey ku fasireen.

1-aad

waa Jannada  oow qofka hadeer gelaayo markoow dhinto .

2-aad

waa Jannada oow geli doono marka lees xisaabiyo ka dib.

labadaas Janno ee naloo sheegay wax farqi ah uma dhexeeyo kaliya waxa loo yiri laba Jano ayeey leeyihiin ayaa ah in laba jeer loo kala hoyanaayo

hadeer Nabi Nuux waxoow ku jiraa Janada

1-aad

Fircoown isagana waxoow ku jiraa

Naarta 1-aad.

hadhoow waa laga soo saarayaa

isla Suurada Alraxmaan waxaa ku qoran

يُعْرَفُ ٱلْمُجْرِمُونَ بِسِيمَاهُمْ فَيُؤْخَذُ بِٱلنَّوَاصِى وَٱلأَقْدَامِ

Fircoown hadhoow  marka oow la haasaawo Sheeydaanka oowna Kursi dul dhigto Naarta Jahanama ayoow dhahayaa Fircoonoow kuma qasbin

balse dhegta ayaan waxyi xumaan falid ah kuugu sheegay. qalbigaaga ayaan uqurxiyay caruur la dilo masaakiinta oo laxasuuqo  adigana waad iga aqbashay

hooygeena waa halkaan Naarta ah

waana ku waareeynaa weligeen.

Fircoown Naarta 1-aad.

waxoow ku dhex jiri doonaa

(laa bithiina fiihaa axqaaban )

markoow dhintay ilaa marka Aduunka la rogo

kadib waa laga saarayaa lana dhahayaa isaga & Abuu jahal, bal sujuuda Rabi u sajuuda. mana sujuudayaan

Qoobab-kooda ayaa Surwaalada Naarta ah laga feeydayaa si eeysan ugu marmarsiyoonin sideen u sujuudnaa Surwaal Naar ah ayaa noo xirane.

-Qoobka ayeey calaamad ku lahaan doonaan

& Fooda kuwii Naarta laga soo saaray.

Fircoown & Abuu Lahab

& Dadka lamid ah lama xisaabinaayo

iyaga waa uun ku xareeya Naarta.

cida la xisaabinaayo waa Umada oow ku yeeray Buunka Qiyaamaha waxeeyna iskugu jiraan Muslimiin & Gaalo sidaas ayaa bidix & midig loogu kala beerayaa, balse Fircoown & Nabi Nuux kuwaas xisaab uma taalo qoomna waa Saabiquun qoomka kalana Rabi waxoow yiri maba xisaabinaayi waaba ii xakuman yihiin.

فَإِذَا ٱنشَقَّتِ ٱلسَّمَآءُ فَكَانَتْ وَرْدَةً كَٱلدِّهَانِ

فَيَوْمَئِذٍ لاَّ يُسْأَلُ عَن ذَنبِهِ إِنسٌ وَلاَ جَآنٌّ

يُعْرَفُ ٱلْمُجْرِمُونَ بِسِيمَاهُمْ فَيُؤْخَذُ بِٱلنَّوَاصِى وَٱلأَقْدَامِ

suurada Al Arraxmaan qeeybaha sare waxeey ka hadashay Ahlu naarka.

fasir cusub ayaan dulsaaray ka duwan kuwii hore.

**Labadaas JANNO** bal aan macneeyo

وَمِن دُونِهِمَا جَنَّتَانِ ( ٦٢ )

JANNADA

1-AAD

-Waa janno leh caleemo barwaaqaysan

-waxa dhex soconaya laba ilood

-dhexdooda waxa ahaaday faakiho dhamaanteed oo laba nooca.

- waxay ku dingiigaan (ku jiifaan) furaashyo

Suuratu Arraxmaan:Aayada 46-60

ayoow kaga hadlay Eebbe Janada

1-Aad

waxoow ku gunaanuday ixsaanka qofkii falaa abaal kiisa waa in loo sama falaa.

kadib ayoow hadana isla JANADII

1-Aad

mid aanan waxba ka duwaneeyn meesha ku qoray

wax yar uunbaa lagu soo kordhiyay.

labada Janno waxba kuma kala duwana.sidaan hoos ku arki doono.

**-Labada Janno ayoow tilmaamahooda texayaa Eebbe**.

-waxa dhexdooda jooga dumar indhahoodu ku koobanyihiin (ragooda oo kaliya) oo aanay taabanin insi ka horeeyey & jinni toona (dumar bikro ah)

- waxaad moodaa (quruxda dumarkaas) yaaquut (macdan qaaliya) & marjaan (dheeman)

- miraha jannaduna aadbay ugu dhow yihiin .

-Samo falka abaalkiisu miyaanu ahayn wanaag?.

========================

**Tilmaamaha labada Janno mida**

1-aad & 2-aad

-waa laba janno oo cagaar madoobaaday.

-waxa dhexdooda ahaaday laba ilood oo burqanaya.

-waxa dhexdooda ahaaday faakiho, timir & ruumaan.

-waxa dhexdooda ahaaday dumar (qurxoon)

Suuratu Arraxmaan: 48-60

60-75

-xuurul cayn ku asturan teendhadooda.

-may taabanin insi ka horeeyey & jinniba .

-waxay ku dingiigaan (ku jiifaan) barkimooyin cagaaran & furaash qurxoon.

------------------

**#labada jano**

Dhimashada laba jeer la dhimanaayo

ayeey la xiriirtaa .

وَهُوَ ٱلَّذِيٓ أَحۡيَاكُمۡ ثُمَّ يُمِيتُكُمۡ ثُمَّ يُحۡيِيكُمۡ

الحج

66

hadeer marka oow qofka dhinto Jano ayoow gelayaa

hadhoow marka Buunka

qiyaamo la yeeriyo dhamaan waxa Jano dhex joogo & waxa Aduunka ku nool waa la dhimanayaa.

kadib ayaa lasoo wada noolaanayaa.

Qubuuraha laga soo fuucayaa waana dhimashada labaad marka eey dhacdo kadib.

Nabiga waatuu dhahayay Qabriga ayaan kasoo baxayaa Nabi Muuse baan arkayaa isaga oo Carshiga tiirkiisa cuskan ma ogi in oow suuxay sida Dadka u wada suuxeen  hadal aanan hadeer wada xusuusan balse nuxurkiisa sidaas yahay baa Nabiga ka sugnaaday.  asalka waxaa ii ah  Quraanka. hadal ku qurxin baan usoo qaataa Xadiiska.

قَالُواْ رَبَّنَآ أَمَتَّنَا ٱثْنَتَيْنِ وَأَحْيَيْتَنَا ٱثْنَتَيْنِ فَٱعْتَرَفْنَا بِذُنُوبِنَا فَهَلْ إِلَىٰ خُرُوجٍ مِّن سَبِيلٍ

غافر

11

arintaan ku saabsan dhimashada labada jeer qormo hore ayaan uga faalooday hada is xusuusin baan halkaan ugu qoray.

======================================

**#Tafsiirka Aayadaan**

يَوْمَ يُكْشَفُ عَن سَاقٍ

1400 sano

ayaa lagu muran sanaay Aayadaan arimaheeda

qolo walbana dhan beey u fasiratay.

FASIR CUSUB  ayaan saaray.

Aayadaan waxeey ka hadleeysaa Gaalada marka lajoogo Aakhiro

Rabi ayaa dhihi doono bal Sujuuda cadaabka ayaana laga feeydayaa ilaa qoobabkooda

ileeyn cadaabka waa sida Dharka Surwaal & Shaati loogeliyo qofka Gaaloobay

marka waa laga feeydayaa waxaana la leeyahay horay waad ugu sujuudi weeyseen Rabigiina bal maanta cadaabka ayaa leeydinka yareeynayaa bal u sujuuda Eebbe . mana sujuudayaan xiligaasna.

يَوْمَ يُكْشَفُ عَن سَاقٍ وَيُدْعَوْنَ إِلَى ٱلسُّجُودِ فَلاَ يَسْتَطِيعُونَ

سورة القلم 42

Aayadaas waxeey lamid tahay Aayadaan hoos ku qoran.

وَلَوْ رَحِمْنَاهُمْ وَكَشَفْنَا مَا بِهِمْ مِّن ضُرٍّ لَّلَجُّواْ فِى طُغْيَانِهِمْ يَعْمَهُونَ

hadii aan u naxariisano dib ugu celino Aduunka halkii ayeey ka wadayaan denbi falida .

-----------

**maalin SHANSHO la feeydi doono**

gaaladana la dhihi doono sujuuda mana awoodayaan sujuuda(1.)

SHANSHO/MAJINTA.....(2)

maalin SHANSHADA Gaalada laga feeydi doono Naarta

lana dhihi doono bal sujuuda  mana awoodi doonaan

Nabiga Nin ehelkiisa kamid ah ayaa jiro Dhuxulo Naareed cirbaha laga saari doono .

(can saaqihim al naar)

-Surwaal & shaati Laami ka sameeysan ama dhaamur  balse Naar ah ayaa loo gelinayaa .

waxa laga siibayaa dharkaas naarta ah ilaa qoobka ayaa loogu ekeeynayaa lana dhahayaa bal sujuuda horaanba waad u sujuudi weeyseen idinka oo caafimaad qabo kolkaad joogteen aduunka.

-Culimadii ku hoowlaneed Tafsiirka Quraanka, laba ayeey u qeeyb sameen marka laga hadlaayo Aayadaas , qaar Rabi Jir ahaan ayoow ujiraa ayeey dheheen , qaar kalana weey Ta`wiiliyaan marka laga hadlaayo Eebbe.

warlaqabay xiiso maleh wax cusub hadii aadan qoreeynin hadaltiro mafiicna.

-Sheekh Maxamad Cabdulaahi Daraaz.

markoow qoraayay Buugiisa AKHLAAQDA QURAANKA

waxoow aqristaha u balan qaaday wax cusub

ayeey indhahaada aqrin doonaan balse waxa eey Galbeedka qoreen ama Muslimiinta qoraaladoodii hore dib uma qori dooni ayoow dhahay.

waana ka dhabeeyay qeeyb ahaan fikrado wada cusub ayoow kusoo bandhigay Buugaas.

isaga ayaa mudan in lagu deysado muqalid aanan la ahaanin .

----

-Gaalada dhar ka sameeysan dhaamur/Laami ayaa loo gelinayaa oo Naar ah

waxa laga feeydaayo gaalada ayaa ah dharkaas ku dhegan.

Quraanka waxaa fiican in Quraan kale lafu fasiro

وَلَوْ رَحِمْنَاهُمْ وَكَشَفْنَا مَا بِهِمْ مِّن ضُرٍّ لَّلَجُّواْ فِى طُغْيَانِهِمْ يَعْمَهُونَ

خَاشِعَةً أَبْصَارُهُمْ تَرْهَقُهُمْ ذِلَّةٌ وَقَدْ كَانُواْ يُدْعَوْنَ إِلَى ٱلسُّجُودِ وَهُمْ سَالِمُونَ

المؤمنون

75

-Gaal in oow Rabi arko iskaba daaye Nabiyada ayeeysan arki doonin.

------------

**Ustaad**

C/kariim sheeq maxamad  Jigjigaawi.

**Tafsiirka Quraanka** qoraal ahaan  Laba JUZ  ayoow fasiray

CAMA&TABAARAK.

markoow ka hadlaayay Aayadaas waxoow ku fasiray.

Aayada 41 suurada Alqalam.

Illaah waxuu yiri uga warran dadka nabigaan sharafka lahoow

maalinta la tafa xeeydan doono dhibaato daraadeed ee ay gaaladu ku dacwoon doonaan Muslin baan ahayn ee lagu imtixaani doono sida salaadda loo tukado ee ay kari waayi doonaan.

sidaas oow u fasiray waa Tafsiirka soomaalida ku caan tahay sheeqooduna waa labadii sheeq

Tafsiir al jalaaleeyn.

======================================

(1.)Tafsiirka oow qoray IMAAM Fakhra diin al raazi marka oow  fasiraayo aayadaan aad boow ugu dheeraaday aragtiyo aad u tira badan ayoow soo uruuriyay kuna qoran halkaas  balse sida aan u fasiray isaga uma  fasirine ogsoonoow..

======================

(2.)Tafsiirka Afsoomaaliga ah oowna qoray Xasan yacquub sanadka 2010

wax oow qalday ayaan arkaayay .Caqiido ahaan in oow Reer Aalasacuud yahay

ayaa ku cad meesha , cidaas caqiidadooda ku dhisantahay Rabi Jir ahaan ayoow u jiraa .

Xasan yacquub halkoow ka dhihi lahaay SHANSHO ayoow ka dhigay DHUDHUN

**DHUDHUN** waxaa lagu magacaabaa Gacanta qeeyb ka mid ah ,dadkii hore cabir ahaan beey u adeegsan jireen marka dharka la cabiraayo hal dhudhun & taako ii jar ayaa la dhihi jiray .halka hadeer laga is ticmaalo YAARDI.

ii dhudhumi ayaa la dhihi jiray ama ii xusuli.Afsoomaaliga lahjada ugu caansan waa midaas.

- Tafsiirka Afsoomaaliga ah ee oowqoray Sheekh maxamuud maxamad cabdi. Allaha u naxariistee waa Tafsiir Afsoomaali ku qoran qoraal ahaan midkii ugu horeeyay oo Bulshadeena loo qoray.sanadka 1990-kii xiliyadaas ayaa la daabacay . isagana halkoow ka dhihi lahaay "maalin SHANSHO la feeydi doono" waxoow ka dhigay maalin DHUDHUN la feeydi doono .

Quraanka meelo badan ayaa lagu xusay Lugo lafeeydaayo sida qisadii Balqiisa & Nabi Suleeymaan .

**-shansho & Dhudhun ma isku midbaa?.**

Qaamuuska KEENA DIID waxoow ku fasiray .

Dhudhun =gacanta inta u dhexeeyso xusulka & sacabka.

Shansho= xubinta Boowdada & dhudhunka u dhexeeyso.

-Lugta dhudhunkeeda in eey dhahaan ayaa wacneeyd

lahjad ahaan markaan Qaamuuska ka baaray waa lahjad jirto balse mid shaacbaxsan ma ahan mida kale ayaa ka caansan.Reer Bariga in eey adeegsadaan lahjadaas baan u maleeynayaa mana hubo.

aniga weey igu cusubtahay lahjadaas. hadeer ayaana maqalkeeda iigu horeeysay sidaas baan hadalka u badiyay.

Lugta dhudhunkeeda sidaas in loo qoro ayaa ila quman si loo kala garto dhudhunka laga hadlaayo midkuu yahay.

-Gacanta dhudhunkeeda.

-Lugta dhudhunkeeda.

================================

**#Ragii maqnaay** ee lagu riyooday iyagoo Janada dhex dabaalanayo.

Xadiis waxaa jiray Imaam Axmad weriyay.

**Qof dumar ah** ayaa waxeey ku riyootay
iyadoo Janada dhex joogto waxeey maqashay
jug culus markaas ayaa waxaa balaqmay albaabada Janada waxeeyna ku dhex aragtay 12 nin ku waas oo eey taqiinay
iyada duulaana ku maqnaay
xiligii nabiga.

waxeey tiri Webiga ayeey ku dabaasheen deedna waxa uu muuqaalkooda u ekaaday dayaxoo 14 maraayo.

Cunto ayaan la cunay. riyadiina halkaas beey ku dhamaatay.

'Naagtaas markeey ka tagtay Nabiga agtiisa waxaa loosoo sheegay Nabiga Ragii duulaanka u baxay in eey shahiideen waxoow yiri riyada Naagta ku riyootay & warbixinta ka timid ciidanka dhankiisa ayaa isku mid noqday.

- Xadiiskaas waxaan udaliishaday dadkaas geeridooda la soo sheegay in eey Jano u hoydeen.

**Shinbiro lagama dhigin** Shuhadada .inta eey miro cunaan Carshiga u hoydo habeenkii . Xadiiskaas
Ahlu janaha ku sifeeyay Shinbiro waan diiday aniga .
sida Aayada sheegtay ayaa xaqiiqo ah ehelkooda in eey la nool yihiin loona guuriyay Gabdho xooralceeyn ah.

*hadii aad igu tiri ha iga tuurine ii xali xadiiskaas. waxaan ku iri aniguna xadiiska booska oow ku qoran yahay booskiisa maahan. xadiiska xiliga oow ka hadlaayay waa xiligii Nabi Aadan dhabarkiisa dadka laga soo saaray kadibna Toowxiidka loo qabtay dibna looguma laaban duudkii Nabi aadan balse Arwaaxda sida shinbiro ayaa laga dhigay oo waxeey ku hoos nooshahay Carshiga. canuga aanan weli dhalan 2026 ruuxdiisa waxeey ku hoos nooshahay Carshiga waana sida Shinbirro. xadiiska booskiisa waa halkaas balse Qaf weeyn oo dhintay.jir ahaana loo uumay Janada dhexdeeda sida shinbir uguma dhex noola.

**-------------------------------------------**

**#Ganacsadihii Janada galay.**

nin ayaa dhintay oo wuxuu galayaa jannada, waxa lagu yiri: maxaad qaban jirtay? Wuxuu yiri: wuu xasuustay ama waa la xasuusiyey, waxaan ahaa nin ganacsade ah, waxaan cafin jiray qofka daynta lagu leeyahay. waa loo danbi dhaafay isaguna.

Saxiix Muslim: 2927

**.**Xadiiskaas doodeena ayoow xoojinayaa
Ninkaasna halka oow kasoo dhex hadlaayo waa Janada
balse Qabriga kama soo dhex qorin warbixinta.

================

**Nin ayaa  lagu dhex arkay janada** Nabiga ayaana soo arkay. waxa oow Janada ku galay ninkaas ayaa ah  jidka ayoow jidgooyada ka leexin jiray.

Saxiix Muslim: 1914

-waxyaabaha bulshada wada leedahay qofkii dayactiro Jano ayoow ku gelayaa.

-Ninkaas Janada lagu dhex arkay isaguna miisaankeena ayoow cusleeynayaa.

waa qof nool oo janada dhex wareegaayo balse Shinbir maahan buubeeyso.

====================================================

**Nin Janada Quraan** ku dhex aqrinaayo.

Nabigaa yiri Waan seexday oo waxaan isku arkay anigoo jooga Jannada, waxaan maqlay cod quraan akhrinaya, waxaan iri: waa kuma? Waxay dhaheen: waa Xaarith binu Nucmaan.

wuxuu yiri Nabiga

Waa taas baarinimada waa taas baarinimo

Xaarith wuxuun ahaa dadka ka ugu baarisan hooyadii

Musnad Imaam Axmad: 1332

-maxaa kaaga baxay xadiiskaas?.

-in qof nool  Quraan ku dhex  aqrinaayo Janada.

haduu Shinbir ahaan lahaay Quraan maba aqriyeen soow maahan?.

-Nabiga riyadiisa waxyi waaye .Nabi Ibraahim waatuu ku riyooday isagoo Ismaaciil Ableey usito.

riyada Nabiyada waa waxyi.

-Ninka oow Nabiga ka hadalaayo xiligaas maba noola. haduu joogi lahaay magaalada iigu yeera aan ugu bishaareeyee Janada. ayoow dhihi lahaay.

-waxaa halkaas ku cad in qofkaas QABRIGA aanan qudaar Janada laga soo guray loogu dhex keenin balse oow ku dhex nool yahay JANADA.

========================================

**Qasriga nabiga ee Daruurta la moodo**

Nabiga waxa kale oo la tusay guri sida daruurta oo kale ah, markaasuu jeclaystay inuu galo balse malaa'iktii ayaa ku tiri: ma gali kartid oo cimrigaagii aduunyada ma aadan dhamaysanin. hadii aad dhamaysato waad iman gurigaaga"

Bukhaari: 1320

halkaas waxaa kuugu cad Nabiga in oowsan ku jirin Xabaasha balse oow Janada dhex joogo.
waayo markaad dhimatid ayaad dhex degeeysaa baa layiri gurigaaga janada. hadeerna Nabiga in oow xijaabtay waa xaqiiq.
------------------------------------

**BURCO &HARGEEYSA**

1960-kii

Qasiido

Yaa Khayr-alanaamii
Yaa Khayr-alanaamii
Calaykaa Salaamii

Sariirtii jannada
Lagu seexshay Nebigii

Yaa khayral anaamii.
Yaa Khayr-alanaamii
Calaykaa salaamii

Qasiidan waxaan usoo qaatay si eey daliil iigu noqoto in Nabiga oow ku jiro Janada.

--------------------------------------

**#Nabi Ibraahim Ilmo** ayoow Janada ku dhex hayaa hadeer oo ah sanadka 2025.

Nabiga habeen kii Cirka loo qaaday ee Janada lasoo tusay.

waxoow soo arkay Nabi Ibraahim & AFADIISA Sahro ah oo Caruur badan meel beer ah la dhex joogo.

Malagii Nabiga lasocday habeenkaas ayaa yiri

""Ninkii dheeraa ee beerta joogay waa Ibraahiim, caruutii hareertiisa joogtayna waa ilmo kasta oo fidrada

ku dhashay. Muslimiintii qaar kamida ayaa dhahay: Rasuulkii Ilaahayow & caruurta gaalada? Wuxuu yiri: & caruurta gaalada""

Bukhaari: 7047

-TACLIIQ aan dulsaaro Xadiiskaas.

sheekadaas waxaa iiga baxay in Nabi Ibraahim ku dhex nool yahay JANADA

caruur walba oo la dhalay markeey ilmo-nimo ku dhintaan ilmahaas yar waa ahlu jano. waalidkiis waxeey ku nool yihiin Aduunka isagana Rabi ayaa ruuxda ka qaaday

JANADA ayoowna dhex geeyay. inta eey uga imaanaayaan labadiisa waalid waxaa loo dhiibay Nabi Ibraahim & xaaskiisa SAHRO ah.

**Xadiiskaas waa mid taageersan doodeena**

ku dhisan qofka dhintay JANADA ayoow dhex degan yahay balse Qabriga kuma dhex noola.

xaaskii Nabi Ibraahim waataas Xadiiska kadhex muuqato iyadoo Ilmaha siihaay layiri. inta waalidkood Janada dhex imaanayaan ama Naar u hoyaadayaan

(<u>fariiqun fil janati wa fariiqun fi saciir</u>)

**Nabiyada** ineey JANADA ku dhex noolyihiin ayeey daliil u tahay midaas.

**murqaheeyga** curinta ayaan jeclahay in aan aqristaheeyga halkaan ugu soo bandhigo.

Nabi Muxamad maanta kuma noola Aduunka

Ilmo badan ayaana ka saqiiray Nabigeena , Ilmahaas oow dhalay Nabi Muxamad Janada ayeey dhex joogaan sida Ilmaha ku xusan xadiiskaas kor kudhigan ayeeyna lamid yihiin.

Nabi Muxamad intoow Aduunka ku noolaay Nabi Ibraahim haba sii haayo Ubadkoow nabigeena dhalay

Janada haba la joogeen balse markoow Nabigeena dhintay kadib in la yiraahdo Ubadkii Nabiga dhalay weli waxeey la sii joogayaan Nabi Ibraahim midaas wax maangal ah maahan.

1400 sano kahor haduu geeriyooda Nabigeena waxaanan maangal eheeyn in isaga & ubadkiisa laba meel ku kala noolaadaan

ilmahiisana loo geeyo Nabi Ibraahim isagana oow ku dhex noolaado Xabaalaha.

- waa xaqiiq Nabi muxamad in oow la nool yahay ubadkoow isaga dhalay.

Nabi Ibraahimna looma geeynin ubadkii Nabiga balse waxeey ku dhex nool yihiin Qasriga oow Nabiga ku dhex leeyahay JANADA.

Maama khadiijo ayeeyna la nool yihiin.

**-Nabi Ibraahim** maxaa loogu doortay in oow Ilmaha la dhex joogo Janada?.

su`aasha nuucaas ah sheekheena C. KISHKI kama jawaabi karo.

Sheeq C/ SHARIIF isagana kuma dhaco in oow aayad ka qaato halkaas.

- sidaas maxaan u leeyahay?

SUUFIYADA ayaa waxeey u gefeen Nabi Ibraahim

ushaan u weday iyaga ayaan kala dul dhacay labadaas Wadaad.
aan usoo noqono su`aashaas jawaabteeda.
sooyaalka Nabi Ibraahim qofkii si wacan u dhuuxay
qiso xanuun badan ayeey soo mareen qooskaas waatii Nabi Ibraahim lagu imtixaanay in oow Ableey uqaato wiilkiisa.
bal qiyaas Oday waayeel ah, in mudo ah aanan wax ubad ah la siinin markoow hal wiil ku curtay lagu imtixaanay in oow wiilkiisa goowraco.
sida aad igu amartay ayaan sameeynayaa waana qaatay amarkaaga Eebbe ayeey noqotay jawaabtiisa
isagana waxaa loogu abaal guday aduunka in oow noqdo Nabiga kaliya ee dhalay waxa Nabiyo aduunka loo soo diray Aakhirana waxaa loogu abaal guday in eey hareerahiisa joogaan Ubadkii JANADA.
-SUUFIYADA maxeey ku qaldameen?.
waxeey dhaheen Nabi Ibraahim in oow hurdo seexdo ayoow ku qaldanaay qof seexday ayaa wax ku riyoodo haduusan seexan laheeyn riyadaas maba oowsan arkeen.
SUUFIYADA waxeeysan ogeeyn Nabiyada iyagoonan hurdin ayeey riyo wax ku arkaan. iyagoo nala joogo ayeey Janada

kasoo waramaan. Janada ayaan dhex galay imisa jeer ayoow sheegay Nabiga waana lajoogay Asxaabtiisa.

-----------------------------------

**#UBADKII JANADA.**

**Xadiis kale oo ku saabsan** Caruur Janada ku dhex nool.

Abi Xasaan waxa laga wariyey inuu yiri: waxaan Abuhurayra ku dhahay: "waxaa iga dhintay laba wiil ee maxaad nooga sheegi kartaa rasuulkii Ilaahay (scw) xadiis naftayada uga bishaareeya caruurtii naga dhimatay? Wuxuu yiri: haa, caruurtoodu waxay galayaan jannada (meel kasta), midkood wuxuu la kulmayaa aabihii ama labadiisa waalid, wuxuuna qabanayayaa maradiisa ama wuxuu yiri gacantiisa sida aan iminka u hayo maradaada dacalkeeda, mana sii daynayo illamaa Ilaahay galiyo isaga & aabihiiba jannada”

Saxiix Muslim: 2635

**TACLIIQ**

halkaasna waxaa iiga baxay Caruurtii Aabahood & Hooyadood in eey u gargaarayaan Nabi Ibraahimna usoo fasaxaayo si eey u la kulmaan waalidkood.

waxaa meesha ku cad Caruurtaas in eeysan Qabriga ku dhex nooleeyn balse Janada la dhex dejiyay.
-waxaanan maangal eheeyn in Nabi Muxamad ku dhex noolyahay Xabaasha Xaaskii Nabi Ibraahimna JANADA.
-waxaanan maangal eheeyn Ubadkii Nabigeena ee ilmo nimada kaga saqiiray in Nabi Ibraahim loo geeyo.
Nabi Muxamadna Qabriga loogu dhex geeyo Qurdaar
natiijada doodooda ayaa sidaas ah kuwa diidan qofka dhintay ee suubanaay JANADA ayoow gelayaa balse Xabaasha dhex deeda baraare loogama dhigin.../\/

------------------------------------------------------------------------

**#Nabigaa yiri** Jannada ayaan galay xalaytoole waanan fiiriyey mise Jacfar ayaa la duulaya Malaa'ikta, Xamsana wuxuu ku dingiigaa sariir dusheeda"

المستدرك على الصحيحين

FAALO:xaqiiqo waaye Xamse JANO ayoow ku dhex nool yahay balse XABAASHA kuma dhex noola.
wax la tawiilin karo ma ahan sheekadaas.

-----------------------

**#laba Nin ayaa waxeey ka tirsanaayeen ciidankii NABIGA.**
dagaal beeyna u socdeen waxeey isku guubaabinayeen Rabi baan ku dhaartaye Buurta uxud ka soke baan ka carfinayaa Janada.
FAALO:Xabaasha ayaa Jano iiga soo caraftay ma dhihin ragaas balse Janada ayaaba ii soo udgoonaatay boow dhahayaa Ninkaas. midkale oo Jiis ahaay isagana waatuu dhahayay Lugtaan aan jiiska ka ahay ayaanba kula dhex socon doonaa JANADA . Rabina waa u aqbalay oo waxoow galay Janada.
**--------------------------------------**

**Zayid ibnu Camru ibnu Nufayl**
Zayid wuxuu ahaa nin aan soo gaarin diinta Islaamka balse haystay diintii tawxiidka ee ka dabar go'day reer Qureesheed, waana aabihii dhalay Saciid ibnu Zayid & Caatika bintu Zayid xaaskii Cumar ibnu Khadaab.
" دخلت الجنة فرأيت لزيد بن عمرو بن نفيل درجتين "
"Jannadaan galay waxaan arkay Zayid ibnu Camruu ibnu Nufayl oo leh laba darajo.
======================================

**Nabigaa yiri** Waan seexday oo waxaan isku arkay anigoo jooga Jannada, waxaan maqlay cod quraan akhrinaya, waxaan iri: waa

kuma? Waxay dhaheen: waa Xaarith binu Nucmaan, rasuulkii Ilaahay (scw) wuxuu yiri: “Waa taas baarinimado, waa taas baarinimado, wuxuuna ahaa dadka ka ugu baarisan hooyadii.

Musnadu Axmed: 1332.

TACLIIQ:

SUUFIGA waxoow dhahayaa marka aan werdiga badiyo xuska Rabi aan aad ugu xeeldheeraano

waxaa noo muuqanaayo Jannada Ubaxyadeeda.

Nabiga isaguna waaba kaas ku riyoonaayo Janada waxa ka dhex socdo halkaas.

QISO:Nin SUUFI ah ayaa meel lagu balamiyay markaasuu imaanin halkii lagu balamiyay.

waxoow yiri walaal iga raali noqo. markaan dukaday salaada ayaan daawasho u galay dad ka dhex adeegaayo Jannada hoowlaha halkaas ka socday sidaan udaawanaayay ayaa waaga iigu baryay .

hadal sidaas u dhigmo ayaan ka dhageestay Suufiyada dhankooda.

-Imaam Al-gazaali isagana waxoow yiri waxaa jiro wax yaabo aanan la ii ogoleeyn in aan ka hadlo. ama Buugaagta aan ku qoro.

waxyaabahaas laga mamnuucay in oow Buugaagta ku qoro ayaa ah daah ka qaadista loo sameeyay.indho fiiqista loo sameeyay lana tusiyay waxa JANADA dhex yaalo sida Nabi Muxamad KASHFI loo siiyay ayaa Oowliyada qaarna loo tusay waxa Janada loogu dhex diyaariyay.

وَكَذَٰلِكَ نُرِيٓ إِبْرَاهِيمَ مَلَكُوتَ ٱلسَّمَاوَاتِ وَٱلأَرْضِ وَلِيَكُونَ مِنَ ٱلْمُوقِنِينَ

saasaan u tusinnay Ibraahim xakunka samooyinka & dhulka si oow uga mid noqdo kuwa yaqiinsan.

75 Ancaam.

-Nabi Ibraahim ilmo waaye markaas eey Aayadaas ka hadleeyso . waxa la tusiyay ee halkaas ku qarsoona waa uun JANADA & Malaa`igta. dhex joogto & Nabi Aadan & inta halkaas kula nool. dhulkana waa loo soo dhaweeyay daafaha Aduunka inta ku sugan ee makhluuqaad ah ayaa la tusiyay.

-Nabi muxamd isagana waatii la dheelmiyay sida Nabi Ibraahim loo dheel miyay.dhulkaan isagoo dhex joogo waatii la tusay dacalada aduunka dadka ku sugan dhamaantood.

-KASHFIGA Suufiga ku faano ayaan kashifaad ku sameeyay .Suufi ma ihi. mana jiro siro eey ii dhiibteen oo eey  qari i dheheen.

AHLASUNA ama ASHAACIRO ama SHAAFICIYADA qolo wax igu qarsatay ayaanan jirin. qoom walbana  Quraanka ayaa inoo dhexeeyo

AHLAL QURAAN ayaan ahay

sababta aan  ugu dhiiraday in aan ka hadlo moowduucaan ku saabsan CADAAB AL QABRIGA ayaa sidaas ah.

**-Dheelmintii Nabiga.**Naarta&Janada ayaa lasoo tusay balse QABRI leesku dhex ciqaabaayo lama tusin ,taasna waxeey daliil u tahay BUG ahaanta baabka cadaabul-qabriga.

qofka dhintay Jano ayoow dhex joogaa ama Naarta. FIQHIGA ku dhex jiro  dheelminta ayaa kaas ah.

========================================

**Caamir ibnu Fahiira**

Saxaabigan wuxuu ahaan jiray adoon, waxa xoreeyey Abubakar (Rc). Waana saxaabigii Ariga Abubakar raacayay markii nabiga & Abubkar ay hijroodeen ee ay galeen godka. Wuxuu Ariga ku tirtiray raadkii.(1)

C/ibnu Abubakar oo habeenkii u iman jiray nabiga & aabihii.

Caamir ibnu Fahiira Markii la dilayey ayuu isna ku dhawaaqay: ”Waan guulaystay rabbiga kacbadaan ku dhaartee” markuu dhintay waxa la waayay maydkiisii, ninkii dilayna wuu islaamay.

-FAALO hadii aan ku darsado qisada Ninkaas ee Bukhaariga ku dhigan .

Suurada Yaasiinka Ragii qisadooda lagu dhex xusay sida Janada loo dhex geeyay

ayaa isagana Meeydkiisa loo qaaday oo halkaas looba geeyay.

raadkooda sida aad uqarisay

sida aad uraad tirtay Nabiga & Saaxiibkiis ayaa adigana Meeydkaaga loo raad tiray ayaa meesha ku qarsoon. Nabiga Nin abaal u galay Rabi uma abaal gudi waayo.

-------------------------------------------------

(1) MOOWLIIDKA.dhalashada Nabiga marka la dhigaayo lana joogo SUUFIYADA agtooda waxeey noo sheegi jireen qiso ah "QOOLEEY ayaa masaxday raadkii Nabiga & Abuu bakar

halkaas waxeey ku xaqiraayaan Ninkaas saxaabiga ah

hoowsha oow u qabtay Qarankiisa ama Diintiisa. cadawga oow ka badbaadiyay ayeeyna waxba kasoo qaadeeynin dhaliisha eey leeyihiin Suufiyada ayaa taas ah.

-Abuubakar Adoon laxoreeyo ayoow Islaamnimada kasoo bilaabay sida nooga muuqato Xadiiska.

Nabiga markoow dhimanaayay waxoow ka dardaarmay in la xaqdhoowro Adoonka ama la xoreeyo.

geeridii Nabiga kadib maxaa is bedelay?

-CARABTII waxeey noqdeen ganacsato inta dhulka Xabashida usoo dirtaan rag ka ganacsado DADKA NOOL

ayaa xiniinyaha laga bixin jiray kadibna loo dhoofin jiray dhankooda.
FUQAHADA sida SHAAFICI, MAALIG, AXMAD, ABuu XANIIFA
dhamaantoodna waxeey ku mashquulsanaayeen
oo eey ka doodayeen Adoonka haduu sayidkiisa ka baxsado salaad maka ansaxdaa mise kama ansaxdo?.
-maalin dhaweeyd waxaan dhageestay muxaadaro Sheeq Mustafe soo diyaariyay oowna kaga hadlaayay TATAARKA.
waxoow soo hadal qaaday CIZADIIN ibnu C/salaam
waa ninka lagu magacaabo SULDAAN AL CULAMAA.
Caqiido ahaan waa Wadaad ASHCARI ah 700 sano kahor ayoow noolaay.
waxyaabo badan ayoowna usoo qabtay Bulshada Muslimka ah balse waxaan dhaliilay waxa oow sheeq mustafe ku amaanayo ninkaas oo ah.
Sheeqaas Waziiro ayoow suuqa geeyay kuna dhex iibiyay sababtoo ah waxeey ahaayeen ADOOMAN
qof aanan la xoreeynin madax kama noqon karo Doowlada.
iyagoo adooman ah ayeey dalaceen. doowlada ayeeyna madax ka noqdeen.kamana ansixin dalacsiinta nuucaas ah.
qof adoon ah madax kama noqon karo doowlada Islaamka.
sidaas ayeey ku doodaaan Culimada , balse Sheeq Mustafe & inta la fekerka ah waxeeysan waxba iska weeydiinin
ragaas adoonta ah asal ahaan xagee laga soo iibiyay?.
ragaas waa caruur laga soo qafaashay dhulka gaalada waana ilmo lasoo xaday lagana soo xaday waalidkood
sida Xabashida kuwooda diinlaawayaasha ah usoo xadi jireen Amxaarada & Oromada & Soomaalida kadibna ganacsi ahaan ugu dhoofin jireen Carabaha kuwaasna waa Ubadkii laga soo xaday Dadka cadaanka ah
kadibna Muslim laga dhigay. lamana xoreeynin balse ciidan ahaan ayaa loo qortay dalka daafac baana layiri. asal ahaan sidaas beey ku noqdeen ADOON.
-asal ahaan Ubadkaas in waalidkood laga soo xado ayaaba Diin ahaan xaaraan ah Suldaanka isagana FIQHI meesha kuma haayo balse
waa muqalid iska dabagalay SHAAFICI+ ABUUXANIIFA
daliilka Quraanka kuma raacin balse oraahdooda ayoow Aayad mooday.
intaasna baraarujin beey naga tahay
BARAARUGA ISLAAMKA ayaan bartamaha kaga jirnaa
balse qolo banaanka kasoo warantay ma nihin.
arimaha ku saabsan Adoomaha waxaa buug ka qoray
CABDI ismaaciil.buuga"halgankii tukayaasha"
isaguna waa qoraa cunsuri ah qoraalkiisana dhinac boow ka wada raranyahay.
-amaanta Doowlada ITOOBIYA.
nasiib wanaag waxaa ah in ITOOBIYA sanadka 2013

eey mamnuucday kala iibsiga ilmaha yaryar.
waagi hore waxeey ahaan jirtay Ninka cad inta Itoobiya tago ayoow ka soo iibsan jiray Hooyada dhashay ilmaha.
sifo sharci ah isagoo u maraayo, ilmahana lagu qoraayo qofkii soo iibsaday.
MUSLIM &MASIIXI Bulsho ahaan taariikho aad ufool xun ayaan leenahay una baahan in la naqdiyo balse aanan lagu amaanin Aawoowayaasheen.
===================================

**Abuu Daxdaax & Umu daxdaax.**

dhaqanka Carabta ayaa ku dhisan marka eey isguursadaan lamaanayaal cusub. magacooda weey bedelaan

magaca wiilka eey dhalaan ama gabadha eey dhaleen ayeeyna qaataan sida

Abuu daxdaax & Umu daxdaax

hebel hooyadiis & hebel aabahiis

ayeey sheekada noqotaa waxaa halkaas ku qarsoon

soo caanbixin lasoo shaacbixinaayo ilmahii yaraay ee hada uun la dhalay.

**tusaale:Abuu xaamid al Gazaali.**

Xaamidka halkaas ku qoran waa wiil ka saqiiray sheeqaas wiilkale uma harin.

**DHAQANKA REER GALBEEDKA**

waa mid ku dhisan Xaaska magaca Aabaheed yeeysan ku abtirsanin balse haku abtirsato Ninka qabo magaciisa.

**dhaqanka SOOMAALIDA** intaasba waa mid qilaafsan

Ubadka magacooda ayaa loogu yeeraa

Hooyadana magaceeda ayeey wadataa Aabahana magaciisa

ayoow goonidiisa u wataa qofna qofkale masoo caanbixiyo.

aan usoo laabano

**Abuu Daxdaax**

waxoow ahaay nin Saxaabi ah waxoowna lahaay beer aseendo

ah 600 oo geed ayaa ugu dhextiilay.

Nabiga ayoow ku sadaqeestay isagana waxaa loogu

bishaareeyay JANADA.

" Rucubta laamaha Jannada oowna leeyahay

Abuu Daxdaax ayaa badan "

hadal sidaas u dhigmo ayoow sheegay Nabiga.

Saxiix Muslim: 965

FAALO:

1400 sano kahor ayoow dhintay ninkaas. sideey ilatahy Beertiisa Jannada ayoowna hoobaanta ka dhex guranayaa hadeer.

balse Xabaasha looguma dhex geeyo miro. laga soo dhex guray beertiisa Janada.

Xaaskiisa iyadana waa lamid maadaama eey ogolaatay in la iibiyo hantida Ubadkeeda laguna sadaqeesto Nabiga.

SAXWADA hada jirto FIQHIGA cusub eey la timid

ayeey ka mid tahay midaasna.

Xaaska hantida Ninkeeda xaq beey ku leedahay.

**QISO:Sheeq Abuurka Maalin.**

ww.sheekhmaalin.com

waxoow ka sheekeeyay Nin ayaa xanuunsaday

Xamar boowna ku noolaay guri weeyn oo dhoowr dabaq ah ayoow lahaay ninkaas. markoow xanuunsaday ayeey si xun ula dhaqmeen Ubadkiisa isagana inta xanaaqay ayoow yiri

Gurigaan waan iska iibinayaa kadibna MASJID ayaan ku dhisayaa lacagtiisa. sidii ayoow yeelay Masjid ayoow ku dhisay lacagtaas.

**Sheeq Maalin waa nin ZAAHID ah**

ninka sidaas yeelay ayoowna ku amaanayaa ficilkaas qaloocay.

QISADA Ninkaas hadii aan qalindaar ku sameeyo qaabka oow ula dhaqmay Ubadkiisa waa ku qaldan yahay. in oow reerka ceerteeyo, carro oow ubadkiisa uqaaday darteedna oow sidaas u sameeyo, qalad waaye midaas.

-Ninka haduu Guryo badan lahaay. guryahiisa mid kamid ahna oow iska iibiyay, kadibna oow Masjid ku dhisay lacagtaas, markaas wax dhibaato ah maleh. balse Ninkaas haduu iibiyay guriga oow reerka ku dhex noolaay

Ubadka & hooyadoodna oow ku qasbay in eey u guuraan guri kiro ah dhaqanka nuucaas ah wax lagu amaano ma ahan qofkaas.

-xidig eey Bulshadeena ku deyatana ma noqon karo ninkaas.

-Nabiga waatuu ka diiday ninkii hantidiisa wada sadaqeeyn rabay markoow sakaraadka fuulay.

**----------------------------------------------------------------------**

**--------------------------------**

## Cabdilaahi ibnu Salaam

Waa saxaabi Yahuud ah oo islaamay, waxa loogu bishaareeyey Jannada:

qof  lugeeynaayo dhulka oo ahlu jano ah haduu jiro waa Cabdilaahi ibnu Salaam

ayuu yiri Nabiga.

Bukhaari: 3601

FAALO:

1400 oo sano

kahor ayoow dhintay Ninkaas.

ma waxaan dheheeynaa

Qabriga ayaa Janno looga dhigay ?.

maya sidaas dhihi meeyno  balse sida xadiiska ku xusun ayaan ku dhegeeynaa oo ah Janada ayoow dhex lugeeynayaa sidoow Aduunka ugu dhex lugeeyn jiray. Albaabada Janadana waa loo balaqay markoow dhintay kadib. lagama xiranin lamana dhihin Xabaalaha geeya kuna quudiya halkaas.

**-Muslimiinta mad-habtooda qalafsan baan la yaabay  !**

Bisha soonqaad Albaabada Janada waa la balaqayaa beey dheheen. hadana waxeey qalbiga ka rumeeyeen in eeysan qofna geleeynin Albaabadaas la balaqay.

hadii aanan laga soo geleeynin iridaas la furay maxaa loo balaqayaa meey iskaba xirnaato ileen dadka xabaalaha ayaa furaashyada xariirta ah loo goglaye. Nabi Nuux ilaa Nabi Aadan halkaas beey ku dhex nool yihiine.

-markaan sidaas u hadlaayo Muraayada ayaan idiin soo dhaweeynayaa si aad u daawataan Mad-habtaas foosha xun. midaas ku dhisan qofka dhintay Qabriga ayaa Jano looga dhigay inta Qiyaamaha laga gaaraayo.

**-Albaabada Janada** waa la balaqayaa bisha soonqaad waa run. waana bisha Quraanka soodegay. fadligiisa ayaana dadka loogu denbi dhaafayaa. qofkii dhintay bishaas soonqaad Albaabadaas loo balaqay ayeey Malaa`igta ku soo dhaweeysaa. balse Albaab inta la furo hadana la xiraayo qofna eeysan kasoo geleeynin wax kajiro malahan waana Mad-hab qalafsan midaas.

---

**NIN HINDI AH**

Xadiiska sheegay NIN HINDI ah oo meeydkiisa la gubay
ninkaas sheekadiisa ku qoran tahay Kutubada
asal ahaan waxoow ahaay qof Muslim ah
kadibna waxoow ka dardaarmay in meeydkiisa la gubo
si oow  uga badbaado  cadaalada Eebbe
markeey gubeen oowna Danbas noqday
Webiga ayeey ku dareen qaarna hawada
kadibna Eebbe ayaa awoodiisa ku soo celiyay iskuna soo uruurushay

Ninkaas qisadiisa halka eey ku dhamaatay waa JANO
waana loo cafiyay denbigiisa.
Qiso caato ah haba iska ahaato leeskuna qilaafsan yahay balse waa qiso  aan ka dhigan karno taageero  mad-habteena cusub ayeey sii xoojisaa.

**-----------------------------------------------------------**

**#Qajaf-qajafta** gabar Janada dhex lugeeysay.
Nabigaa yiri Janadaan galay socod baan maqlay waa kuma kolkaan iri
waa Gabadhii KHUMEEYSA eheeyd baa leeygu yiri

Muslim baa weriyay.

**---------**

**Nin Saxaabi ah  ayaa yiri**"lugtaydan jiiska ah (laangadhada ) ah ayaan galinayaa Jannada.

-Xadiiskaas & Xadiisyada kale  ee kor ku dhigan    waxaa Buugiisa ku   weriyay **>Abdulaziz Mohamed Oogle**.

-xog badan oo aan u baahnaay kuna saabsan xadiiska ayaan ka faa iiday buuga oow qoray Abdulaziz Mohamed Oogle.
-qorshahaba iiguma jirin dhinaca Xadiiska ayaa taageero uga heli doontaa fikirkaan ku saabsan JANADA.
 marka aan aqriyay Buugaas lagu magacaabo" Jannada Raxmaanka"   waxaan kasoo dhex gurubsaday wax walba oo taageero u noqon karaayo moowduucaan aan ku hoowlanaay.

**-DIGNIIN**

Qoraagaas Abdulaziz Mohamed Oogle ah isaga ma diidana jiritaanka CADAAB AL-QABRIGA .

yaanan lagu qaldamin oo loo qaadanin in oow isaga ka danbeeyay Xadiisyada sida loo daliishaday ee ah Qofka dhintay Jano ayoow ku jiraa haduusan ku jirinna Naarta ayoow dhankeeda jiraa.

balse Qabriga kuma dhex noola qofka dhintay.

Cilmiga waa amaano

**BUUGAAS:Jannada Raxmaanka.**

Xadiiska ayaan kasoo minguuriyay balse

TACLIIQA ku hoos qoran waa mid ii gooni ah.

meelaha qaarna qaabka aan doono ayaan u fasirtay.

-Soomaalida wax beey dhageestaan balse wax ma aqriyaan

hadii eey wax aqriyaana laba bog kolkeey marayaan ayeey ku caajisaan waxaan ka baqayaa in qofka go`aan iska gaaro isaga oo aanan qoraalka soo wada aqrisanin biloow & dhamaad.

========================================

WAXAA HALKAAS U DHAMAADAY

AXAADIISTA NABIGA

EE DAFIRSAN JIRITAANKA

CADAABTA QABRIGA

Aayadaha Quraanka ee diidan CADAABTA QABRIGA weey noo dhiman yihiin qeeybaha danbe ayaan  ku qori doonaa iyagoo 200 bog ka badan .

**--------------------------------------------------------------**

**----------------------------------------------**

==========================================

**#AHLALA QURAAN &CADAABTA QABRIGA.**

Aqristaheena ha sii ogaado

Mad-habta AHLAL-QURAAN

weey noo imaandoontaa  qoraalkaas si gooni ah ayaan u qoray.

Aayadaha Quraanka ayaan soo tixi doonaa

ee diidan CADAABTA QABRIGA.

dabcan Quraan cusub idiinma keeni doono balse midka

maktabada idiin saaran ayaan soo daliishan doonaa.

sida hadeerba aan usoo daliishanaayo AXAADIISTA NABIGA

ee ku qoran BUKHAARI+MUSLIM.

-qofka aanan ku qancin qaabka aan hadeer usoo daliishaday

Axaadiista hadhoowna kuma qanci doono

Quraanka Aayadahiisa.

------

**Daliika CADAABTA QABRIGA** ee QURAANKA

KU DHEX QORAN!.

daliilka ugu weeyn waa Aayadaan hoos ku dhigan

kana warantay BARZAKH.

المؤمنون

99

100

---

حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءَ أَحَدَهُمُ ٱلْمَوْتُ قَالَ رَبِّ ٱرْجِعُونِ

لَعَلِّيٓ أَعْمَلُ صَالِحاً فِيمَا تَرَكْتُ كَلاَّ إِنَّهَا كَلِمَةٌ هُوَ قَآئِلُهَا وَمِن وَرَآئِهِمْ بَرْزَخٌ إِلَىٰ يَوْمِ يُبْعَثُونَ

BARZAKH= Xeendaab u dhexeeyo Aduunka inta ku nool & aakhiro inta joogto.

-Rabiyoow haleeygu celiyo Aduunka wanaag ayaan soo shaqeeysanayaa.

RABI dhinaciisa ayaa looga jawaabay waxaana lagu yiri.

مِن وَرَآئِهِمْ بَرْزَخٌ إِلَىٰ يَوْمِ يُبْعَثُونَ

dib u laabasho ma jirto xeen daab ayaa u dhexeeyo.

-hadalkaasna waxuu lamid yahay Ninkii Janada la dhex geeyay warkiisa .waa kii yiri Aduunka haleeygu celiyo

Nabi Muxamad ciidankiisa aan ka mid noqdo markale si aan SHAHIID u noqdo.

isaguna jawaabta lasiiyay waxeey noqotay

Janno qof galay dib Aduunka looguma celiyo

balse dhanbaalka waad ka dhex diri kartaa Jannada. waana loo geeynayaa Nabi Muxamad. Alcimra ka eeg dhanbaalka Ninkaas oow kasoo dhex diray Janada.

**BARZAKH=**

Aduunka ma joogo aakhirana ma jiro. jano kuma jiro Naarna ma dhex joogo.
ayeey ula jeedaan qoladaan kale oow Ibnukathiir ka waramaayo.
waana dadka aaminsan **CADAAB AL QABRI**.
-------
حَتَّىٰٓ إِذَا جَآءَ أَحَدَهُمُ ٱلْمَوْتُ قَالَ رَبِّ ٱرْجِعُونِ
halkaas waxaa kamuuqdo in sheekadaas  tahay hadeer.
Aduunka inta aanan la rogin.
-marka Aduunka larogo kadib Aakhirana la dhex joogo
Gaalka waa ogsoonyahay in aduunkii waahore eber laga dhigay meel loonoqdaana eeysan jirin.
رَبِّ ٱرْجِعُونِ
waa hadeer halagu baraarugo arinkaas.
-waxaan halkaas ka fahamnay in xiliga oow qofkaas GAALKA ah sidaas dhahaayo tahay  hadeer.
halka kan MUSLIMKA ahna Jano toos u tegaayo , ama cadaabta QABRIGA haduu faajir ahaay.
(laabithiina fiihaa axqaafan )
laga yaabee in kuwaas QABRIGA lagu cadaabaayo tahay.
waxa Aayadaas ka hadleeyso.
-------------------------------------------------------------------

**#CADAABTA QABRIGA** .majirto Quraanka ayaan ka keenay waana tan daliil keeda.

سورة الأنعام

93

وَلَوْ تَرَىٰ إِذِ ٱلظَّالِمُونَ فِى غَمَرَاتِ ٱلْمَوْتِ وَٱلْمَلاَئِكَةُ بَاسِطُوٓاْ أَيْدِيهِمْ أَخْرِجُوٓاْ أَنْفُسَكُمُ ٱلْيَوْمَ تُجْزَوْنَ عَذَابَ ٱلْهُونِ

hadaad aragto markay daalimiintu sakaraadka geerida
ku sugan yihiin Malaa`igtana eey gacmaha ku soo taagayaan
iyagoo ku dhahayo naftiina maanta badbaadiya
waxaa leeydinku abaal marinayaa cadaab duli ah.
-halkaas waxaa kaaga muuqato in Naar loo wado balse Qabriga lagu dhex ciqaabeeynin.

--

وَلَقَدْ جِئْتُمُونَا فُرَادَىٰ كَمَا خَلَقْنَاكُمْ أَوَّلَ مَرَّةٍ وَتَرَكْتُم مَّا خَوَّلْنَاكُمْ وَرَاءَ ظُهُورِكُمْ وَمَا نَرَىٰ مَعَكُمْ شُفَعَآءَكُمُ ٱلَّذِينَ زَعَمْتُمْ أَنَّهُمْ فِيكُمْ شُرَكَآءُ لَقَد تَّقَطَّعَ بَيْنَكُمْ

(ancaam 94)

94.waad noo timaadeen idinkoo kaligiin ah sidaan idinku abuurnay markii hore. waadna kasoo tagteen waxa aan idiinku nimceeynay
oo reerahii ayaad kaga timaadeen wax yaabahaas

mana ku aragno agtiina  u gargaarayaal...

xiriirkiinii waa go`ay..

========================================

**#Qofka Muslimka ah** markoow dhimanaayo sidaan beey ula dhaqantaa Malaa`igta.

سورة ابراهيم

27

يُثَبِّتُ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ آمَنُوا۟ بِٱلْقَوْلِ ٱلثَّابِتِ فِى ٱلْحَيَاةِ ٱلدُّنْيَا وَفِى ٱلآخِرَةِ وَيُضِلُّ ٱللَّهُ ٱلظَّالِمِينَ وَيَفْعَلُ ٱللَّهُ مَا يَشَآءُ

kuwa rumeeyay Rabi  Xaqa ayoow ku suggaa

markeey joogaan Aduunka & markeey joogaan Aakhiro

**Ayadaas** waxa eey ka hadleeyso waa marka oow qofka dhimanaayo agteeda

malaa igta ayaa ugu hanbalyeeyso wanaaga isaga ka horeeyo weeyna u meeyriyaan wanaaga ladonaayo in oow la tago Malaa`igta wax su aali doonto agtooda.

midka gaalka ahna sida Fircoown ayaa laga dhigayaa

"AAL AANA wa qad caseeyta "

sidaas ayaa la dhahayaa oo waxba lagama aqbalaayo qofka hadoow gaaro heerka naf ka qaadista.waana arkayaa Malaaigta. xiligaasna wax toowbad ah kama ansaxdo waa sida Fircoown xiliga dhoobada la laqsiiyay.

===================

**#Daliilka Quraanka** mise dabagalka Sheeqa daliil la`aan?
AHLAL QURAAN ayaa nahay
Sheeq ma jiro agteena Quraanka marka loo bandhigo
qof weeyn agteena ka ah.
Aayad baa leesku qanciyaa.
Shaafici & Maalig.
Imaam shaafici doodiisa waxeey tahay aniga ayaa ka daliil qurxoon Imaam Maalig daliilkiisa Aayada.
Abuu Xaniifa ayaa lamid ah.
Abuu Xasan al ashcari & ardaygiisa Baaqalaani ah
iyagana waa lamid. Aayada  eey udaliishadaan
Caqiidada ayaan ku dabagalnay.
-Qofka caamiga ah loo ciqaabi maayo
haduu iska dabagalo Imaamyada balse aniga & inta ila filkeey ah qasab beey nagu tahay wax aqrin joogtada ah

ama  dhageeysiga buugaagta maqal ahaanta loo diyaariyay.(MP3)

-in aan dhaqtarka aadno qasab beey nagu tahay.

dhaqtarka waa kee?

waa midka indhaha qalbiga isaga furahiisa haayo

waana ILHAAMKA.

Miraayada qalbiga markeey mirirto meeyrid beey rabtaa.

(walakin tacmal quluub alatii fisuduur)

*"indhaha qalbigaa ka eegmafog"*

{ qadaadkiisa qoftaagan boow qalbigiisa ka dhex arki jiray Nabigeena}

▪**Qalinka** ha uqaadanin si aad qaladkiisa u cadeeysid Maalig ama Shaafici ama Abuuxaniifa balse

Qalinka u qaado in oow Rabi Ilhaamka kuu furo.  waxa yaalo agtiisa ee tirada badan wax ku anfaco  in oow ku baro ka tuug Eebbe.

▪**Cilmigaan**  looga hadlaayo AAKHIRO

kuna saabsan qofka dhintay Jano miyoow jiraa mise Godka ayaa lagu dhex quudinayaa

4 imaam & ilmaha eey dhaleen Buugaag badan kama qorin arintaan hadii eey ka qoreena waa wax iga qarsoomay.

qof waxaan ahay qadaadkiisa wax yaalo aanan arki karin. Qalbigeeyga muraayadiisa qadaadkeeyga waxa yaalo   kama arki karto.

===============

**#Moowqifka  MUCTAZILO** ka qabaan CADAAB AL QABRIGA.

>Muctazilo qofka aanan aqoonin qormooyinkeena 213-2016 hasoo aqristo.sida aan is leeyahay qof soomaali ah oo sida aan uga hadlay kooxdaas uga faalooday qoraal ahaan  mabajiro  . ama kutubada Nedka laga helikaro ee Af-fafka kale lagu qoray   iyagoo PDF ah <

**Sheekha MUCTAZILADA**

Kitaabka "SHarx usuul al khamsa"
boga 730
ayoow kaga hadlayaa CADAAB AL QABRIGA  waxoowna dhahayaa waan isku wada raacnay dhamaanteen hadii aan MUCTAZILO nahay
wax qilaaf ah kama taagna dhankeena.  hal nin oo naga mid ah ayaa arinkaas diiday
aakhirkii waxoow ku biiray koox kale oo waa iskaga tegay Muctazilada.

**-Zamakhshari.** Sheekha Tafsiirka qoray ee Muctazilada ah

isagana waxoow qirayaa jiritaanka CADAAB Alqabriga.

==============================

**#Moowqifka ASHAACIRO ka qabaan CADAAB AL QABRIGA.**

>>Buuga masaa`il al ikhtilaaf beeyna al ASHAACIRA wal

MAA -TURIIDIYA<<.(1)

Boga 152

halkaas ayeey ku cadahay waxa eey aaminsan yihiin

ASHAACIRADA.

Waana rumeeyn inuu jiro Cadaabal qabriga.

meelo badana Buugta dhexdooda  weey ku faahfaahiyeen

arinkaas.

>isla Buugaas Boga 129 waxaa ku qoran.<

**-NOLOSHA ADUUN** maxaa ka danbeeyo?

>jawaab<

**-su`aasha** Munkar & Nakiir. qofka dhintay ayoow la hadli doonaa

Gaalka waa la ciqaabayaa & kuwa Eebbe ku caasiyay

Dadka wanwanaagsan halkaas ayaa loogu nimceeyn doonaa

Qabriga dhexdiisa.sidaas ayeey ku qoreen Buugaas.

**-maxaan kuugu soo bandhigay** intaas oo xog ah ?

-aqristaheena si oow u noqdo mid ka dheregsan xogaha ku saabsan moowduucaan.

qof <u>muthaqaf</u> ah wax walbana ogsoon hal dheg aanan wax loogu sheegin sida kooxaha qaarkood ku dhaqmaan.

-----------------------------------------------------------------------------------------------

(1)Buugaas wax badan oo quraafaad ah ayaa ka buuxo

ASHCARI baan ahay haduu qofka yiraahdo taas macnaheeda ma ahan in wax walba eey Buugaagtooda ku qoreen Qalinleeyda ASHAACIRADA in lagu qasban yahay in laga qaato.

Mad-habteena waa SHAAFICI hadana wax walba oow Buugaagtiisa ku qoran ama Qalinleeyda SHAAFICIYADA

wada qoreen kuma qasbani inaan wada qaato.

-aniguna sidaas baan lamid ahay. hadalkeeyga qasab maahan in la wada qaato , caqiidana maahan waxa aan ka hadlaayo taasoo lagu gaaloobaayo.
=============================================================================

**#SHIICADA ma rumeeysan yihiin Cadaab al qabriga?.**

Kitaabka eey Shiicada ku dhaqmaan dhinaca Xadiiska magaciisa waa "

صحيح الكافي - محمد باقر البهبودي

Boga 250

waxoow uga hadlayaa qaabka loogu duceeyo marka la soo booqanaayo qabriga /Xabaalaha.

**-Shiicada Qofka aanan** wax badan ka aqoonin.

iyaga Diin u gooni ah ma lahan Quraanka Muqdisho dhex yaalo ayaa Eeraanta lagu dhex aqriyaa.
Kitaab ka kooban 114 suurad. Faataxo ilaa birabi naas.
-Caqiido ahaan ASHAACIRADA sida eey wax u tawiiliyaan ayeey iyagana wax yeelaan.
qaar iyaga ka mid ah waa sida XANBALIYADA
in wax la tawiiliyo weey diidaan.
1000 sano kahor Caqiidada Muctazilada ayeey rumeesnaayeen balse hada qof Muctazilo ah aduunka kuma noola.
**-AHLA-SUNA** caqiidadooda ayaa ah rumeeynta CADAABAL QABRIGA.
SHIICADANA waa lamid waloow aanan si wacan u soo baarin arintaas.
Kitaabkoodaas kor ku dhigan Boga 250
waxoow kaga hadlayaa qofka Qabriga salaan u aado ducooyinka lagu dul aqrinaayo QABRIGA.
marka weey iska cadahay in eey rumeeysan yihiin quraafaadka ku dhisan jiritaanka waxa loogu yeero CADAABTA QABRIGA.
-maqaalkaan hadii loo tarjumo qaabka aan Quraanka u fasiray loosheego Shiicada. midkooda maanka furan

in oow ku qanco ayaa suuragal ah

========================================

**#Kooxda KHAWAARIJTA** & moowqifkooda ku saabsan CADAAB AL QABRIGA?.

Qeeyb ka mid ah kooxda KHAWAARIJTA
waxeey dheheen maba jiro wax la dhahaayo CADAAB AL QABRI.
Soomaalida hada joogto fikir ahaanta weey hooseeyaan.
Sheekh Maxamad macalin mar aan hadalkiisa ka dhageestay cajalad ayuu kaga waramay arimaha Soomaalida
waxoowna yiri arimaha Aduunka ka jiro, doodaha masraxa
lala taagan yahay dunida Muslimkana ka dhex jiro Soomaalida dhex dooda uma soo rarin waayo maba xamili karaan .
- Soomaalida hadeer aduunka ayeey fikir ahaan u furan tahay hadana mooqifka Qabiilka  ka qaado qadiyad walba waa ku qanacsan yahay wiilka Tolka ka dhashay
-dhanka kale moowqifka  eey Ashaaciro  ka gaareen qadiyad ayoow ku qanacsan yahay wiilka Ashcariga ah ama Suufiga ah.
dhinaca kale wadaadka Reer AALA-SACUUD

waxa eey Culimada Sacuudiga ku qanceen wax ka duwan maba qaadan karo . waxaa nahay  umad aanan weli u bislaanin dhex dhexaadnimo ama "alwasadhiya"

wax hebel waan kugu raacsanahay balse wax hebel ayaanan kugu raacsaneeyn .

qoomka aan ka dhalanay meel dhexaad  wax la dhaho maba yaqaanaan .

waa inoow kuleeyl ahaadaa amaba qaboow wax ladhaho faldiir maba la soobaro ardayga Soomaaliga ah.

**-Moowduucaan ku saabsan CADAAB AL QABRIGA.**

waxaan isku waddo ku soconaa kooxda KHAWAARIJTA.

(fariiqun fil janati wa fariiqun fisaciir)

Dadka markeey dhintaan labadaas wado uunbaa hursan

ama Jano ama Naar balse meel dhexe oo lagu sii hakado

ayaanan jirin.

**KITAABKA** "MAQAALAAT AL ISLAAMIYIIN"

waxaa qoray IMAAM ABUU XASAN AL ASHCARI

waxoow noolaay 300 Hijriga

waana Imaamka AHLASUNA WAL JAMAACA.

hadaa nahay ASHAACIRO Imaam keena  waa isaga

Buugaas wax walba oo fikir ah oo leesku qilaafay ama leesku wada raacay ayoow kusoo uruuriyay

Qofka aanan aqrisanin ama (MP3) ahaan uba dhageeysanin wax badan ayaa ka maqan kuna saabsan  SOOYAALKA FIKIRKA MUSLIMIINTA heerarka oow soomaray.

waxaa jiro  TAARIIKHDA fikradaha looga waramo

sida taariikhda Bulshooyinka loo barto ayaa taariikhda fikradahana loo ga sheekeeyaa.

Kitaabkaas" maqaalaat...."

boga 105.

ama Casharka,5-AAd...daqiiqada 40-aad.

MP3..

ayoow kaga waramayaa KHawaarijta waxa eey ka aamineen Cadaab al qabriga.

*aniga beryahaan Buug dhageysi maahee aqriska kansho uma helo. hoowlaha aduun ayaa igu

badan*

-Ceeb maahan in meelaha qaar isku moowqif ka ahaano koox asal ahaanta aan ku kala tagnay.

-Masiixiyada & Muslimiinta waxeey isku waa faqeen ayaa jiro oo ah Rabi ayaa jiro waana midka Uumay Webiyada Buuraha Baddaha IWM.

ma haboona in qofka lagu caayo fikir oow qolo kale ku raacsan yahay . qofka daliilkiisa kala dood . wax oow ku qanci karo Quraanka uga soo daliisho.

qofka aanan sidaas yeeli karin KHAAKHLA YAASHA Qadka ka dhex qeeyliyo ayuu la mid noqonayaa.

kuwa aanan wax taqasus ah u laheeyd DIINTA hadana damacsan in eey Diinta ka hadlaan. Haka hadleen ma xuma balse xalaaleeynta Dhiiga Muslimiinta OROMADA & SOOMAALIDA.

Xamar&Hargeeysa Gaalo in eey ku nool yihiin kuwa aaminsan ayaa ugu fikrad xun.

-Buugaas oow qoray Abuuxasan Al Ashcari qofka aqristo ayaa qosol ka dhergaayo. Carabtii hore qaabka eey isku qilaafeen ayoow kaa haqabtirayaa.

-waxaa iigu qosol badnaa qiso KHAWAARIJTA oow kasheegay taasoo ah"

Gabadha marka eey qaangaar noqoto reerkooda ayaa loo imaanayaa waxaana la dhahayaa Gabadhiina ama wiilkiina ayaan rabnaa in aan TOOWXIIDKA u laqino ama barno "

Waayo waxeey rumeesnaayeen in Ubadka wax diin ah eeysan laheeyn. marka eey qaangaaraan waxa eey

Rumeeyaan ayaa loo diiwaan gelinayaa.

Ilmaha hadii eey yaraanta ku dhintaan

Naarta ayeey galayaan beey dheheen.

-Qadariyada iyagana waxeey dheheen

Ilmaha Muslimiinta & kuwa gaalada dhamaantood janada ayeey gelayaan wax denbi ahna looma qoro.

Hadalkaasna waa mid aan ku raacsanahay Qadariyada .

waxa oow sameeyo Aabaha Ubadkiisa Rabi uma ciqaabaayo.

Ilmaha gaalada dhaleen ama Muslimiinta

ineey Muslimiin yihiin waxaa daliil u ah Quraanka.

(wa ithal moow uudatu su ilat )

Aayadaas Ubadka eey ka hadleeyso waa ilmo eey dhaleen gaaladii Qureeysheed.

CADAALAD ayeey heli doonaan ayoow dhahayaa Ebbe.

==================================================

**#UBADKA GAALADA DHALEEN.**

hal xadiis hadii loo waayo Aayado Quraan ayaan ku difaaceeynaa.

-Tusaale taariikhda gelidoonto ayaan laabtaada ku tirayaa.

**QISO: QIYAALI AH**

-Abuu lahab ayaa gabar oow dhalay nolosha ku aasay iyadoo ilmo ah

Aakhiro ayeey isku arkeen. cadaalada Eebbe ayeey hortageen.

Abuu lahab inantaas inoow edebdaro udilay waaba sii ogaay warbadan maba gelin, waxoow yiri waan ogolahay in leeygu xakumo inaan galo Naarta, waayo qaladkaan sameeyay anigaaba og.

Isagoo Silsilad ku xirxiran ayaa loo sii dhaqaajiyay dhanka Naarta.

intaas ka dib Inantii yareeyd ayaa meesha kusoo hartay

Malagii maxkamada joogay baa yiri adigana Naarta aad waayo

Abuu lahab ayaa ku dhalay isagana gaal boow ahaay

Denbiga aabahaa galay ayaad Naar ku muteeysatay.

Gabadhii yareeyd inteey yaabtay beey tiri adiga Abuulahab ayaaba kaa arxan roon, waayo isaga waa idilay, balse adiga denbi aanan gelin ayaad Naar iigu xakuntay

(walaa taziru)

Aaway aayadaas beey tiri.

Dabcan sheekadaas ma dhicin balse waxaan daaha ka rogayaa Mad-habtaas ilmo naar ku xakumida kudhisan nacas nimadeeda. bal u fiirso sida eey u fool xuntahay.

==========================================================================

**-KHAWAARIJTA.**

laba salaad ayeey dheheen waa nagu waajib inta kale waa suno. Imaam Cali gaal waaye ayeey dheheen.

sababtoo ah Rag ayoow yiri xakun keena go aan haka gaareen . maadaama oow Rag xakunka u dhiibay Quraanka oowsan xakun u doonan waaba GAAL ayeey dheheen.

-qoladaan Reer Aalasacuud sida xun wax usoo bareen halka eey Khawaarijta iskaga ekaadeen ayaa halkaas ah.

وَمَن لَّمْ يَحْكُم بِمَآ أَنزَلَ ٱللَّهُ فَأُوْلَـٰٓئِكَ هُمُ ٱلْكَافِرُونَ

(Almaa ida-45)

DASTUUR ayaad qorateen kuna dhaqanteen Quraanka iskuma xakuntaan ayeey dooda tahay.(1)

-Dastuur waa xaanshi cad waxa ku dhex qoran ayaa muhiim ah.

DASTUURNA waa qodobo lagu balamay.

Quraanka ma qilaafsan yahay qodobka ayaa mudan in wax leeska weeydiiyo balse mala qoran karaa in dooda noqoto waa axmaqnimo halka ugu sareeysay.

SHAAFICI waxa kutubadiisa ku qoran Dastuur beey lamid yihiin.

Abuu xaniifaa lamid ah.

Maaligna sidoo kale.

waxyaabahaas Yuusuf Alqaradaawi ayaa qadkiisa ku qasaariyay doodaha nuucaas ah qof maanta noolna waaba ka dheragsan yahay waxa lagu kala tegay.

=====================

(1)Kitaabka

Axdaas al soomaal munthu isqaadh al

xukuuma ilaa thuhuur al maxaakim.

qore. Sheeq C/rizaaq bin C/laahi bin Axmad.

Buugaas ayaa laga qoray Ururka Itixaad.

Wadaadka Buugaas qoray manhaj ahaan & caqiido ahaanba waa Reer Aalasacuud.

Sheeq Cukaashe & Barbaraawi ayeey is weheshadaan

-1994.Itixaadka Buuga ugu horeeyay ee laga qoro .Idaajaa ayaa ka qoray

waa nin tusaale ku sheegay taariikhda tebintiisana eey nadeeqday..

Idaajaa waa Oday ASHCARI ah qaabka oow uga waramay kooxdaasna waa qaab cadaalad ku dhisan laguna qanci karo.balse Idaajaa & C.qadir Aromo

cilmi haka qaadanin marka eey ka hadlaayaan siyaasad ama Qabiil wax ku saabsan .Idaajaa waa Oday cabsan Jaalle siyaad.

Aromo isagana waxoow ahaay Oday ifka ugu neceb Doowladii kacaanka.

Aromo/Oromo waxoow ahaay ASHCARI.

-Soomaalida hadii aadan isku soo sasabi karin walba suugaanta sumeeysan sooyaal ha uga dhigin .

SAAMIRI boow ka aamusay HAARUUN

si oowsan ukala geeynin sokeeyaha wada dhashay .kala geeynta ayoow KUFRI u arkaayay in eey ka darantahay .

قَالَ يَٰٓبْنَؤُمَّ لاَ تَأْخُذْ بِلِحْيَتِى وَلاَ بِرَأْسِى إِنِّى خَشِيتُ **أَن تَقُولَ فَرَّقْتَ بَيْنَ بَنِي إِسْرَآئِيلَ** وَلَمْ تَرْقُبْ قَوْلِي

(طه.94)

suugaanta eey tiriyeen SAAMIRIYAASHA SOOMAALIDA taariikh ahaanna aad ugu talagashay in soomaalida dhaxal looga dhigo.

BUUGAAGTEEYDA SUUGAANTA HALA GUBO DHEH sida ABUU-XAYAAN AL-TOOWXIIDI .

talada aan siinaayo IDAAJAA waa midaas.

-waayeelkaas C/CUMAR MANSUUR ah. isagana 10 sano kahor ayaan Buugiisa naqdiyay waana midkaas oow uga hadlaayo Taariikhda Soomaalida.waxaa u wanaagsaneeyd in oow noo qoro TAARIIKHDA TALYAANIGA.

-Buuga Kobacii Islaamiyiinta soomaaliya.1952-2002.Qore Weriye C/shakuur ,mire aadan.

sanadka 211 ayaa la qoray waana buug si cilmiyeeysan loo qoray.Allaha u naxariisto weriyahaas in oow dhintay ayaan maqlay.haduu nool yahayna nabad allaha yeelo.

-----------------------------------------------------------------

#Qof Qabriga dhex jiifo macquul matahay inoow JANDA dhex joogo?.

-Aqliga madiidaayo, Qof agtaada hurdaayo ayaa riyada wax walba oo raaxo ah ku helaayo adigana ma inkiri kartid midaas. waa macquul in qofka Jir ahaan qalfoof yahay balse ruux ahaan & jir ahaanba Rabi ku nooleeyay Janada dhexdeeda.

إِنَّا سَخَّرْنَا ٱلجِبَالَ مَعَهُ يُسَبِّحْنَ بِٱلْعَشِيِّ وَٱلإِشْرَاقِ

(SAAD18)

-Buuraha ayaa hadlaayo Nabi Daa-uud la cibaadeesta la dhahayaa.

-Debka ayoow amar siinayaa Eebbe ha gubin Nabi Ibraahim la dhahayaa.

-Dabeeylaha ayaa daabad looga dhigayaa Nabi Suleeymaan . waxaas oo ithil hadii aad rumeeysan tahay maxaa diidaayo qofka isaga oo Qalfoof ah Qabrigana dhex yaalo Rabi agtiisa oow raaxo kaga jiro ama laba ciqaabaayo.

-Quraafaad ayaa jiro dadka qaarna aamineen oo ku dhisan Lafaha qaar ee Dadka ciida ma cuni karto. waana halka oow Rabi ka nooleeyn doono qofka dhintay .

-qofka sidaas u fekeraayo waxoowsan is weeydiinin qofkii Nibiriga laqay sida Nabigii Bada ku dhacay qofka sidaas ah Lafahiisa xagee beey ku aasan yihiin ?.

soow Nibiriga calooshiisa maahan xabaasha qofkaas?.

inagaba markaan cunno Digaaga caloosheena ayaa xabaalo looga dhigay.

Uuskeena ayaa iyaga u qabri ah.

-Nabi Aadan xiligiisa qofkii dhintay Lafahiisa ayaa weli wax ka nool yihiin qofka sidaas aamino maankiisa waxbaa ka si ah .

-Rabigeen waa midka Aduunka nakeenay inaga oo aanan jirin hadhoowna meel (0) ah ayoow Lafaheena ka soo uumi doonaa kii Libaaxa laqay & kii Lafahiisa HINDIDA gubeen qof walba

in oow soo nooleeyo Rabi waa awoodaa , dibna waaba u soo nooleeynayaa.

**-sida ku qoran Siirada** Nabiga waa la dheelmiyay
jir ahaana waxoow dhex joogay MAKA
hadana Jir ahaan waxoow u aaday Masjid al aqsaa.
kadibna Cirka ayaa loo duuliyay.
kadibna waa lala soo balamay Nabiga.
وَإِذْ أَخَذْنَا مِنَ ٱلنَّبِيِّيْنَ مِيثَاقَهُمْ وَمِنْكَ وَمِن نُّوحٍ وَإِبْرَاهِيمَ وَمُوسَىٰ وَعِيسَى ٱبْنِ مَرْيَمَ وَأَخَذْنَا مِنْهُمْ مِّيثَاقاً غَلِيظاً

(الأحزاب7)

- xili waxaa jirtay Nabiyada si gooni ah dhamaantood loola balamay waana markii Nabi Aadan la uumay. Ubadkiisana Arwaaxdooda lasoo wada kulmiyay.
Dadka qaarna waxeey dhahaan ruuxda kaliya maahan balse Jir ahaana Dadka waa loo uumay  xiligaas.
hadii aan hadalkaas TUBARAAC aan ka dhigano
waxaan leenahay xiligaas jirka loo uumay dadka waa mid ka duwan jirka oow qof walba ku dhex jiro marka la dhex joogo Aduunka.
Nabiga markoow Janada soo indha`indheeyay jirka  oow ku dhex jiray waa jir horeeyay oow isaga lahaan jiray

hadeerna markoow Janada dhex joogo jirkaas ayoow ku dhex jiraa.

-marka la dheelmiyay jirkaas ayoow ku duulay.

qof walba oo naga mid ah waxoow leeyahay KOR LABA AH ama jir  laba ah. mid sii horeeyay iyo midka aan hada ku dhex jirno.

marka aan hurudno jirka sii horeeyay ayeey ruuxdeena adeegsataa waxna ku soo aragtaa .marka oow dhinto qofka isla jirkaas ayoow ku sii dhex jurayaa waana lagu ciqaabayaa ama waa ku dhex raaxeeysanayaa JANADA ayoowna toos u dhex tegayaa ama NAARTA.

--

الجاثية

26

قُلِ ٱللَّهُ يُحْيِيكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ ثُمَّ يَجْمَعُكُمْ إِلَىٰ يَوْمِ ٱلْقِيَامَةِ

Aduunka sida oow noogu uumay Eebbe ayoow Aakhirana noogu uumay naf ahaan iyo jir ahaanba

kadibna TOOWXIIDKA ayoow qof walba qiray waana xiliga sida gaarka ah loo cimaamaday Nabiyada

Suurada Axzaab 7 ka hadashay.

وَإِذْ أَخَذَ رَبُّكَ مِن بَنِيٓ ءَادَمَ مِن ظُهُورِهِمْ ذُرِّيَّتَهُمْ وَأَشْهَدَهُمْ عَلَىٰٓ أَنفُسِهِمْ أَلَسْتُ بِرَبِّكُمْ
قَالُواْ بَلَىٰ شَهِدْنَآ أَن تَقُولُواْ يَوْمَ ٱلْقِيَامَةِ إِنَّا كُنَّا عَنْ هَـٰذَا غَافِلِينَ

(acraaf 172)

kadibna qof walba waa oow dhintay. qofka markeey hooyadiish dhasho ayaa dib loo uumay mar labaad.

Nabi Xaawo & Nabi Maryama iyo aniga iyo adigaba waxaan eheen dad wada siman qofna qofka kale waalid uma eheeyn dhamaan teen waxaa ka soo wada farcanay Nabi Aadan

nolosha ceeynkaas ahna waa nolosha GEEDAHA

waxaan eheeyn sida dhiraha miraha leh

nabi Aadana waxoow ahaay sida Geeka GOBKA ah

miro ayoow dhulka ku daadiyay qof walbana iskiis ayoow Eebbe u qiray Toowxiidka loo aqriyay.

**-Abwaan DHALXA** waxaan dhahayaa GEEDKA CANBAHA ee JILIB kaaga baxay Quraanka waxoow qirayaa inoow Rabi u sujuudo geedkaas

qaabkee ayoow u sujuudaa?.

hana weeydiinin su`aalaha nuucaas ah.

-Aakhiro qof walba afka ayaa laga xirayaa kadibna Gacmahiisa & Lugahiisa ayaa laga hadal siinayaa

midaas waa caqiidadeena.

- hal naf iyo laba jir amaba kor laba ah ayoow leeyahay Qof walba.
jirka Janada dhex yaalo hadeer waa mid dhintay. marka oow qofka dhinto ayoow jirkaas nolol helayaa .
hadal sidaas u eg ayeey sheegaan culimada qaar balse si kale ayaa loo qoray hadalkaas.
waxeey dheheen qof walba laba guri ayoow aakhiro ku dhex leeyahay guri Naarta ku dhex yaalo iyo mid Janada ku dhex yaalo haduu noqdo qof toosan midka Naarta waa la duminayaa.
ama waxeey dheheen qofka laba boos ama laba jago ayoow ku dhex leeyahay halakaas. boos jano ku dhex yaal iyo mid naarta ku dhex yaalo.
-JIBRIIL laba-jir ayoow leeyahay.
-JIBRIIL jidh laba ah ayuu leeyahay.
Dhulka markoow usoo degaayo bisha soonqaad
siiba 10 danbe habeenka lagu dhex qariya
jir ahaan Dadka ayoow isku ekeeysiiyaa
xiliga oow imaanaayo dhulka.
Nabiyada markoow WAXYIGA ukeenaayo jir ahaan DADKA ayoow isku ekeeysiiyaa.
Suurada *wa najmi* waxaa ku dhigan Nabiga waxoow arkay

Jibriil jir ahaantiisa qaabka oow Eebbe u uumay ayoowna soo arkay.

**Jir ahaan hal qof laba meel ma joogi karo**

Jibriil kor laba ah ama jir ahaan labo ayoow noqday.

midna Dadka ayoow kusoo dhex galay weliba Nabigeena ayoow jilbaha jilbaha usaaray, isla xiligaasna waxoow dhex joogay halka oow Eebbe ugu talagalay

oo ah JANADA banaankeeda ama bartamaha JANADA.

كُنْتُمْ أَمْوَاتاً فَأَحْيَاكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ ثُمَّ يُحْيِيكُمْ

(albaqra 27)

Aayadaas waxeey tiri

qaar dhintay baad eheeydeen kadibna waan idin nooleeynay ,

kadibna weddka ayaa idin dili doono

kadibna Ebbe ayaa idin soo nooleeynaayo.

nuxurka Aayada waa sidaas.

**-dhimashada labada jeer**

قَالُواْ رَبَّنَآ أَمَتَّنَا ٱثْنَتَيْنِ وَأَحْيَيْتَنَا ٱثْنَتَيْنِ فَٱعْتَرَفْنَا بِذُنُوبِنَا

(Gaafir 11)

Qofka gaalka ah laba jeer ayoow noolaaday

mida aduunka oow ku noolaay iyo mida oow ku dhex noolaay Janada xiligii Nabi Aadan dhabarkiisa laga soo saaray kadibna waatuu qof walba dhintay Dadka qaarna waxeey dheheen maya ma dhiman qofka balse waa sida Shinbiraha ruuxdiisa Janada ayeey ku dhex nooshahay ka hor inta eeysan dhalin Hooyadiis.

**-dhimashada laba jeer ee qofka Muslimka ah**

Aduunka markeey ka tageen Culimadeena Sheeq CUSMAAN XIDIG ama QARADAAWI ama Sheq Maxamad Al-Gazaali geeridoodii labaad ayeey eheeyd midaas

laba jeer ayaa lasoo nooleeyay laba jeerna weey dhinteen

sida qofka gaalka ah oow laba jeer u dhinto laba jeerna loo soo nooleeyo ayeey noqdeen Culimadeena.

FIQHIGA cusub aan helnaa kaas ah.

mid kaas ka wacan hadaan helno sida Shaafici baan uguureeynaa.

----------

**#Jir ahaan Sheekh Uweeys laba meel ma joogi karaa?.**

SUUFIYADA waxeey golayaasha ka sheegeen.

>Cajalad mp3 ah ayaan ka dhageestay xogta<

sheeq Uweeys dheere (1) isagoo joogo Jaziirada Zanzibaar ayaa 50 xaafadood hal mar laga wada casuumay
kadibna 50 meelood ayoow ka wada afuray.

Qaabka oow uga wada afuray ma sheegi karo balse in oow dad badan iska dhigay ayaa meesha ku qarsoon.
muuqiisa in Dad kale meteleen waa suuragal, sida Nabi Ciise muuqaalkiisa qof kale loo siiyay in arinkiisa sidaas loo xaliyay ayaa suuragal balse waa xaqiiqo, Malag qof isku soo ekeeysiiyay Soor kama cunin ZANZIBAAR.

**-halkaan usocday waa halkaan.** habeenkii Nabiga la dheelmiyay Nabiyada halkaas kula duladay isaga
Malaa`ig miyaa muuqaalkooda meteshay mise waa xaqiiqo iyaga ayaa jir ahaan loo dhex keena QUDUS?.
hadii Jir ahaan loo dhex keenay halkaas
lana soo gole joojiyay waxaa iska cad in eey ka soo bexeen JANADA.
balse qof Janada dhex galay in oow ka dhex baxo soow xaan maahan ?.
Nabiga habeenkii la dheelmiyay soow ma gelin Janada hadana soow kama soo bixin?.

Nabiyada in eey fasax qaataan waa loo fasaxay sidaas waaye natiijada.

**-BARAARUJIN.**

Shareecadeena waa ku xaaraan arimahaas Sheekh Uweeys karaamada looga dhigay. Fuqahada agtoodana loogama dhaqmi karo.

4 xaas wax kabadan ayaan guur-sanayaa waayo 40 qof ayaan iska dhigi karaa ayoow dhahayaa qofka.

Rabi ma awoodaa mana suubiyay arinkaas.

Haa waa awoodaa waana sameeyay soowtii Nabi Ciise muuqaalkiisa loo ekeeysiiyay ninka isku talaabta lagu qodbay.

===========================

(1)waxaan arkaayay qaar ASHAACIRO ah oo Sheeq Uweeys inta dhiigiisa qubeen hadana faan mooday sheeqaas ayaan dilnay. dulqaadka reer Baraawe ayeey kuu muujineeysaa midaas, Diintoodana u leeyihiin .

Dad ayaa disheen hadaa tihiin ASHAACIRO

diyadooda ma dhiibin .qaaraan ha laga uruuriyo dhamaan ASHAACIRO.

agoonta Sheeq Uweeys ka geeriyooday hala siiyo ama hala dhaho sheekha dhiigiisa noo cafiya.

1920 ilaa 2018 fidno walba oo Soomaali ka jirtay ASHAACIRO ayaa ka masuul eheeyd

balse reer Aala sacuud dusha lagama saari karin.

Dunida Islaamka siyaasad xumada soo martay wadaad ASHCARI ah ama MUCTAZILO ah ayaa ku luglahaay.

-Cilmi aakhiro ayaad ka hadleeysaye siyaasad aduunyo ha xusuusinin Soomaalida. Sheeq Cusmaan xidig Buugiisa Qabyaalada oow kaga hadlaayo aqriso.
=================================

**#INSAAN AL KAAMIL.**

qof wada dhameeystiran oo aanan dhimaneeynin .
Malaga cunto ma cuno xitaa janada kuma dhex cuno hoobaanta.mana guursado Haween.
Rag maahan iyaga Dumarna maahan lama dhalo mana is dhalaan.
Jir ahaan Dadka weey isku ekeeysiin karaan jirkooda asalka ahaayna meel boow uyaalaa Ruuxda ayaa Qolof Bini aadan qaadato
Weey duulaan cudur kuma dhaco mana dhintaan intaasba waa kaamil nimadooda .Dadka Jano ha joogeen ama Aduunka kaamil nimada ugu sareeyso kuwii gaaray marna ma noqon karaan .qaabka Dadka loo abuuray ayaa ah qaabka ugu fiican inta oow Eebbe uumay qurux iyo
kaamil ahaansho. in waxaas lala soo shirtago waa faankii SHEEYDAANKA ufaanay Nabi Aadan.
-Malaga hadoow dhahay aniga ma gaajoodo

Mana dhaxmoodo mana oomo Kobo uma baahni sida Shibmirka ayaan duulayaa markaan doono Dadka ayaan isku ekeey siinkaraa.

Malaga Janada kuma dhex raaxeeysto  Naartana qaar iyaga ka mid ah ayaa dhex taagan kana shaqeeyo halkaas mana gubtaan mana daalaan

MIIZAANKA aan wax ku qiyaasnay soow ma qaldana marka loo faanay Ma`laaigta.

-Moowliidka markaan xusaayo Suufiyadana aan ku dhega hadlaayo Sheeq Cusmaan Xidig ayaan ka dhex hadlayaa isagoo Janada dhex joogo ayoow jilayaa ,qiso ahaan   afkaarteeyda ayoow metelayaa. si fiican  u aqriso ee dhuux qisooyinka halkaas ku qoran.qeeybaha danbe ayeey noogu imaan doonaan.

========================================

**#IMAAMYADA ASHAACIRADA. CADAAB AL- QABRI**

maxeey ka qoreen?.

qoraaladaan hoos ku dhigan ayaan uga hadlayaa waxa eey ka qoreen arimahaas.

**#BAAQALAANI & CADAAB AL QABRIGA**

Abuu bakar AL-BAAQALAANI 400 Hijriga ayoow noolaay waana Imaamkeena Caqiidada ASHCIRO.

BAAQALAANI

Kutubkiisa "

<u>AL INSAAF FIIMAA YAJIBU ICTIQAADUHU"</u>

Boga 47

waxoow ku qirayaa jiritaanka CADAAB AL QABRIGA.

su`aasha labada malag.

-in ruuxda jirka lagu soo celinaayo.

-in jidka siraadka ladul maraayo & miizaanka .

-in lasiinaayo Nabigeena haro.

-in loo shafeecaayo inta caasiyaasha ah ee muminiinta ah.

intaasba waa xaq waana qirsanahay ayuu dhahay BAAQALAANI.

Imaamkaas ASHAACIRO masheegin in qofka dhintay horayba jano laga gelinaayo weey ka hoos baxday wadaadkaas

waana dadka aaminsan qofka dhintay in Qabriga loogu dhex raaxeeynaayo balse oowsan jano dhex joogin .

-Ninkaas Baaqalaani ah xiligiisa wax walba oo daliil u ah qofka doodaayo

Miiska ayoow soosaari jiray.xiligaan danbe Minhaajleey ayaa meelaha wareegeeyso wax walba inta la duuduubay ayaadan aqoonsan karin waxa oow sheeqa daliishaday Aayad Quraan ah miyaa mise  waa  Xadiis Nabi. wax la nasaqay miyaa mise?. Imaam Nawawi baa sidaas yiri ayeey lasoo shirtageen.
Wiil boow ahaay Nawawi 20 jir isagoo ah Buugaagta qoristooda bilaabay   ilaa 40 sano oow ka gaaray wax qoraayay kadibna 40 jir isagoo ah aduunka ka tegay SUYUUDHI ayaa lamid ah 20 jir ilaa 40 sano oow ka gaaray ayoow Kutubtiisa qoray. waxaa halkaas kaaga muuqato wax eey dhalinyaro qorqoreen in Maktabada laga soo buuxiyay.
-kuwaan SALAFINIMADA isku koobay kaligood
Sheekha eey ku abtirsadaan isna waa lamid Ragaas aan sare ku soo sheegay waxba ma dhaamo dhalinyaro ayoow ahaay xabsina ku dhex dhintay isagoo 40 jir ah.

**-BAAQALAANI**  arinkiisa wax yar baan ka sheegnay qormadii aan kaga hadleeynay Abuu-xayaan al toowxiidi.
Buugiisa "<u>Al imtaac wal mu aanasa</u>"

[BUUGA ABUUXAYAAN-A-Y.]

ayaad ka aqrisan kartaa .

Abuu-xayaan al toowxiidi qofka aanan aqoonin waa Nin noolaay 300-400 Hijriga

waxoow sheegtaa Muslim Shaafici ah

balse waxoow aaminsanaay >XULUUL <

waana sida XALAAJ

waa qof CAQIIDO ahaan aad u liito .

Ibnu Xajar al casqalaani ayaaba sheegay Culimo badan weey ka deeriyeen Ninkaas.

**ibnu binta Muleeyqa.**

hadii aan afka ku labay, qeeybaha sare ee qoraalkeeyga.  ninkaas gabayadiisa  wax fiican maahan.

sida Abuu xayaan

ayoow u sheekeeyay. qofkii ubaahan gabayadiisa qodob-qodob ayaan ukala qaadayaa waxa gaalnimo ah

ee ku jirana banaanka ayaan soo dhigayaa waase hadii loo baahdo.

Muslim inta la sheegto SHaafici baan ahay la dhaho yaanan XULUUL lagu dhex faafinin Umadaan.

**waa maxay XULUULKA?**

XULUUL waa Rabi oo lala midoobo waana falsafad Giriiga laga keenay .

waxeeyna ku dhisan tahay cibaado badan la imaaw. Rabi haka baryin Jano hana ka baqin Naar balse ka tuug in oow isaga ku jeclaado kadibna la midoowdid isaga.

in badan ayaad arkeeysaa Janada oo lagu tilmaamo wax la yaso .qofka haduu yaso Jannada. xaguu rabaa in la geeyo aakhiro ? Rabi haduu raali kaa noqdo Janno ayoow ku dhex geeynayaa asalkaaga ayaa ah Dhoobo.

in aad  wax cuntid & in aad wax cabtid ayaa laguu uumay. Aduunka joog ama Janada dhex joog. maxaan cunaa ayaa kuu dhaqan ah ina aadanoow,asalkaaga kama suushid.

Malag ma tihide  qof Bini aadan baa tahay. Malaga ayaanan baahanin Asalka laga uumay ayaa naga duwan.

-Dhiiga CUSUB EE ASHAACIRADA  col ayoow kula yahay hadii eey kaa soo urto mad-habtaas XALAAJ keensaday ee gaalnimada ah .

-waxaa nahay SUUFIYO Tusbaxna Luqunta ayoow noogu jiraa. Moowliidka in la dhigana  waaba dhaqankeena waana sheey banaan. inta nagu raacsan  Moowliidka waan soo dhaweeynaa.kan iska diido   lama dagaashanin.

-Ashaaciro ayaa nahay CAQIIDO ahaan.

-QUSHEEYRI&QASAALI qaabkaas ayeey Suufiyada ula hadli jireen. qof Kutubo loo aqrinin xiqdi xabadkiisa buuxiyay ayaa ka xanaaqo hadalkaas kor ku xusan. qofkaasna xaqdoon ma ahan

.

=================================================================

**#Ibnu FUURAK waa Imaamka ASHAACIRO .**

(dhintay 400 hijriga)

waa ninka ugu aqoonta badan mad-habta Abuuxasan al ashcari.

waa ardaygii Abuuxasan cilmiga ka qoray waxoowna alifay Kitaabkaan

مجرد مقالات الشيخ أبي الحسن الأشعري

boga 175

ayoow kaga hadlayaa CADAAB AL QABRIGA inoow yahay wax jiro

waxoowna usoo daliishaday

ayada 28 Albaqra

كَيْفَ تَكْفُرُونَ بِٱللَّهِ وَكُنْتُمْ أَمْوَاتاً فَأَحْيَاكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ ثُمَّ يُحْيِيكُمْ ثُمَّ إِلَيْهِ تُرْجَعُونَ

(ثُمَّ يُحْيِيكُمْ = waa nolosha Qabriga)

sidaas ayoow u fasirtay Sheekha.

**QOFKa AHLU JANAHA ah**

in Qabriga oow raaxo ku dhex helaayo waxoow

daliil uga dhigay Aayadaan

قَالُواْ يَٰوَيْلَنَا مَن بَعَثَنَا مِن مَّرْقَدِنَا هَذَا مَا وَعَدَ ٱلرَّحْمَـٰنُ وَصَدَقَ ٱلْمُرْسَلُونَ

(yaasiin 52)

Abuu-xasan Al ashcari

waan ka diiday midaas

qoomka eey Aayadaas ka hadashay waa qoom gaalo ah.

hadalkooda waxeey ku bilaabeen hoogeeniyeey yaa hurdada naga toosiyay

hadii eey yihiin qoom qabriga loogu dhex naxariistay sidaas maba dheheen hoogeeyga maba dheheen

قَالُواْ يَٰوَيْلَنَا مَن بَعَثَنَا مِن مَّرْقَدِنَا

qeeybta labaad ee qoraalkaan ayaan uga hadli doonaa Quraanka & Aayadaha dafirsan CADAABTA-QABRIGA.

----

-IBNU FUURAK inta badan daliil ahaan Quraanka kama hadlo. waxa Buugaas ku qoran waa FALSAFADA AHLU SUNA.

-Abuu bakar Al-BAAQALAANI ayaa xooga saaray Xadiiska Nabiga iyo Quraanka.

waxaa halkaas kaaga muuqdo labadaas nin in eey is qeeybiyeen

.

qofna waxoow la hadlayaa AHLAL QURAAN

kan kale waxoow la doodayaa FEEYLASUUF GAAL ah.

-Nin gaal ah ayaa tifatiray Buuga

مجرد مقالات الشيخ أبي الحسن الأشعري

sababta oow u jeclaaday in oow tifatiro ayaa ah Buugaas waxoow ka hadlayaa "CILMULKALAAM"

siiba midka Muslimiinta.

-Imaam FAKHRADIIN AL RAASI

waa nin Muslim ah hadana waxoow sharaxayaa Buug oow qoray nin gaal ah oo GIRIIGA u dhashay.

qofka Diintiisa muhiim ma ahan balse amaanada cilmiga ma yahay mid sideeda u ilaalinaayo,  taxriifin ka dhoowraayo midaas ayaa muhiim ah.

**-REER AALASACUUD** sida badan waxeey tifatiraan Buugaagta eey qoreen ASHAACIRO.

weeyna ku dhex sheekeeyaan. qofkii Buuga lahaay ayeey Buugiisa ku dhex naqdiyaan, mana fiicna sidaas.

-IBNU XAZMI Kutubadiisa iyaga ayaa tifatiray

hadana meelaha qaar weey taxriifiyeen sida Taariikhda Israa-iil marka laga hadlaayo qalad tiro badan ayeey ku dhex dareen.

-Dadka ku hoowlan Buugaagta in eey tifatiraan amaanada cilmiga sideeda ha u dhoowraano .

=================================

**SHEEKH CABDULAAHI HARARI** (1)

Kitaabkiisa

الشرح القويم في حل ألفاظ الصراط المستقيم

Boga 366

ayoow uga hadlay arinkaas waxoowna qirayaa CADAABTA-QABRIGA.

waa Sheekh ASHCARI ah ku dhashay HARAR

laguna aasay LIBNAAN.

jiritaanka Cadaabta qabriga

aayadaan ayoow usoo daliishaday

وَمَنْ أَعْرَضَ عَن ذِكْرِى فَإِنَّ لَهُ مَعِيشَةً ضَنكاً وَنَحْشُرُهُ يَوْمَ ٱلْقِيامَةِ أَعْمَىٰ

waxoowna ku tilmaamay noloshaas adag oow Eebbe sheegaayo waa Qabriga dhex diisa,

-Sheeqaas inoow qaldanyahay qaabka oow udaliishada aayadana eey ka qaldantay ayaan aqristoow kuu soo bandhigayaa .

Aayada waxeey daba socotay markii Nabi Aadan iyo Xaawo laga soo buriyay Janada

waxeeyna tiri ka taga Janada dhexdeeda hadii hanuun dhankeeyga idiinkaga yimaado midka hanuunkaas raaco waa liibaanay

Aayada kalana weey sii dhameestirtay hadalkii waxeeyna tiri qofka  xuskeeyga ka jeesto

 waa hoogay nolol adag ayoowna muteeysan doonaa.

Aayadaha hoos ku dhigan adigaba nala aqriso.

قَالَ ٱهْبِطَا مِنْهَا جَمِيعاً بَعْضُكُمْ لِبَعْضٍ عَدُوٌّ فَإِمَّا يَأْتِيَنَّكُم مِّنِّى هُدًى فَمَنِ ٱتَّبَعَ هُدَاىَ فَلاَ يَضِلُّ وَلاَ يَشْقَىٰ

وَمَنْ أَعْرَضَ عَن ذِكْرِى فَإِنَّ لَهُ مَعِيشَةً ضَنكاً وَنَحْشُرُهُ يَوْمَ ٱلْقِيامَةِ أَعْمَىٰ

(DHAAHAA..123--124)

وَمَنْ أَعْرَضَ عَن ذِكْرِى فَإِنَّ لَهُ مَعِيشَةً ضَنكاً

noloshaas adag waa mida aduunka balse mida aakhiro maahan qabri qof lagu ciqaabaayana  kama hadlin Aayadaas.

Rabi qofka gaalka ah hanti badan ayoow siiyaa .

Muslimkana waa lamid.

mid gaal ah ayoow nolosha kadeed uga dhigaa
mid muslim ah weliba cibaado badan ayoow nolol adag ku imtixaanaa
waxaas oo ithil waa aduunka korkiisa Aayadana waxa eey ka hadleeyso waa intaas.
-Nabi Nuux waatuu dhahaayay hadii aad cibaadeeysataan Rabi rumeeysaan Togag webiyo ah ayaa leeydin siinayaa.
Fircoown waatuu Rabi aduunka ku ciqaabay abaarna ku saliday. imtixaan beey ka eheeyd. armoow hanuunaa ayaa looga golahaay.inahaas beey aayada dul kaxaadis ahaan uga hadashay balse CADAABTA- QABRIGA kama hadlin
HARARI hanaga raali ahaado .
**Sheeq C/laahi HARARI**
waxoow ka hadlay su`aasha leesku dhex weeydiiyo QABRIGA
waa mid ku cusub aduunka
Umadihii naga horeeyay ma aqoonjirin qofka dhintay lama dhihi jirin Nabi Muuse ma taqaanaa mana la dhihi jirin Nabi ciise inta sawirkiisa loo keeno ma aqoonsan kartaa.
-aniga dood kama qabo su`aasha qabriga.waloow qaabka oow hadalka u dhigay loo daliishan karo in eey BUG tahay xitaa su`aasha Qabriga.

waayo Umadihii naga horeeyay hadii aanan su`aalaha ceeynkaas ah iyaga la weeydiin jirin  maxaa keenay in Umada Nabi Muxamad lagu adkeeyo.Diin ugooni ah miyeey la yimaadeen?.

-aniga dood kama qabo su`aasha qabriga.

natiijada ayaan ka doodayaa. qofka hadii su`aalaha loodhameeyo kadib

NAAR ayoow aadayaa ama JANO ayeey doodeeyda tahay  10 daqiiqo oo su`aalo ah

waqti kuma luminaayo,

**-Abuu calaa al-macari**  waaba diiday jiritaanka labadaas malag waxoow ku dooday labadaas malag magacyadooda waa magacyo carbeed sida lagu yaqaano Malaa`igta magacyo carabi ah maba lahan sida JIBRIIL

asal ahaan magacaas waxoow ka yimid luqad ajnab ah.

Abuu-calaa al macari Af carbeedka loogama aqoon badna midaas waa loo qirayaa.

Abuu-calaa al macari isaga ayaaba lagu dhegan yahay lana gaaleeysiiyay.

Nabi Daa-uud ayoow wax ka sheegay. meelo badan ayoow diinta uga jeesjeesay

Diin oowsan taqasus uba lahaanin waxa ku ibtileeyay in oow ka hadlo  aniga ma aqaano.
Abuu-calaa gabyaa ayoow ahaay balse DIIN ma aqoonin.
-kooxda AKHWAANU-SAFAA in oow ka tirsanaay qisooyinka qaar oow iyaga u qori jiray qof soo baarto  in la helo waan jeclaay waayo waxaan u jeeday qisooyin ku dhex qoran Buuga Abuu calaa oow qoray isla qisooyinkaas ayaa ku dhex qoran Buugaagta eey qoreen AKHWAANU-SAFAA.sida qidasa ka warameeyso DUURJOOGTA. loogana waramaayo CADAALADA.

**aan usoo noqono C/laahi HARARI.**

waxoow kusoo gunaanuday qofka diidan CADAABTA QABRIGA
waa ku gaaloobayaa.isla Buugaas boga 380
ayoow sidaas ku leeyahay waxoow daliil ka dhigtay
Aayadii ka hadashay Fircoown in lagu  ciqaabaayo qabriga.
qofka aayadaas diidana waa ku gaaloobayaa sidaas boow hadalka u dhigay HARARI.
-halkaas waxaa ka muuqdo in HARARI oow na gaaleeysiiyay waayo inaga ayaa diidan
CADAABTA QABRIGA.

-waxwalba oo ku saabsan Daliilka QURAANKA waxaan jeclaay in aan qomada 2-AAD
ku dhex faahfaahiyo balse hadeer waa qasab in aan dhiigjoojin ahaan usoo bandhigo.
hadalkaas oow sheegay HARARI hudur aanan waxba ka jirin in oow yahay si loo ogaado.
--

غافر
45-46

وَحَاقَ بِآلِ فِرْعَوْنَ سُوۤءُ ٱلْعَذَابِ
Fircoown iyo ehelkiisa waxaa ku dhacay cadaab xun .
ٱلنَّارُ يُعْرَضُونَ عَلَيْهَا غُدُوّاً وَعَشِيّاً وَيَوْمَ تَقُومُ ٱلسَّاعَةُ أَدْخِلُوۤاْ آلَ فِرْعَوْنَ أَشَدَّ ٱلْعَذَابِ
Naar baana loo bandhigaa aroortii iyo galabtii
maalinteey kacayso saacaduna (qiyaamaha waxaa ladhihi)
geliya fircoon iyo ehelkiisa kan ugu daran cadaabta.
Dadka aaminsan CADAABTA QABRIGA
halka eey ku dul raftaan daliil kooda ugu weeyn. kuna qoran Quraanka dhexdiisa. waa Aayadaas ka warantay Fircoown.

halkaas beey waxeey ka fahmeen FIQHI ahaan in ninkaas & kooxdiisa lagu dhex ciqaabaayo Qabriga dhexdiisa.

-Soomaali waxeey tiri "nin kaligiis garamay waxna ma gefin" ninka gamuun dhulka ku genay isagana lama gefo.

Aayadaha marka lasoo wada uruuriyo ayeey wax walba cadaanayaan. bal ila aqriso waxa aan u daliishanaayo doodeeydana TIIRAR uga dhigay.

نوح 25

مِّمَّا خَطِيئَاتِهِمْ أُغْرِقُواْ فَأُدْخِلُواْ نَاراً فَلَمْ يَجِدُواْ لَهُمْ مِّن دُونِ ٱللَّهِ أَنصَاراً

**Qoomkii Nabi Nuux** ee la halaagay Rabi waxoow geliyay NAAR sida Aayadaas tilmaantay. balse Qabriga ayaa lagu ciqaabayaa lama dhihin.

Qoomkii Fircoown hogaaminaayay iyagana waa lamid NAAR BEEY U HOYDEEN.

halkaas waxaa ku buray daliilka ugu weeyn ee quraanka looga dhex baaray jiritaanka CADAABTA QABRIGA.

waayo hadii Qoomkii Nabi nuux Naar beey jiraan la ogolyahay, laba qoom oo gaalo ah beey ahaayeen maxaa qoomna loo dhahayaa Qabriga ayaa lagu ciqaabayaa qoomka kalana Naarta in eey galeen loo ogol yahay?.

------------------------------------

(1)waa kuma HARARIGA aan ka hadlaayay?.
waa wadaad reer HARAR ah balse ku dhintay LIBNAAN
deganaay halkaas 40 sano kabadan .waa sheeq Buugaag badan qoray.xogtiisa qofka ubaahan NEDKA ayoow ka baari karaa.kana heli karaa Buugaagtiisa iyagoo PDF ah.
==============================================

**#SHEEKH CUMAR ASHQAR.**

القيامة الكبرى - عمر الأشقر

القيامة الصغرى

1991.

1997

labadaas Kitaab ha aqristo qofkii rabo in oow wax badan ka aqriyo(1)

dhimashada ka dib waxa dhacaayo sidoo kale aakhiru zamanka waxa imandoono sida la saadaaliyay xadiis sugan iyo mid aanan sugneeyn Aayado quraan oo lasoo uruurshay

iyo waxa eey ka dheheen culimada ugu miisaanka culus afkaar ahaan inta Aduunka soo martay balse inta aanan weli dhalanin afkaartooda kuma qorna halkaas booska eey wax ku qori lahaayeen Baalashooda waa cad yihiin waana loo baneeyay.

,beryahaan waxaa dadka dhibay Oday dhahaayo fikirkaan cid kaaga horeeysay maa jiryaa, waxaadba moodaa in loo daayay

dadkii hore iyaga uun in eey wax alifaan dhalinta cusub moow duuc eey ka hadlaan in aanan looba reebin .

Quraanka qabyo maahan balse Mad-habta Shaafici ayaa qabyo ah mida Akhwaanka ayaa u baahan hormarin mida Abuuxaniifa mida Imaam maaliig balse muqalidka intaas ma dareensana.

kan muqalidka ah  wax walba in oow ka dhigo wax wada engegay ayoow rabaa.

Suugaantaba sida eey Abwaano cusub u leedahay DIINTAAN mar walba Culimo cusub ayeey heshaa .Nabi danbe majiro balse waxaa jiro FAQIIH.

-ha ku kadsoomin 4 Imaam .

hada kahor Nabiga waxaa  u yimid Jibriil oo Dadka isku soo ekeeysiiyay

sheekadi caanka noqotay kuna qorneeyd 40-ka xadiis.

IMAAMYADA mad-habtooda qodobadaas oow Jibriil kala hadlay Nabiga ayeey wax walba ku dhiseen

.SALAAD,SOON,XAJ,ZAKO.

Kitaabka Quraanka waxa oow ka hadlo intaas weey ka qoto dheer yihiin.

Imaam Fakhradiin Alraazi markoow fasiraayay Quraanka waxoow yiri Suurada faatixada kaligeed ayaan waxaan ka alifi

karaa dhoowr Kitaab, aniga oo fahan cusub kala soo dhex baxaayo mar walba.

-aniga kuma raacsani arinkaas waayo Quraanka waa ka miisaan culus yahay wax eey hal qof wada fasirto. Nabiga 20 sano ayeey ku qaadatay in loo dhameestiro.

-Nabi Muxamad Umad walba oo Aduunka ku nool ayaa loosoo diray

adiga aqristaha ah hoowshaada waa in aad wax sii tarjumtaa afkaa taqaanid kasoo rogtaa aqoonta una sii rogtaa SHiinees xitaa haduu yahay waxaa waajib kaa saaran yahay aqoonta Diintaada u leedahay ku faafisaa ADUUNKA.

=======================================

(1) labadaas Buug waxaa qoray Nin Urdun u dhashay Dalkiisana waa Cumaan .
aniga mar walba waxaan u maleeyaa URDUN & Cumaan in eey laba dal kala yihiin.
doqonniimada dhanka Juquraafiga iga heeysato ayeey ka mid tahay .
xitaa markaan yaraay waxaan maleeysan jiray Madiina in eey dhanka Soomaaliya soo xigto Makana ka shisheeyso Madiina, waa marka lajoogo Dalkeena Soomaaliya.
intaas waxaan kuugu sheegayaa si aadan ugu maleeynin in aan wax walba ku wanaagsanahay. mana jiro qof wax walba ku wada fiican.
HEES "ma dhama aduunyadu weligeed waxbaa dhiman dhan markaad ka qabatana kan kalaa dhacaayoo dheeliyaa hadiyo jeer "
Buugaagtaas Ninka qoray Caqiido ahaan ASHCARI maahan .Siyaasad ahaana waa AKHWAAN- MUSLIMIIN xogta aan ka haayo ee laga qoray ayaa sidaas tiri.

waxaan arkaayay Dad AKHWAANKA
eeda dusha ka saaray.waxeey dheheen dhanka AAKHIRO waxba kama qoraan AKHWAANKA.
SIYAASAD uunbeey daba rucleeyaan.
-Bulshada waxa eey xiiseeyso ayaa lagu qasban yahay in wax laga qoro.
ASHAQAR , labadaas Buug markoow qoray cidna kama iibsanin
waayo moowduuca oow ka hadlay wax cusub kuma soo kordhinin Maktabada.
wax waa hore in badan looga hadlay ayoow dib u qoray , waxa oow ka hadlay hadana waa CILMI AAKHIRO ,halkaasba ka garo Dadka uma hamuun qabaan CILMIGAAS AAKHIRO
Aduunka ayeey aad u jecel yihiin .qofka rabo in oow wax ka aqriyana halka leesku qilaafay ayoow isku hoowlaa.
taasbaa sabab u ah in CADAAB QABRIGA laga doodi waayo oo duuduub ahaan looba qaatay
waayo waa moowduuc ku saabsan marka la dhinto kadib waxa dhici doono .

qofka waxoow isku qancinkaraa .Jano&Naar hadeey tahay natiijada waan rumeeyay taas, aana ka raacdo aduunyadeeyda. inaga hada wax cusub ayaan ku soo kordhinay moowduuca .
-Mad-habta AKHWAANKA waxaan ka baqayaa in eey meeshaba ka saarto 4 mad-hab .
war hooy hurdada ka kaca muqalid nimadana iska daaya.
-**Baraa rujin**.ASHQAR waxoow Buugiisaan ku qoray
Abuu bakar Albaaqalaani Cadaabta Qabriga.ayoow inkiray.
isla buugan لقيامة الصغرى boga 106 ayoow sidaas ku sheegay..
warkiisa in oow been yahay u badi waayo Baaqalaani waan kasoo minguuriyay isagoo qiraayo Cadaabta Qabriga.
qolyahaan Xanaabilada ah Dadka weey ku been abuurtaan.
qofka dhiig baneestay in oow Buug la been abuuray kaa qoro amaba kaas been abuurka ah oow hadalka kasoo xigto wax weeyn uma arko qofkaas. wax walba ka filo Xanaabilada. sidaas ayeey u maleeyeen in Diinta loogu hiilin karo. FORCOOWN in aan ku been abuurano wax oowsan sameeynin dusha ka saarno ayaa naga xaaraan ah.amaanada cilmiga qofka aanan dhoowri karin in oow Qalinka iska dhigo ayaa u qeeyr badan.
-Baaqalaani hadii oow Buugaag kale ku qoray hadalkaas waan baari doonaa anigaaba u baahnaay oo garabkeeyga cidlo yahay.
========================================

**#IBNU XAZMI** maxuu ka yiri cadaabta XABAALAHA TAAL?.

ابن حزم الظاهري

(dhintay 450 Hijriga)

Kitaabkiisa

الفصل في الملل والأهواء والنحل.

Xirmada 4-aad.-boga 117

CADAABTA QABRIGA ayoow kaga hadlayaa.

qolo walbana waxa eey u daliishatay ayoow soo tixayaa.

qof ahaan isaga waxoow raac san yahay dadka yiri waajiraa

Cadaabta qabriga balse Ruuxda ayaa la ciqaabayaa

balse Jirka laguma dhex ciqaabo xabaalaha.

Ibnu xazmi waxoow halkaas ku dhigay in
oowsan jirin hal xadiis oo sheegaayo
Ruuxda ayaa jirka lagu soo celinayaa kahor maalinta qiyaamaha
. ninkaas waxoow aaminay  qofka dhintay Ruuxdiisa ayaa la ciqaabayaa ama Jano dhex joogeeyso
kadibna marka Qiyaamaha Firinbigiisa la yeeriyo  ayaa jirka dib loogu soo celiyaa.

**IBNU-XAZM**

KHAWAARIJ & MUCTAZILO
ayoow ka hadlay waxoowna qiray Muctazilo hal nin ayaa iska diiday jiritaanka CADAABTA QABRIGA
waxoowna fikir ahaanta ku raacay KHAWAARIJ.
dhab ahaantii Khawaarij mad-habtooda cid
si fiican  uga hadashay lama haayo
Ibnu xazmi wax yar ayoow ka qoray arinkaas.
KHAWAARIJ waxa eey u  daliishadeen diidmadooda wax badan kama soo bandhigin
labadaan Aayad ayoow soo hadal  qaaday.
suurada Gaafir
Aayada 11-aad.
Albaqra 28.

markaan meelaha kale wax kasoo baarbaaray kuna saabsan Khawaarijta waxaan soo ogaaday in eey
daliishadaan Aayadaan
<u>(thuma inakum bacda thaalika la mayituun...)</u>

كَيْفَ تَكْفُرُونَ بِٱللَّهِ وَكُنْتُمْ أَمْوَاتاً فَأَحْيَاكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ ثُمَّ يُحْيِيكُمْ ثُمَّ إِلَيْهِ تُرْجَعُونَ

[baqara 28]

waxeey dheheen Aayadaan looma daliishan karo jiritaanka Cadaabta qabriga

قَالُواْ رَبَّنَآ أَمَتَّنَا ٱثْنَتَيْنِ وَأَحْيَيْتَنَا ٱثْنَتَيْنِ فَٱعْتَرَفْنَا بِذُنُوبِنَا فَهَلْ إِلَىٰ خُرُوجٍ مِّن سَبِيلٍ

(gaafir11)

sababta aanan loogu daliishan karin waxa waaye hadlakaas cida tiri waa Gaalo.
Dad badan waxeey qirsan yihiin in dhabarka Nabi aadan laga soo saaray qof walba oo Bini aadan ah kahor inta oowsan Dunida imaanin nolosha nuucaas ah
ee aanan la fahmi karin, nolol la mid ah ayaa naga danbeeyso, inta laga gaaraayo Buunka qiyaamaha .balse Qabri ayaa leesku

ciqaabayaa ama Jano ayoow qofka dhex degayaa waxaas waxba kama jiraan sidaas beey dheheen KHAWAARIJ.

{aqri.Tafsiirka Fakhra diin al raazi .xirmada 2-AAD

boga 166}

-halkaas waxaa ku cad KHAWAARIJ mad-habtooda

in eeysan eheen mida aan idiin soo bandhigay ee ku saabsan qofka dhintay ee wanaagsanaay Jano ayoow gelayaa isla markoow dhintaba. kan denbiga dhex dabaashana geerida kadib isla marka eey ruuxda ka dhacdo Naar ayoow gelayaa.aniga sidaas baan iri ,

**Khawaarijna** waxeeyba dhahayaan waxaas waxba kama jiraan, Jano iyo Naar weey danbeeyaan qofka xabaal galay waxba ma oga kahor inta aanan lees xisaabinin.

وَكُنْتُمْ أَمْوَاتاً فَأَحْيَاكُمْ ثُمَّ يُمِيتُكُمْ ثُمَّ يُحْيِيكُمْ

waxeey dheheen kahor inta aanan imaanin Aduunka (0) baan eheeyn qaar aanan jirin baan ahaan jirnay, Rabi ayaa naf na geliyay

aduunka na keenay ,geeri ayaa naga danbeeyso , nolol ayaa xigi doonto taasna waa maalinta loo dareero in dadka la xisaabiyo.

Xabaasha qof ku jiro ayaa ruuxda u soo noqotaa oo su`aal lagu dhex weeydiiyaa halkaas ,waxba kama jiraan .nolosha waa 2. hada iyo hadhoow. geeridana waa 2 mid lasoo dhaafay iyo mid inoo dhiman .nuxurka hadalkooda hadii aan dhan walba ka istaagay waa sidaas.

-waxaan isleeyahay midaas ayaa ku kaliftay in eey ku dhiiradaan dhiig daadinta waayo Sheeydaanka waxoow cod saday in loo seetadheereeyo si oow dad badan u duufsado.

nafta in loo daayo inta Aduunka lagu dul nool yahay.

qofka markoow og yahay in xisaabta Eebbe degdeg tahay markaad soo hoyataba Jano lagu abaal marinaayo qofka ama Naar

kuma dhiirado dhiig daadinta waa is dhoowraa. weliba dhiig Muslim laga daadiyay lana hubo in dartiis naarta lagu waaraayo shirkiga waxba dhaamin .

Khawaarij dilka weey sahashadeen midaas baana u sabab ah.

-xisaabta ma dhawa waxaa doontid sii walaaq.

dhib maleh , dhoowr neef ayaad goowracee, Rabina halkaas ayoow dengigaaga ku dhaafayaa.hanti ayaad ku sasabi kartaa Eebbe.

وَمَن يَقْتُلْ مُؤْمِناً مُّتَعَمِّداً فَجَزَآؤُهُ جَهَنَّمُ خَالِداً فِيهَا وَغَضِبَ ٱللَّهُ عَلَيْهِ وَلَعَنَهُ وَأَعَدَّ لَهُ عَذَاباً عَظِيماً

(nisa-93)

-Dhaqan waxaa jiro, markaad duqoowdo geerida kuu soo dhawaato ayaad toowba keenni doontaa. Aayadaan hoos ku dhigan si fiican u dhuux waxba wadaad yoowsan kuu fatwoonin .

qof oow sakaraadka saaran yahay ayaa toowba keen laga aqbalayaa ama gaalnimo ka ansaxdaa waxba kama jiraan . Buuga xumaanta ama midka samaanta waa la xirayaa xiligaas. xanuunka aad ku dhiman leheeyd haduu ku haleelo, albaabka toowbada waa kaa xiranyahay.

وَلَيْسَتِ ٱلتَّوْبَةُ لِلَّذِينَ يَعْمَلُونَ ٱلسَّيِّئَاتِ حَتَّىٰ إِذَا حَضَرَ أَحَدَهُمُ ٱلْمَوْتُ قَالَ إِنِّى تُبْتُ ٱلآنَ

(nisa18)

-inaan wacdi idiin qor-qoro Qalinka uma soo qaadanin,

balse qolo walba waxa eey ka qabaan CADAABTA-QABRIGA
in aan soo bandhigo ayaan Qalinka u qabsaday.
**-warkiyoo kooban KHAWAARIJ**

waxeey dheheen qofka markoow dhinto hurdo ayoow gelayaa.
cadaab ma arkaayo sidoo kale jano ma gelaayo.
marka lees xisaabiyo ka dib. oo Buunka qiyaame
la yeeriyo. dadka dhamaantood Qabriyada laga soo wada soo
saaro kadib, ayaa laba koox loo kala saarayaa
qeeybna Jano loo ka xeeyay inta kalana Naarta.

- qof diidan ma jirto in sidaasi tahay
natiijada danbe JANO&NAAR loo kala hoyanaayo .xitaa
AHLALA KITAABKA
sidaas waa rumeeyeen balse waxa leesku heesto ayaa ah
qofka hadeer dhintay Qabriga malagu ciqaabayaa mise ?.
Jano ma gelayaa mise?.
kahor inta aanan Aaduunka la rogin.

---

**KHAWAARIJTA mad-habtooda**

Aayad xoojineeyso hadii aan inoo sheego

إِنَّكَ لاَ تُسْمِعُ ٱلْمَوْتَىٰ وَلاَ تُسْمِعُ ٱلصُّمَّ ٱلدُّعَآءَ إِذَا وَلَّوْاْ مُدْبِرِينَ

(النمل)

qof dhintay kor ugu qeeyli ama hoos ula faq hadalkaaga maqli maayo.

waxaa kale oo taageero u noqon karo mad-habtooda

قَالُواْ يٰوَيْلَنَا مَن بَعَثَنَا مِن مَّرْقَدِنَا هَذَا مَا وَعَدَ ٱلرَّحْمـٰنُ وَصَدَقَ ٱلْمُرْسَلُونَ

(yaasiin 52)

sida ka muuqato Aayadaas qoomkaas waa gaalo qiyaamaha ayaana loo dareershay mana dhihin cadaab qabriga yaa naga soo kaxeeyay mana dhihin Naarta yaa naga soo saaray balse waxeey dheheen yaa hurdadii aan hurdeeynay naga toosiyoo baas?.

---

**ibnu mascuud waxoow yiri**

Albaqra 28 & gaafir 11

labadaas Aayad waa isku macne

dhimashada waa laba jeer

geeridana waa laba jeer.aniga hadaan ahay Ibnu xazmi sida oow sheegay Ibnu mascuud ayaan la qabaa.

Ruuxda ayaa la ciqaabayaa balse Jirka maahan midka la ciqaabayo. ibnu xazmi baa sidaas yiri.

hadalkaas Ibnu mascuud sheegay

qofwalba sidoow doono ayoow u qaadan karaa

mugdi baa hareeyay hadalka Ibnu mascuud.

**FIKIR AHAAN Dadka 4 kooxood**

ayeey kala noqdeen .

1......... majiro cadaab qabri mana jiro Jano la gelaayo ka hor Aakhir zamanka. waa fikirka Khawaarijta.

2.............. Cadaab qabriga waa jiraa balse jir ahaan maahan waa ruuxda waxa lagu ciqaabaayo halkaas. jirkana waxaa la ciqaabayaa marka Qiyaamaha loo dareero,oo dadka laba saf loo kala saaro. Ibnu Xazmi & Feeylasuufyada ayaa sidaas rumeeysan waloow eey meelaha qaar isku qilaafeen.

3..........Cadaab qabriga waa jiraa jir ahaan ayaana qofka loo ciqaabayaa feerahiisa ayaa is dhaaf u burburaayo sida loo

ciqaabaayo darteed balse dadka marka eey Xabaal qodaan waxaas ma arkayaan . qofka suubanaay Jano ayaa albaabkeeda loo furayaa isagoo Qabriga ku jiro ayoow halkaas wax walba kasii daalacdaa. waxoow cuno loogu keenaa halkaas.

kooxdaan 3-aad ma eeysan sheegin in Haween loogu keenaayo Xabaasha dhex deeda . waa loo nimceeyaa ayeey dheheen balse wax faahfaahin kama bixinin . SHIICO+SUNI dhamaan Muslimiinta dunida ku nool ayaa mad-habtaas rumeeysan .

**- Kooxa 4-AAD**

aniga ayaa soo kordhiyay

qofka dhintay JANO ayoow dhex joogsadaa

ama NAAR holceeyso.

waana sida saldhiga xabsiyada, kahor inta aanan lagu dhawaaqin xakunka maxkamada.

Qofna laguma dhex ciqaabaayo Qabriga balse toos ayoow Naarta u dhex tiinbadaa, kii toosnaay isagana Jano ayaa loo kaxeeynayaa halkaas ayoow ku sii nastaa inta laga gaaraayo Buunka qiyaamaha yeerintiisa. marka eey Samada dildilaacdo ayoowna kasoo degayaa halkaas.

**CILMIGA WAA AMAANO**

cid maanta fikirkaas cusub igu raacsan ma jirto.

cid hiil  ii noqoto sida Abuu-bakar ila faafiso fikirkaas qurxda badan  waan jeclahay in aan helo. aqristoow
qofka 2-AAD ma ii noqon , ma ku qanciyay fekerkaas?.

============================================================

**#Dhimashadii NABIGA.**

hadalkii sii  ugu danbeeyay waxoow ahaay
<u>"Allaahuma fii rafiiqil aclaa"</u>
مَعَ ٱلَّذِينَ أَنْعَمَ ٱللَّهُ عَلَيْهِم مِّنَ ٱلنَّبِيِّينَ وَٱلصِّدِّيقِينَ وَٱلشُّهَدَآءِ وَٱلصَّالِحِينَ وَحَسُنَ أُولَـٰئِكَ رَفِيقاً

(nisa 69)

halkaas waxaan ka fahmeeynaa in eey hal meel u wada arooreen dhamaantood
Aakhirana JANO ayeey dhex joogaan balse QABRI barwaaqo dhex taalo kuma qorna Quraanka.

**---------**

**#Dhimashada qofka Muslimka ah.**

markoow dhiman rabo agteeda Malaa`igta ayaa hareer fadhido hanbalyo ayeey dhahayaan ,Kafan ayeey Janada kasidaan , aadna loo carfiyay barafuun

Janada  yaalay ayaa lagu soo bilbilay
markoow dhinto kAFANTII ayeey ku duubayaan Samada
ayeeyna sare ula aadayaan.
sida Aayada sheegtay waaye oo albaabada ayaa loo furaa ruuxda
qofka Muuminka ah
salaama kusoo dhawaaw ayaana la dhahayaa.
Malaa`igta ayaa salaanto una baryeeyso rabi in oow u naxariisto
(huwa ladii yusalii caleeykum)
-Rabina dhankiisa ayoow salaan ugasoo diraa ruuxdaas
wanaagsan
Malaa`igtana weey salaamaan sida ku dhigan Quraanka .
-SHEEKADA markeey halkaas mareeyso ayeey dadka qaar
waxeey ku dhahayaan
dib ayaa loo soo celiyaa dhulka hoose ayaana la geeyaa
GODKA ayaa dhexdiisa barwaaqo lagu siiyaa .
midaas ayaan diidanahay aniga oo waxaan leeyahay   hadii aad
uduushay  Samada  7-AAD.
weliba Albaabadeeda laguu furay.  horay usii usoco JANADA
garaac Albaabkeeda haka soo tegin halka eey Malaa`igta ku
geeysay.
maxaad iigu soo noqotay kuna dhex keenay Aduunkaan? .

JIMCO walba Moowtada Bun haloo dubo ayeey ku dhahayaan Sheeq CALI WAJIIZ cidiisa .
SHIICADANA waa lamid weliba waxaan ka cabsi kaqaa in asal ahaan sheekadaas dhanka SHIICADA nalooga keenay.
Xasan waa la dilay dib ayoow usoo noqon, Xuseenna waa sidaas, balse Xamse JANADA ayoow dhex duul-duulayaa, ducaqabooshin maxaa dib ugu soo celiseen XASAN&XUSEEN Xamsana JANADA u geeyseen , Nabiga ayaa sheegay labadaas waa dhalinyarada JANADA.
bal dib usaxa MAD-HABTIINA SHIICDA.

-Aqristoo waxaan kaaga digayaa ADUUNKA in aad ZAAHID ka ahaatid
una maleeysid hadalkeeyga AAKHIRO uun in meel loofadhiyo in aan ula jeedo qoraalkaan.
Daabka Yaanbada Midigta ku qabso tacbo dhulkaaga ama tunn biraha oo tumaal noqo sida Nabi Daa-uud.
-Naqdi waan ku sameeyn doonaa Abuu-Xaamid Al-Gazaali kitaabkiisa "IXYAA" balse hada maahan .
waxyaabaha aan ku nacay marbaan gooni uga hadli doonaa.

-ADUUNKA inagaa iskaleh in aan ku raaxeeysano oo dhar qurxoon ku dhex qaadano.
qofka markoow jiran yahay  in oow is daweeyo waa diinta qeeyb kamid ah
cudur in oow udilo naftiisa waa xaaraan.
----------------------------------------------------------------------
**#NAAG YAHUUD AH** ayaa Diinta kusoo dartay CADAABTA QABRIGA!.

**waa QISO qosol badan** oo Nabiga looga been abuurtay kuna saabsan
CADAABTA QABRIGA.
-Naag Yahuud ah
ayaa Caa-sho la joogtay waxeey tiri miyaad ka warqabtaa in QABRIGA dhex diisa  fidno idinku sugeeyso?.
Nabigaa u jawaabay oo yiri" YAHUUDA ayaa Qabriga lagu dhex fidneeyaa.
Jawaabtaas oow Nabiga siiyay Naagtaas  Ayadaan ayaa daliil uga dhigay.
GAALKA marka oow dhinto in la ciqaabaayo ayeeyna ka hadleeysaa.

أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ بَدَّلُواْ نِعْمَةَ ٱللَّهِ كُفْراً وَأَحَلُّواْ قَوْمَهُمْ دَارَ ٱلْبَوَارِ

جَهَنَّمَ يَصْلَوْنَهَا وَبِئْسَ ٱلْقَرَارُ
[ابراهيم..29..28]

{Imaam Muslim ayaana Buugiisa ku qoray."Kitaabka Masaajidka"

waxaan kasoo xigtay xogtaas Buugaan

لقيامة الصغرى

boga.45}

-Xadiiska in sidaas loo daayo laguna joojiyo halkiisa ayeey qurux badneeyd
balse waxeey dheheen dhoowr maalin kadib Nabiga waxyi baa kusoo degay CADAABTA QABRIGA in eey jirto ayaana loo sheegay.
waxaa layaab leh waxyigaas in oowsan noo qorneeyn .
aaway Aayadaas .Quraanka horteena ayuu ka muuqdaa kumana qorna wax kusaabsan CADAABTA QABRIGA.
Quraan dhumay haduu yahay hanaloo sheego. Quraan la nasakhay haduu yahay kaas waaba laga tiray Kitaabka lamana tirsan karo.

-waxaa la yaableh qofkii keenay CADAABTA QABRIGA waxoow kusoo koobay MUSLIMKA waxoow yiri qofka nijaasada aanan iska ilaalin kaas ayaa
Qabriga lagu ciqaabayaa.
imisaa MUNAAFIQ lagu aasay magaalada MADIINA.imisaa GAAL ku dhex aasan
kuwaas Qabriyadooda lama dul tegin lamana dhihin hada ayaa la ciqaabayaa, balse MUSLIM dhintay Qabrigiisa ayaa lagu been abuurtay . lana yiri Nijaasada ayuusan iska dhoowri jirin intaas ayaa loo ciqaabayaa.
-Qisada Naagyaas YAHUUDA ah
Xadiiska looga hadlay isaga ayaaba is daba marsan
mar waxoow dhahayaa dadka halkaan ku duugan waa MUSHRIKIIN markalana waxuu dhahayaa waa Muslim dadka ku duugan halakaan.

shaki kama qabo in Xadiiska nuucaas ah Nabiga looga been abuurtay.

=================================

**# DHULKII MUGDIGA AHAAY.**

**DHAQANKA YAHUUDA ayoow ka mid yahay.**

YAHUUDA Sheeko xariiradooda waxaa kamid ah "dhulkii mugdiga ahaay" waana meel lagu ciqaabo qofka dhintay.

markale  ayaan ka hadli doonaa oo Buugaagtooda soo xigan doonaa waaba hadii loo baahdo arinkaas.
 waxaa  halkaas kaaga muuqan karo NAAGTAAS Caa-isho u sheekeeysay in eey dhaqankaas rumeeysneeyd  iyada. kadibna dhankeena usoo dusisay.aniga ma hubo in warkaas TOOWREED ku qoran  yahay .Inbu khalduun waxoow dhahay YAHUUDA Carabta ah ee Nabiga xiligiisa nooleeyd waxba diinta TOOWREED kama aqoonin .
dabcan Ibnu khalduun waa khabiir dhinaca diimaha ah waana soo aqriyay labada dhinac.
=====================================

**#Albaabka Janada maxaa Qabriga ag keenay.**

Janada Cirka 7-AAD
ayeey ka shisheeysaa
Sidee qof ku jiro Qabriga loogu furi karaa Albaabka Janada midaasna waa xisaab qaldan xitaa hadii aan xariga u deeyno.
Quraanka kama baxsan karaan xujada oow ku hor gudbay Mad-habtaan liidato.
-markalana  waxeey dheheen Nafta Janada ayeey jirtaa waana sida Shinbirta halkaas ayeey hadba dhan u buubtaa inta  Buunka Qiyaamaha laga yeerinaayo halkaas beey sii joogtaa.

Midaasna waa is burin kale.
soow adiga ma dhihin Qabriga ayeey dhex joogtaa .hadana sidee ayaad ku dhihi kartaa Janada ayeey jirtaa waana Shinbir. Wax wada miliqsan ayaa meeshaas kasoo baxaayo aanan la fahmi karin sida Masiixiyada ayuu xaalka noqday markaas.
- Nabi Ciise &Jibriil&Ilaah dhamaantood hal waaye weey midoobeen.
hadhoow ayeey kuu kala saarayaan. sheeko ila meereeyso ah ayeey meesha ku haayaan.
-Injiilka"BARNAABA" waxa ku qoran ayaa sax ah 80% lamana taxriifin ee midkaas ku dhaqma. isagaas Eebbe la hortaga idinkoo toowxiidka qirsan sidaasna lagama karo Dadka aaminsan Masiixiyada.
**-Masiixiyada** maxeey ka aaminsan yihiin CADAABTA QABRIGA?.
Jawaabta waxeey tahay Soomaali ayaan wax u qorayaa
ifkana waxeey ugu neceb yihiin in daliilka looga raadiyo Diin aanan Diinta Muslimka eheeyn.
ana iskuma daaliyo daliil ka baxsan Diinta Islaamka.
**-CADAABTA QABRIGA**

sida aan u sharaxay aniga  oo aan Aayada Quraanka  u daliishay & Axaadiista Nabiga  wax ka qurux badan lama soo helaayo hadii TACASUBKA meel leeska dhigo.

=============================================

# #CAQIIDO.

**Culimadeena qaarbaa CARSHIGA**

dhinaciisa laga soo marin.

waxa aan ka aamin-sanahay  CARSHIGA horay waan u cadeeyay qoraal ahaan   hadana dib ayaan usoo celinayaa isla qoraalkaas.

-Buunka qiyaame marka la yeerin doono haloo codeeyo Carshiga sida laga yeelaayo haduu dhaho Eebbe sida Cirka in loo burburiyo ayaan u codeeyn lahaay .

waxaan codka siin lahaay in gebi ahaantiisba (0) laga dhigo waayo Dalka GIRIIGA Feeylasuufyadooda gaalada ah ayaa waxeey dhihi jireen Eebbe SAMADA ayoow dhex degan yahay ,3000 sano kahor ayeey Buugaagtooda ku dhex qoreen waxaas. Quraan cusub ayaa soo degay laguna qeexay in CIRKA  la burburinaayo.

CARSHIGANA in sidaas Eebbe ka dhigo ayaa cindigeeyga jecelyahay. CARSHIGII ILLAAHEEY Culimaa ku fidnoowday

.

-----------------------------------

# #CAQIIDADEEYDA MIINLEEY.

#MIINLEEY,2024

marhoraan ka-maray dhaar inaanmaanso tiriyaaye miinleeyda waasheeko maanso loo ekeeysiiyay.

Anigaan macbuudkeeyga Lafo&maqaar maahan

Masalana masiisaarna,markalana masoosaarna,mid Malaa`ig sido maahan .Makhluuqaadka gebigoodba mid maciin karabo maahan.

-----

-Anigaan Macbuudkeeyga  mid lalamidoobi-karo maahan, iskumilan midkaas sheegay markahoraaba maankaaga makhluuq caabud kaeheeyde, mahwigana adaakeenay,doodeeydaan murankeeda.

-Jibriil & Muxamadkeena mursaliinta gedigood mideey lamidoobi-karayaan maahan.

-meelo badanba,Diinteena Nabigeey amaantaaye,

Misbaaxda & nuurkeeda,waxa eeylameeljoogtay Macbuudkood amaantaaye, ileeskaas,inoo muuqdo waa makhluuqe Illaah maahan.magacyaa naloosheegay sifo muuq-uyeel maahan.

Quraankana kasoobaaro sifo maba naloosheegin .mardanbaa nalookeenay, Quraankeena kuma qeexna Illaah muuqdo sifahiisa.

=============

Miinleeyda 2-aad

(carshiga)

-Aniga maanso maaqaano misbaax-surantay maankeeyga ayaan miinka kahingaadshay.waana sheeko miinleey ah.

Carshigana,maciindoonka,

Malagaa-xanbaaraayo,moowlaheeyga mabasaarna.kursigaa-lameeljoogo.

Makhluuqaadka gedigoodba moowlaheena umabaahna

(idaasalka,cibaadii,canii)

mid dhawaansho lagusheegay kacbadow mushaaxaahe ukaalaya miyoowsheegay midkaas Keenya ka dhawaaqay

=============

#Miinleeyda

3-aad.

-Anigaan macbuudkeeyga

Miskiga udgoon maahan sida Timir macaanmaahan humaaga&muuqaalka intamaanka sawirtoodhan moowlaheeyga kaas maahan.

-Muruq&awoodeeyda intaan miinka kahingaadshay mahadeeda Rabigaa leh.

-ma lulmoodo manaliico inta hurdo masootooso.

Muuqmaleh macbuudkeeyga.

Muuqlaay hawana maahan.

Nabi Muxamad udgoonkiisa miskigoow lameeljoogay.

intasoo`udgoontiyo,intakalee,udgoonlaay

ILLAAHEENA kaasmaahan

================================================================================

وَمَا جَعَلْنَاهُمْ جَسَداً لاَّ يَأْكُلُونَ ٱلطَّعَامَ

sida Adoomadiisa Rabigeena jir kama sameesna wax maadi ah. sheey la taaban karo . .

وَلَمْ يَكُنْ لَّهُ كُفُواً أَحَدٌ

Rabi uma sugnaanin mid saacido.

CARSHIGANA  ma ahan mid loo abuuray in oow Rabi kaalmo ka dhigto  kuna fadhiisto , balse CARSHIGA ayaa kaalmo u baahan kor in

loo sido ayoow ubaahan yahay  Malag baa la yiri kacee bal saacid Kursiga iyo Carshiga. kor beeyna u sidaan kursiga iyo Carshigaba.
hadal kulul waaye midkaas balse waxaa ka kuleel badan  waxa Quraanka sida qayaxan loo gu dhex qoray oo ah RABI HAWEEN uma baahna.
lama dhalin waxna ma dhalo.

**لاَ تَأْخُذُهُ سِنَةٌ وَلاَ نَوْمٌ**

qof daalay baa kursi ku dul nasto. Sariirna qof hudo qabatay ayaa ku sandeecsato Rabina waa ka nasahan yahay waxaas.
SARIIR kuma seexanin Eebbe  wax laga wiswiso weeyba tahay.
cida tiri Rabi ayaa Carshida dhex degan iyagaas dusha haloo saaro waxa ka  dhasho dooda nuucaas ah .

**ٱلَّذِينَ يَحْمِلُونَ ٱلْعَرْشَ وَمَنْ حَوْلَهُ يُسَبِّحُونَ بِحَمْدِ رَبِّهِمْ** وَيُؤْمِنُونَ بِهِ وَيَسْتَغْفِرُونَ لِلَّذِينَ آمَنُواْ

رَبَّنَا وَسِعْتَ كُـلَّ شَيْءٍ رَّحْمَةً وَعِلْماً فَٱغْفِرْ لِلَّذِينَ تَابُواْ وَٱتَّبَعُواْ سَبِيلَكَ وَقِهِمْ عَذَابَ ٱلْجَحِيمِ

رَبَّنَا وَأَدْخِلْهُمْ جَنَّاتِ عَدْنٍ ٱلَّتِى وَعَدْتَّهُمْ وَمَن صَـلَحَ مِنْ آبَآئِهِمْ وَأَزْوَاجِهِمْ وَذُرِّيَّاتِهِمْ إِنَّكَ أَنتَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ

وَقِهِمُ ٱلسَّيِّئَاتِ وَمَن تَقِ ٱلسَّيِّئَاتِ يَوْمَئِذٍ فَقَدْ رَحِمْتَهُ وَذٰلِكَ هُوَ ٱلْفَوْزُ ٱلْعَظِيمُ
Allaha noo aqbalo ducadaas Malaa`igta noo duceeyneeyso.
Caqiidada Allaha noo hagaajiyo.
Rabiga aad caabudeeysid hadii aadan aqoonin wax ku saabsan isaga. jidka oo laga lumo ayeey ka mid tahay.Sheekh Qusheeyri *400 hijriga ayoow noolaay* waxoow yiri hada ayaan dib usoo muslimay.dabcan waa ku qaldan yahay midaas waana buunbuunin & ka bad-badin.horaanba Muslim waa u ahaay. maado ka qarsoontay ayaa loo bayaaniyay.

(la tu bayinunahu linaasi walaa taktumuunahu..)

Dadka waad u cadeeyneeysaan Aayadaha Eebbe kama qarineeysiin.

xaqa oo la sheego waa qaraar yahay.

==================================

# GUNAANADKA.

Q.1-AAD

aqristoow sida hasha labada Geel jecel.

Lababogleeye maatahay weli.

weli Labacodleeyn miyaadba joogtaa.

Cadaabul qabri ma inkiraayo mana aaminin maad itiri?

Qolada oow Quraanka sheegay qaabkooda maa tahay

"qeeybtaana lama jiro qeeybtaasna kuma raacin.?

Labada dhinac dhana uma badni miyaad weli ileedahay?.

-in aanan waxba kuu qorin ayaa wac neeyd ma is tiri?.

-xogta aan ku siiyay iisoo celi kana masax maan kaaga, intaas waa iska kaftan

**Salli nin ku seexday baan sariir ka dhicin**

Sax & qalad waxeey ahaataba

Waan sagootinayaa qoraalka .

Aqristoow adigana kumaba aan salaamine

Seed eheeyd ma nabadbaa?.

-Rabi dhankiisa ayaan salaan kaaga sidaa.Nabigeena Muxamad ah isaguna salaan iga gudoon boow kusoo dhahay

Muuminiinta in eey salaamaan ayoow codsanayaa

<يٰأَيُّهَا ٱلَّذِينَ آمَنُواْ صَلُّواْ عَلَيْهِ وَسَلِّمُواْ تَسْلِيماً>

هُوَ ٱلَّذِى يُصَلِّى عَلَيْكُمْ وَمَلاَئِكَتُهُ لِيُخْرِجَكُمْ مِّنَ ٱلظُّلُمَاتِ إِلَى ٱلنُّورِ وَكَانَ بِٱلْمُؤْمِنِينَ رَحِيماً

--

إِنَّ ٱللَّهَ وَمَلاَئِكَتَهُ يُصَلُّونَ عَلَى ٱلنَّبِيِّ يٰأَيُّهَا ٱلَّذِينَ آمَنُواْ صَلُّواْ عَلَيْهِ وَسَلِّمُواْ تَسْلِيماً

.

الأحزاب

43-56

-------

# DHAMAAD

*LASOCO QEEYBTA 2-AAD*